

# Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee Minnesota ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore:

## La shaqaynta Carruurta aan Da'da Dugsiga Gaarin ee Barnaamijyada Xarumaha iyo Iskuulka

Mashruucan waxaa suurta geliyey iyadoo la adeegsanayo maaliyad federaali ah, 93.434 - ESSA Deeqda Horumarinta Preschool Preschool-ka Dhalashada illaa Shan (Development Grants Birth through Five). Waxyaabaha ku jira waxaa mas'uuliyadooda leh qorayaasha mana matalaan aragtida rasmiga ah ee Xafiiska Daryeelka Caruurta, Maamulka Caruurta iyo Qoysaska, ama S. Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Maraykanka.

MINNESOTA

# Mahadnaqyo

Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee Minnesota waa mashruuc ay leeyihiin Waaxaha Waxbarashada, Adeegyada Aadanaha iyo Caafimaadka ee Minnesota iyo la-hawl-wadaagyadooda. Boqolaal daneeyayaal ah oo matalayay daryeelka caruurnimada hore iyo barnaamijyada waxbarashada oo kala duwan ayaa bixiyay rayi celin ku saabsan dukumeentiga kartida muhiimka ah ee la soo saaray 2004. Saddex kooxood oo latalin ah ayaa isku soo daray rayi celin waxayna soo saareen saddex nooc: mid loogu talagalay daryeelaya ee waxbaraya dhallaanka iyo socod baradka, mid loogu talagalay dadka daryeelaya carruurta aan da'da iskuulka gaarin (preschool), iyo mid loogu talagalay bixiyeyaasha daryeelka carruurta qoyska.

Waxaan si weyn ugu mahadcelineynaa shaqada iyo wax ku biirinta ay sameeyeen xubnaha soo socda ee kooxaha la-talintu:

**Kooxda La-talinta Preschool-ka (ilmaha aan weli gaarin da'da iskuulka)**

- Sharon Bergen, Minnesota Association for the Education of Young Children
- Katy Chase, Minnesota Licensed Family Child Care Association
- Jeanne Dickhausen, Head Start Collaboration
- Diane Etling, Minnesota Department of Health
- Lora Kussman, Department of Human Services
- Kelly McKown, St Paul College/Access
- Nedra Robinson, St Paul College and Minnesota Association for Early Childhood Teacher Educators
- Cheryl Smoot, Minnesota Department of Health
- Sandra Williams, Minnesota Tribal Resources for Early Childhood Care
- Roz Zuest, Child Care Aware

**Kooxda La-talinta Dhallaanka iyo Socod baradka**

- Ada Alden, Minnesota Association for Family and Early Education
- Michele Dockter, Minnesota Department of Education
- Ann Edgerton, University of Minnesota Child Care Center
- Diane Etling, Minnesota Department of Health
- Michelle Fallon, Minnesota Association for Infant & Early Childhood Mental Health
- Vicki Hawley, Center for Early Education and Development
- Donna Henning, Head Start
- Lora Kussman, Department of Human Services
- Janice LaFloe, Bush Fellow
- Mary Ann Marchel, University of Minnesota, Duluth
- Sandy Masgai, Family Child Care
- Nedra Robinson, St Paul College and Minnesota Association for Early Childhood Teacher Educators
- Mary Santelman, Montessori Training Center

- Shelly Tollefson, Minnesota Association for Education of Young Children
- Cory Woosley, Child Care Aware

**Kooxda La-talinta Daryeelka Carruurta Qoyska**

- Deloris Friske, Family Child Care Provider
- Pat Gentz, Family Child Care Provider
- Jackie Harrington, Family Child Care Provider
- Mary Ksiazek, Family Child Care Provider
- Natalie Marose, Family Child Care Provider
- Sandy Masgai, Family Child Care Provider
- Misty McKinley, Family Child Care Provider
- Mary Muhs, Rasmussen College
- Tammy Oveson, Family Child Care Provider
- Wendy Prokosch, Family Child Care Provider
- Stephanie Reuss, Family Child Care Provider
- Linda Schesso, Family Child Care Provider
- Vicki Shofner, Minnesota Licensed Family Child Care Association
- Shirell Smith Kerney, Family Child Care Provider
- Dana Smith, Minnesota Licensed Family Child Care Association
- Michelle Thole, Family Child Care Provider
- Sheryl Warner, Family Child Care Provider

Intaa waxaa dheer, liiska waxaa la sameeyay iyadoo la aqoonsanayo mawduucyada guud ee laga helay wada-hadallada ay qabteen bareyaasha dhaqan ahaan, juquraafi ahaan iyo barnaamij ahaanba kala duwan ee Minnesota. Kooxaha ka qaybqaatay doodaha dabeecadaha waxaa ka mid ah: macallimiinta dhallaanka, macallimiinta ilmaha aan weli gaarin da'da iskuulka, tababareyaasha, bixiyeyaasha daryeelka carruurta qoyska, bareyaasha bixiyeyaasha waalidka ah, la taliyayaasha caafimaadka dhimirka, shaqaalaha bulshada iyo macallimiinta kulliyadaha tacliinta sare. Mahadnaq gaar ah dhammaan shaqaalaha barnaamijka Head Start ee Community Action Partnership ee Degmooyinka Ramsey iyo Washington in ay ka qaybqaateen.

# Tusmada


**Mahadnaqyo** **2**

**Hordhac** **6**

Nooca Preschool-ka ee Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida 7
Isku dhafka Halbeegyada iyo Kartiyaha 8
Aasaaska 8
Xeerarka Hogaaminaya 9
Habaynta Qaabdhismeedka 10
Tayada Dabeecadda 14
Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida: La shaqaynta Carruurta aan Da'da Dugsiga Gaarin ee Barnaamijyada Xarumahaa iyo Iskuulka 15
Ilaha/Khayraadka 16
2020 Wax ku kordhinta lagu sameeyey Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida 16

**Nuxurka Aagga I: Horumarka Caruurta iyo Waxbarashada** **19**

Halbeegga PELSB 19
Kartiyaha 20

**Nuxurka Aagga II: Waayo aragnimada Waxbarasho ee Korriin ahaan Haboon** **25**

Halbeegga PELSB 25
Kartiyaha 26

**Nuxurka Aagga III: Xiriirka Qoysaska** **43**

Halbeegga PELSB 43
Kartiyaha 43

**Nuxurka Aagga IV: Qiimaynta, Qiyaasidda iyo Ku habboonaysiinta shaqsiga** **50**

Halbeegga PELSB 50
Kartiyaha 50

**Nuxurka Aagga V: Horumarka Taariikhiga ahaa iyo ka Casriga ah ee Waxbarashada Carruurnimada Hore** **56**

Halbeegga PELSB 56
Kartiyaha 56

**Nuxurka Aagga VI: Xirfadle ahaaanshaha** **58**

Halbeegga PELSB 58
Kartiyaha 58

**Nuxurka Aagga VII: Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada** **63**

Halbeegga PELSB 63
Kartiyaha 63

**Nuxurka Aagga VIII: Ku-dhaqan loo marayo Khibrada Caafimaad** **69**

Halbeegga PELSB 69

Kartiyaha 69

**Nuxurka Aagga IX: Daryeel iyo Hab Dhaqan ka Warqaba Dhaawaca Masiibada** **70**

Kartiyaha 71

**Nuxurka Aagga X: La shaqaynta caruurta ku Hadla Luqadaha Badan ee aan gaarin da'da iskuulka iyo qoysaskooda** **80**

Kartiyaha 81

**Liiska Macnaha Erayada** **93**

# Hordhac

Minnesota waxay leedahay taariikh qani ah oo ah bixinta adeegyada joogtada ah/sii socda ee loogu talagalay carruurta iyo qoysaska. Dhacdooyinkii ugu dambeeyay ee gobolka iyo kuwa qaranku ayaa waxay dhiirigaliyeen horumarinta nidaam dhammaystiran oo si fiican la isugu duway oo ah barnaamijyada iyo adeegyada iyada oo ujeedadu tahay in dhammaan carruurtu helaan bilaw wanaagsan ee ay u baahan yihiin si ay ugu guulaystaan iskuulka iyo nolosha.

Hal qodob oo lagama maarmaanka u ah siinta carruurta yaryar khibrado dhiirigelinaya oo kor u qaadaya korriinkooda ayaa ah hubinta in dadka daryeela oo waxbara carruurtu ay yihiin kuwo si wanaagsan u diyaarsan oo warqab ah. Dadka la shaqeeya carruurta yaryar waxay ku yimaadaan boosaskooda shaqo duruufo nololeed oo kala duwan, iyagoo leh heerar waxbarasho oo kala duwan iyo heerar khibrado kala duwan. Nidaamka horumarinta xirfadeed ee Minnesota wuxuu u baahan yahay inuu ahaado mid ballaaran oo loogu adeego kooxdan kala duwan. Tan ugu muhiimsan, waxay u baahan tahay inay bixiso waayo-aragnimo waxbarasho oo wanaajinaysa xirfadaha qofka oo la socodsiisa horumarka cilmi-baarista iyo hababka ugu wanaagsan.

Nidaamka horumarinta xirfada ee Minnesota waxa uu ku salaysan yahay qaab qaran oo aqoonsan tababbarka iyo waxbarashada dhaafsiisan shuruudaha aasaasiga ah ee lagama maarmaanka u ah horumarinta natiijooyinka loogu talagalay carruurta yaryar. Qaabkani waxa uu xuddun u yahay shan waxyaabood oo muhiim ah: aqoonta asaasiga ah; hubinta tayada; wacyigelinta iyo helitaanka; u qalmitaanka, shahaadayinta iyo waddooyinka loo marayo; iyo maalgelinta. Mid ka mid ah yoolalka aasaasiga ah ee nidaamkani waa in la hubiyo in fursadaha waxbarasho ee loogu talagalay dadka la shaqeeya carruurta yaryar ay saldhig u yihiin halbeegyada anshaxa iyo tayada sare.

Qaybta aqoonta ee aasaasiga ah ee nidaamku waxay xooga saaraysaa in bareyaasha daryeelka caruurnimada hore ay u baahan yihiin in lagu qalabeeyo aqoon, karti, qalab iyo kalsooni si ay si wax ku ool ah ula shaqeeyaan carruurta iyo qoysaska. Dadka la shaqeeya carruurta yaryar waa inay si fiican ugu yaqaanaan korriinka carruurta iyo aragtiyaha waxbarashada.

Waxay u baahan yihiin in ayna ogaan oo kaliya inay ogaadaan xikmadda aragtida laakiin sidoo kale hababka iyo xeeladaha lagu ansixiyay cilmi-baaris. Aasaaskan waxa la wanaajiyey marka lagu daro awoodda lagu muujinayo xirfadaha looga baahan yahay shaqada sida goobta lagu sheegay. Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida Minnesota ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore: La shaqaynta Carruurta aan Da'da Dugsiga Gaarin ee Barnaamijyada Xarumahaa iyo Iskuulka waxay si cad u qeexaysaa waxyaabaha laga filayo ee ay bareyaasha carruurnimada hore u baahan yihiin inay ogaadaan iyo waxayna u baahan yihiin inay awoodaan in ay sidaas sameeyaan.

Saddex nooc oo waayo-aragnimada waxbarasho ah ayuu ka kooban yahay nidaamka Horumarinta Xirfadeed ee Minnesota: koorsooyin ku salaysan in lagu helo dhibco (credit); tababar aan dhibco lahayn; iyo sii socoshada horumarinta xirfadeed oo ka kooban waxbarashada xiriirka ku salaysan sida latalinta/hagitaan, tabobarida ama latalinta. Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee halkan lagu sharraxay waxay noqon karaan qaabdhismeed guud oo saldhig u ah dhammaan noocyada khibradaha waxbarasho.

*Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore: La shaqaynta Carruurta aan Da'da Dugsiga Gaarin ee Barnaamijyada Xarumahaa* iyo Iskuulka waxa uu qeexayaa **halbeegyada**, ama waxa laga filayo, ee ku saabsan waxa ay dadka waxbaraya oo daryeelaya carruurta yaryari u baahan yihiin in ay ogaadaan. Waxa kale oo ay sharraxaysaa **kartiyaha** qeexaya muujinta xirfadaha cayiman ee loo baahanyahay. Bareyaashu waxay u muujiyaan kartida siyaabo kala duwan.

**Dukumeentiga waxaa loogu talagalay in loo isticmaalo laba siyaabood oo aasaasi ah:**

1. Kuwa abuuraya ujeedooyinka waxbarasho ee fursadaha waxbarasho oo ay ku jiraan barnaamijyada waxbarashada, kaalmada farsamada iyo tababarka.
2. Waxaa loogu talagalay dadka la shaqeeya carruurta yaryar marka ay qiimaynayaan xirfadahooda oo ay ka shaqeeyaan sidii ay u horumarin lahaayeen.

Intaa waxaa dheer, maamulayaasha barnaamijka, kormeerayaasha shaqaalaha adeega tooska ah, lataliyayaasha caafimaadka iyo shati bixiyaasha ayaa u arki doona dukumeentiga in uu yahay mid faa'iido leh marka ay aqoonsadaan xirfadaha loo baahan yahay oo ay ka caawinayaan inay wax baraan dadka ay la shaqeynayaan.

Iyada oo aan loo eegin booska ama goobta qofka, dadka la shaqeeya carruurta yaryar iyo qoysaska ayaa waxay leeyihiin waxyaabo badan oo ay wadaagaan oo ay u baahanyihiin inay ogaadaan oo ay tahay in ay awoodaan inay sameeyaan. Abuuritaanka Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida, fikir waxaa lagu bixiyey waxyaabahan la wadaago iyadoo isla markaasna la aqoonsanayo xirfadaha gaarka ah ee looga baahan yahay jagooyinka shaqada iyo goobaha qaarkood.

Tusaale ahaan, waxa jira xirfado iyo kartiyo la xiriira la shaqaynta qoysaska, sida samaynta iskaashiga, isdhaafsiga iskaashi, oo ay u baahan yihiin dadka la shaqeeya carruurta da'da iskuulka aan gaarin (saddex ilaa shan sano jir) IYO dhallaanka iyo socod baradka (dhalasho ilaa saddex sano jir Waxaa kale oo jira xirfado khaas ah oo ay u baahan yihiin dadka la shaqeeya carruurta da'da iskuulka aan gaarin, sida aqoonta iyo kartiyaha kuwaas oo gacan ka geysta dhisidda aasaaska akhris-qoraalka iyo xisaabinta. Labada xirfadoodba waxay u baahanyihiin in lagu daro nuqul loo qoray barayaasha dhallaanka iyo socod baradka.

Waxaa suurtogal ah in la soo saaro noocyo dheeraad ah oo ah Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida. Marka la abuuro noocyo dheeraad ah, waa in lagu dadaalaa sidii loo ilaalin lahaa waxyaabahan ay wadaagaan. Noocyo dheeri ah ayaa laga yaabaa in ku daro qaybo kartiyaha xirfadeed ee loogu talagalay dadka qaadanaya doorarka iyo mas'uuliyadaha u baahan waxbarasho dheeraad ah ama waayo-aragnimo dheeraad ah, sida tababare ama maamule.

## Nooca Preschool-ka ee Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida

Dadka daryeela oo waxbaraya carruurta aan da'da iskuulka gaarin waxay u baahan yihiin inay si fiican ugu saleeyaan aqoonta korriinka ilmaha iyo sidoo kale kartiyahaa iyo nuglaanshaha ilmaha aan weli gaarin da'da iskuulka. . Waxay u baahan yihiin inay aqoon u yeeshaan sida qoysasku u koraan oo ay u awood u yeeshaan inay taageeraan xiriirka waalidka iyo ilmaha ee caafimaadka qaba. Intaa waxaa dheer, waxaa jira dhinacyo badan oo u gaar ah muddadan koritaanka ilmaha kuwaas oo u baahan xirfado gaar ah iyo kartiyaha dadka waaweyn ee iyaga la shaqeeya:

- Sanadaha laga bilaabo preschool-ku waxay ka dhigan yihiin xilli korriin iyo horumar degdeg ah. Kobcitaanku waa natiijo isu ururta oo waana natiijada ka dhalata isdhexgalka hiddo wadaha iyo waayo-aragnimada, oo ka bilaabata dhalmada kahor. Laga bilaabo dhalashada, carruurtu waxay si firfircoon uga qaybqaataan koritaankooda maadaama oo ay bartaan inay wax doortaan, ka qaybgalaan oo tarjumaan xitaa waaya-aragnimadoodii ugu horreysay.

- Horumarka mararka qaarkood waxaa lagu sifeeyaa dhinacyada ama qaybaha waxbarashada. Qaybahani waxay u fududeeyaan dadka waaweyn inay ka hadlaan kakanaantaheeda laakiin dhab ahaantii, dhammaan

qaybuhu waa isku xiran yihiin. Awoodo iyo xirfado badan ayaa isku mar koraya inta lagu jiro da'da aan weli gaarin iskuulka Marka ay soo baxayaan awoodahaas iyo xirfadahani, mid kastaa wuxuu saameeyaa horumarka kuwa kale.

- Carruurtu waxay u koraan hab ku salaysan qoyskooda, dhaqamadooda, iyo bulshooyinkooda. Inta ay xubnaha qoysku ay yihiin kuwo muhiim ah saameeyana, xiriirada caruurtu la leeyihiin dadka kale waxay sidoo kale saameeyaan koriinkooda. Kobcinta iyo daryeelka warqabka ah iyo waxbarashada ayaa waxay ka caawisaa carruurta inay yeeshaan xiriir sugan oo aamin ah, taas oo iyaduna fududaysa sahaminta iyo horumarka.
- Wakhtigani waa wakhtigan horumar xooggan sidoo kalena waa wakhti nuglaansho qotodheer. Horumarka waxaa si dhab ah u dhaawici kara aan ahayn keliy daahinta ama naafanimada, laakiin sidoo kale welwelka iyo dhaawaca masiibada daba dheeraada. Daryeelka naxariista kobcinta iyo warqabka ah iyo waxbarashada carruurta ay  koriimadoodu halis ku jiraan ayaa waxay ka caawin kartaa ilmaha inuu yeesho adkeysi iyo xirfadaha loogu baahan yahay guusha iskuulkua iyo nolosha.
- La shaqaynta carruurta yaryar iyo qoysaskooda ayaa waxay keeni kartaa shucuuro badan. Bareyaashu waxay u baahan yihiin inay ka fikiraan dareenkooda, falcelintooda, iyo dabeecadahooda iyo sidoo kale midda dadka kale si ay u noqdaan kuwa ugu waxtarka badan.

## Isku dhafka Halbeegyada iyo Kartiyaha

Qaabdhismeedkani waxa uu muujinayaa is-waafajinta u dhexeeya shatiga Guddiga Barayaasha Xirfadlaha ah iyo Halbeegyada (PELSB) iyo kartiyaaha ugu muhiimsan ee lagu kasbado goobta shaqada. Halbeegyada ayaa qeexaya waxyaabaha laga filayo ee ku saabsan waxa bareyaasha carruurnimada hore u baahan yihiin inay ogaadaan oo ay qeexaan natiijooyinka barashada ee dadka ku jira barnaamijyada horumarinta xirfadeed. Kuwaas waxaa lagu dejiyay Xeerka Maamulka Minnesota ee 8710.3000 oo halkana lagu soo celiyay. Xeerka waxaa ku jira halbeegyada dhallaanka iyo socod baradka, ka hor dugsiga hoose iyo dugsiga hoose. Marka laga hadlayo carruurta dhalashada ilaa fasalka 3, sharcigu wuxuu isticmaalaa "carruurta yaryar." Maaddaama luqadda qaanuunka dib loogu adeegsanayo halkan, waxaad arki doontaa ila erey-bixintan. Dukumeentigu wuxuu diirada saarayaa waxa ay noqon doontaa in lala shaqeeyo carruurta aan weli gaarin da'da iskuulka.

Kartidu waxay qeexaysaa muujinta xirfadaha iyo awoodaha loo baahan yahay si si hufan looga shaqeeyo goobta. Qaabdhismeedkan, kartiyaha waxaa ayaa loo habeeyey si ay si barbar ah ula sinmaan halbeegyada PELSB. Halbeegyada Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada ayaa lagu daray maadaama aysan heerarka PELSB ee aaggan ayna ka jirin.

Halbeegyada iyo kartiyuhu way isku xiranyihiin. Si loo dhimo soo noqnoshada, waxaanu go'aansanay in aanu ku darno kartida halbeeg la xiriira. Kartiyaha ayaa sidoo kale loo safay si jiif ah si ay u muujiyaan horumarka xirfadeed marka barayaashu helaan khibrad. Xirfadaha muhiimka ah ayaa lagu daray; dukumeentiga kuma jiraan xirfad kasta oo qofka goobta jooga uu u baahan karo.

## Aasaaska

Minnesota markii ugu horreysay waxay abuurtay kartiyaha daabacaaddii 2004 *Kartida ugu Muhiimka ah ee Minnesota ee Waxbarashada Carruurnimada Hore iyo Xirfadlayaasha Daryeelka* ee la shaqeeya carruurta dhalashada ilaa siddeed iyo qoysaskooda. Tan iyo markaas, wax badan ayaa laga bartay horumarka maskaxda, xeeladaha waxbarida oo waxtar leh, nafaqada iyo cayilka iyo sidoo kale u adeegida carruurta leh baahiyaha

caafimaad ee gaarka ah iyo baahiyaha dareenka bulshada. Waxa kale oo jiray isbeddelo ku yimi qaab-dhismeedka bulshada iyo goobta carruurnimada hore. Dib u eegistan ayaa loo baahan yahay si loo muujiyo isbeddeladan iyo horumarkan.

Si loo diyaariyo dib u eegistan, boqollaal qof ayaa sahan ra'yi ururin lala sameeyay waxaana la wareystay dhowr kooxood oo isticmaalay dukumeentiga. Rayi celintu waxay muujisay baahida loo qabo kartiyaha caafimaadka oo adag, sharraxaad wanaagsan oo ku saabsan xirfadaha loo baahan yahay si loola shaqeeyo carruurta qaxootiga, muhaajiriinta iyo bulshooyinka Maraykanka ee cusub, kartiyaha la cusboonaysiiyay ee ku salaysan cilmi-baarista ugu dambaysay ee hadda, oo ka kooban dib ugu soo celcelin yar. Rayi celinta muhiimka leh ayaa lagu soo daray daabacaadan. Qoraalada iyo dukumeentiyada kartida ee gobolada kale ayaa dib loo eegay si loo helo aragtiyo dheeraad ah.

Dukumeentiyo dhowr ah ayaa ahaa khayraadka muhiimka ah ee horumarinta qaabdhismeedkan, oo ay ku jiraan: *Tusiyeyaasha Horumarka ee Carruurnimada Hore: Halbeegyada Waxbarashada Carruurnimada Hore ee Minnesota, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar (NAEYC)* Halbeegyada Barnaamijyada Diyaarinta Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore, iyo Hagayaasha Halbeegyada Waxqabadka Caafimaadka iyo Badbaadada Qaranka ee loogu talagalay Barnaamijyada Daryeelka iyo Waxbarashada Carruurnimada Hore. Ka eeg liiska khayraadka dukumeentiyada waxtar leh oo dheeri ah.

# Xeerarka Hogaaminaya

Dhowr mabaadi ayaa haga dukumeentigan.

- Shaqaale aqoon sare leh, xoog shaqosi fiican u diyaarsan ayaa si fiican ugu qalabaysan inay la shaqeeyaan carruurta yaryar waxayna u horseedaa natiijooyin wanaagsan oo caruurtu gaaraan.
- Bareyaashu waxay u baahan yihiin xirfado, aqoon iyo taageero si ay u dhistaand khibrad.
- Xirfadaha, aqoonta iyo taageerada waxaa lagu kasbadaa samaynta khibrado badan oo kala duwan.
- Waaya-aragnimada waxbarashada waxaa ka mid ah fasallada waayo-aragnimada lagu qaato dhibcaha, waayo-aragnimada waxbarashada aan lagu qaadanin dhibcaha, horumarinta xirfadeed oo joogto ah iyo waayo-aragnimo nololeed oo kala duwan.
- Bareyaashu waxay u baahan yihiin fursado ay ku howlgeliyaan wixii ay barteen iyo sidoo kale dib u milicsi shaqsiyeed iyo mid la hagayo si ay u horumariyaan hab dhaqankooda.
- Horumarinta xirfadeed ee qorshaysan ee ula kac ah ayaa ah qayb ka mid ah koritaanka joogtada ah ee shakhsiga iyo horumarka.

## Adeegsiga

Dukumeentigan waxaa loo isticmaali karaa:

- Kor u qaadida caruurnimada hore in ay tahay xirfad leh cilmi la aqoonsanyahay.
- Si loo aqoonsado fikradaha muhiimka ah iyo xirfadaha horumarinta xirfadeed.
- Si loo qorsheeyo ujeedooyinka waxbarasho ee bixinta horumarinta xirfadeed kuwaas oo xoogga saaraya aqoonta gaarka ah iyo kartiyaha.
- Si la isugu-dubbarido oo loo naqshadeeyo nuxurka horumarinta xirfadda si loo fududeeyo wareejinta iyo heshiisyada qeexidda.
- Si loo aqoonsado baahiyaha horumarinta xirfadeed oo loo qorsheeyo tababar koox dad ah, deegaan ama gobol.

- Si loo qiimeeyo bixin hadda ah oo ah dhammaan qaybaha nuxurka iyo heerarka kartida.
- Is-qiimaynta baahiyaha horumarinta xirfadeed oo loo soo saar qorshe shaqsiyeed.
- In la abuuro sharaxaad shaqada.

Qaabdhismeedku wuxuu adeegsada nidaamka bixinta tababbarka aan dhibcaha lahayn ee Waaxda Adeegyada Aadanaha si ay u abaabusho, u aqoonsato oo ay ugu xayeysiiyaan wax bixinta iyadoo la eegayo aagga iyo heerarka. Diiwaanada waxbarashada shaqsiga ee ku yaalla barnaamijka Develop (https://www.developtoolmn.org) waxaa ku jiri doona aagagga nuxurka KCF iyo heerarka uu shaqsigu qaatay markii uu dooranayo inuu samaysto akoon. Qaabdhismeedku waxa kale oo uu wargelin doonaa Qiimaynta Baahiyaha Tababarka Shakhsiyeed ee dib loo eegay (ITNA) taas oo ay hadda isticmaalaan bixiyeyaasha daryeelka carruurtu si ay ugu isqiimayn ugu sameeyaan aqoontooda iyo xirfadahooda awoodaha kala duwan una qorsheeyaan horumarkooda xirfadeed ee sii socda. Qoreyaasha iyo tababarayaasha la ansixiyay waxay isticmaali doonaan qaab-dhismeedka si ay u horumariyaan ujeedooyinka waxbarashada marka ay naqshadaynayaan koorsooyinka. Tababarka ay soo saartay Waaxda Adeegyada Aadanaha waxa lagu salayn doonaa halbeegyada iyo kartida lagu qeexay qaab-dhismeedka. Machadyada Tacliinta Sare (IHE) ayaa mas'uul ka ah hubinta in ardaydu ay aqoon u leeyihiin Halbeegyada PELSB ee ku jira qaab-dhismeedka. Isticmaalka Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ayaa lagu dhiirigelinayaa naqshadeynta koorsooyinka IHE iyo in lagu soo bandhigo dukumeentiga shaqadooda koorsada.

# Habaynta Qaabdhismeedka

Tobanka qaybood ee uu ka koobanyahay (todobada asalka ah iyo labada qaybood ee cusub ee lagu daray 2020) ee u dhigma halbeegyada PELSB ayaa loo isticmaalaa in lagu habeeyo qaabdhismeedka. Meelaha mawduucyada/nuxurku ka kooban yahay waxay caawinayaan sharraxaadda iyo ka doodista halbeegyada iyo kartida; Ficil ahaan u samaynta, aagagga nuxurku way isku xiranyihiin oo midba midka kale ayuu ku tiirsan yahay. Carruurtu way ka faa'iidaan marka dadka waaweyn ee la shaqeeyaa ay wax badan ka bartaan:

- Horumarka/Kobaca iyo Barashada Ilmaha: Baruhu waxa uu fahmaa aragtiyaha horumarka, cilmi baarista iyo hababka ugu wanagsan ee lagu caawinayo caruurta in ay helaan xirfado jireed, bulsho, shucuureed, luqad, garasho iyo xirfado hal abuur leh; waxa uu fahmayaa kala duwanaanshiyaha shakhsiyaadka ah iyo hababka loo maro waxbarashada; waxa uu fahmayaa doorka muhiimka ah ee qoyska, hiddaha dhaqanka iyo bulshada; oo uu fahmayaa cilaaqaadka ka dhexeeya hiddaha dhaqanka, afka, iyo fikirka.
- Waaya-aragnimada Waxbarasho ee Ku Haboon ee Korriinka: Baruhu wuxuu dejiyaa oo ilaaliyaa deegaan badbaado iyo caafimaad leh, oo uu qorsheeyaa oo fuliyaa waayo-aragnimo waxbarasho oo kala duwan oo ku habboon korriinka kuwaaso kor u qaada garashada, bulshayntao iyo shucuurta, jidhka, iyo korriinka hal abuur leh iyo horumar.
- Xiriirka Qoysaska: Baruhu waxa uu aasaasaa oo ilaaliyaa xiriirada wada shaqayneed oo wanaagsan ee ay la leeyihiin qoysaska si loo daboolo baahiyaha carruurta.
- Qiimaynta, Qiyaasta iyo ku Habboonaysiinta Shakhsiga: Baruhu wuxuu eegaa, diiwaan geliya oo qiimeeyaa xirfadaha carruurta si uu u garto meelaha ay ku wanaagsan yihiin, baahiyaha iyo hababka ay wajahaan barashada si loo qorsheeyo hawlaha, isdhexgalka iyo deegaanka ku habboon; waxayna qiimeeyaan oo ay qiyaasaan tayada barnaamijka iyadoo la isku dayo in si joogto ah loo horumariyo barnaamijka.
- Horumarka Taariikhiga ahaa iyo ka Casriga ah ee Waxbarashada Carruurnimada Hore: Baruhu waxa uu fahmayaa sida dhacdooyinka taariikhiga ah iyo saamaynta xaaladaha guud ay u saameeyaan ku hab dhaqanka hadda iyo xaaladaha hadda taagani sida ay u saameeyaan carruurta, qoysaska iyo barnaamijyada.

- Anshaxa Xirfadlenimada: Baruhu waxa uu u arkaa waxbarashada iyo horumarinta joogtada ah dadaal iyo mas'uuliyad soconaya nolosha xirfada shaqo oo dhan; wuxuu ugu adeegaa carruurta iyo qoysaska si xirfad leh; wuxuu iskaashi la sameeyaa dadka kale.
- Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada: Baruhu wuxuu uu dejiyaa oo ilaaliyaa deegaan iyo manhaj hubinaya caafimaadka, badbaadada iyo nafaqada ilmo kasta oo bixiya waayo-aragnimada kor u qaadaysa caafimaadka ugu fiican, badbaadada, nafaqada, jir ahaan, iyo horumarka shucuureed ee bulsho oo taageeraya hab dhaqan caafimaad qaba oo nolosha oo dhan ah.
- Ku dhaqan loo marayo Khibrada Caafimaad: baruhu wuxuu ku adeegsadaa hab dhaqamada waxbarashada ee wax ku oolka ah ee khibradaha kala duwan iyo tusaalaynta barnaamijka.
- Daryeel iyo Hab Dhaqan ka Warqaba Dhaawaca Masiibada.
- La shaqaynta Caruurta iyo Qoysaska ku Hadla Luuqadaha Badan.

Qaybaha nuxurka qaarkood ayaa loo sii kala qaybiyay qaybaha barashada. Tusaale ahaan, aagga nuxurka ee loo yaqaano Waayo aragnimada Waxbarasho ee Korriin ahaan Haboon ayaa lagu sii jebiyay qaybaha barashada oo ay ku jiraan: koriinka  garaadka, horumarka bulshaynta iyo shucuurta, korriinka jirka iyo horumarka hal-abuurka.

Mid kasta oo ka mid ah aagagga nuxurku/mowduucyadu wuxuu ka kooban yahay saddex heer oo kartiyaha ah. Heer kastaa waxa ku jira oo uu ku sii dul dhisanyahay kartiyaha heerkii ka horeeyay. Heerarku waxay qeexayaan horusocodka xirfadaha halkii ay ka qeexi lahaayeen heerarka waxbarashada. Sida ay carruurtu ugu koraan heerar shakhsi ahaaneed ee ay ugu xoog badan yihiin meelaha qaarkood ee horumarka ah, baruhu waxay isku arki doonaan heerar kartiyeed oo kala duwan iyadoo ku xiran awooddooda, waxbarashadooda hadda iyo waaya-aragnimadooda. Marka ay Barreyaashu qiimeeyaan xirfadahooda, waxay heli doonaan meelo ay horumariyaan. Dib u milicsigan waxa loo isticmaali karaa in lagu sameeyo qorsheyaasha horumarinta xirfadeed. Heerarku waa:

**Heerka 1: Wuu Sahmiyaa** - Dadka ku heerka daahfurka/sahamintu waxay ku cusub yihiin goobta carruurnimada hore ama waxay ku cusubyihiin fikrad carruurnimada hore ah. Heerkan, dadku waxay eegaan ama wax ka bartaan dadka waaweyn ee kale marka ay la shaqeeyaan oo ay la dhaqmaan carruurta; Waxay u fiirsadaan carruurta si ay marka horeba indhahooda ugu bartaan waxa ay carruurtu yihiin iyo waxa ay tahay in ay ka filaan iyaga; waxayna la hadlaan xubnaha qoyska si ay wax badan uga bartaan qoyska iyo dhaqanka ilmo kasta.. Barayaashani waxay sahaminayaan fikradaha waxayna bilaabayaan inay aqoonsadaan tilmaamayaasha iyo qaybaha korriinka ilmaha iyo sidoo kale kartiyaha ay u baahan yihiin si ay si wax ku ool ah ugu daryeelaan oo wax u baraan dhallaanka/socod baradka.

Dadka heerkan joogaa waxay caadi ahaan ku tiirsan yihiin habraacyada iyo habraacyada loo qoray sida farsamayaqaanka. Waxay u baahan yihiin taageero iyo jihayn inta ay baranayaan inay wax ka qabtaan caqabadaha maalinlaha ah, si dib loogu milicsado waxa ay arkaan iyo si ay u  bartaan inay ku xiririyaan indha-indheyntooda fahamka hadda jira iyo hababka ugu wanaagsan.

***Sheekada Tara:*** *Tara waxa ay ka shaqaynaysaa xarun lagu daryeelo carruurta kadib sannadkeedii kowaad ee kulliyadda. Waxay tiri, "Wakhti wanaagsan ayaan ku qaadanayaa inaan barto carruurta oo aan la ciyaaro. Inta lagu jiro ciyaarta xorta ah marka qaar ka mid ah carruurtu aysan garaneynin waxa la sameeyo, waxaan u bilaabaa inay sameeyaan waxyaabo aan xasuusto inaan jeclaa inaan sameeyo. Baraha aan la shaqaynayo waxa uu haystaa hawlowaxqabadyo badan oo waxtar leh. Ma aha oo kaliya carruurtu in ay yaqaanaan waxa la sameeyo inta u dhaxaysa hawlaha ama in ay u diyaargaroobaan qadada laakiin waxaan dareemayaa inaan garanayo waxaan sameeyo si aan u caawiyo. Waxaan daawadaa baraha aan la shaqeeyo caruurta oo dhib ku qabta in ay wada ciyaaraan ama in ay macsalaameeyaan waalidkood wax badan ayaan ka baranayaa iyada. Aad bay u deggan tahay oo had iyo jeer waxay ka caawisaa carruurta sidii ay ula qabsan lahaayeen. Waxaan jeclahay daawashada carruurta marka ay sahaminta ka sameynayaan dibadda ama aagga sayniska. Aad bay u fiicantahay marka ay daahfur cusub sameeyaan. Waxaad wajigooda ka dheehan kartaa farxadda!"*

**Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa -** Baraha ku jira heerka labaad waxay yaqaanaan waxa laga filayo carruurta marka ay joogaan heerarka kala duwan ee koritaanka iyo sida kor loogu qaado waxbarashada. Waxay bilaabayaan inay diiradda saaraan baahida gaarka ah ee carruurta. Waxay sameeyaan xallinta badan oo dhibaatooyinka ah   heerkan marka loo eego heerka koowaad,oo iyaga oo helaya taageero iyo hagitaan, waxay ka fikiraan khibradahooda iyo waxqabadkooda si ay u horumariyaan hab dhaqankooda. Barayaasha ku jira heerkani waxay la wadaagaan macluumaadka xubnaha qoyska wax ku saabsan qiimaynta iyo sida ay ugu xirantahay agabka iyo hawlaha la bixiyo si kor loogu qaado koritaanka. Wuxuu aqoonsadaa kala duwanaanshaha shakhsi ahaaneed ee carruurta waxayna uga jawaabaan si habboon; Wuxuu hubiyaa in carruurtu badbaado qabaan, caafimaad qabaan, oo ku raaxaysanayaan waayo-aragnimada wakhtiga cuntada iyaga oo si fiican u nafaqaysan; wuxuu hubiyaa in goob dhaqan iyo luqad ahaanba warqab ah; oo uu ka qayb qaataan hawlaha horumarinta xirfadeed.

***Sheekada Joelle:** JJoelle waxay tiri, "Hadda oo aan dhaafay aasaaska, waxaan in badan diiradda saari karaa ilmo kasta. Waxaan ogahay hawlo badan waxaanan ku beegi karaa waxa ilmuhu u baahan yahay inuu barto. Waxaa ii fududaaneysaa in aan wax ka beddelo qorshahayga maalinta si aan u sahamiyo waxa uu ilmuhu xiiseeyo.  Hadda waxaan runtii ka fikiraa ficilladayda iyo hawlaha aan qabto iyo in ay shaqeeyeen; Waxaan ka fikiraa sida ay carruurtu iiga falceliyaan iyo hawlaha aan bixiyo; oo waxaan ka fikirayaa waxa aan samayn lahaa si aan wax uga beddelo haddii aan mar kale sameeyo wax la mid ah. Waxaan dareemayaa inaan haysto habayn qol oo runtii u shaqaynaysa hawlaha aan rabo inaan bixiyo iyo si carruurtu isu dhexgalaan. Aad ayaan ugu sii kalsooni badnahay in aan la hadlo, la wadaago macluumaadka iyo xalinta dhibaatada waalidka marka loo eego markii aan bilaabay. Waxaan jeclahay inaan aado fasalka horumarinta xirfadda oo hadda waxaan doortay kuwa ku habboon waxyaabo gaar ah oo aan ku shaqaynayo. Waxaan ku biiray urur xirfadleyaal ah waxaanan jeclahay in aan aado shirarkooda."*

**Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaaa -** Barayaasha heerkan ayaa aad ugu lug leh go'aan gaarista xirfadda. Barayaashani waxay naqshadeeyaan deegaankooda iyo khibradahooda waxbarasho. Waxay si miyirqab leh ugu jawaabaan carruurta oo ay la qabsadaan qorshahooda. Waxay ku tusaaleeyaan, hagaan oo baraan dadka waaweyn ee kale ee goobta carruurnimada hore. Waxay qaadaan mas'uuliyadda in ay ula socdaan cilmi-baarista, iyaga oo ku xiriirinaya oo waafajinaya akhriskooda iyo hababka ugu wanaagsan. Bareyaasha naqshadeeya oo hoggaamiya waxay sii wadaan inay dejiyaan yoolalka horumarkooda xirfadeed (shahaadada CEU, sertifikeetyo, iwm.). Mas'uuliyadaha aasaasiga ah ee barayaasha heerkan waxaa ka mid noqon kara: qiimaynta, doorashada manhajka, hogaaminta iyo falanqaynta qiimaynta iyo isticmaalka macluumaadkan si loo hago manhajka iyo waxbarista. Waxay la xiriiraan oo ay iskaashadaan qoysaska si ay u helaan fikrado iyo aqoonta carruurta. Barayaashani waa kuwo aqoon u leh howl-wadaagyada bulshada si ay isugu dubbaridaan adeegyada carruurta haddii loo baahdo. Waxay isticmaalaan habab rasmi ah iyo kuwo aan rasmi ahayn si ay u qiimeeyaan una horumariyaan barnaamijka.

***Sheekada Lisa:*** *Lisa waxay tidhi, "Sanadihii la soo dhaafay, waxaan soo qaatay tiro hawlo iyo fikrado ah oo aan ka soo qaatay manhajyo kala duwan. Waxaan ka fikirayaa markii aan bilaabay waxaan u baahday inaan u raaco tilmaamaha si tallaabo tallaabo ah ama waxqabadyo. Hadda waxaan kala soo bixi karaa waxa ugu fiican waxa aan bartay ama in aan sameeyo ama wax ka beddelo goobta. Sababtoo ah waxaan helay xeelado iyo fikrado hawleed kala duwan, waxaan si ka sii dabacsan oo hal abuur leh u dabooli karaa baahiyaha isbeddelaya ee shakhsiyaadka iyo kooxdayda. Isla sidaas oo kale ayaa run u ah u fiirsashada iyo duubista. Waxaan bartay dhowr qalab oo hadda waxaan sameeyay wax aniga ii shaqeeya. Waxaan xasuustaa, inta wax ee aan ka bartay dadka kale bilowgii xirfadeyda, waxaana dareemayaa in la joogo wakhtigii aan dib u caawin lahaa xirfada shaqo. Markaa waxaan bilaabay inaan baaro mabaadi'da waxbarashada dadka waaweyn si aan ula wadaago waxaan bartay anigoo baraya dadka kale."*

## Tayada Dabeecadda

Aqoonta iyo xirfadaha loo baahan yahay waxaa dheer, in bareyaasha ugu waxtarka badani ay leeyihiin dabeecado tayo gaar ah leh. Tayada dabeecadaha ayaa lagu tilmaamay inay yihiin u janjeeritaanka ama u leexsanaanta in loo dhaqmo dhaqmo siyaabo gaar ah. Tayada dabeecadahani waxay saameeyaan sida dadku ula dhaqmaan dadka kale. Kuma jiraan liiska halbeegyada ama kartiyaha sababtoo ah waxaa loo tixgeliyaa "xirfado jilicsan" oo adkaan kara (laakiin aan ahayn kuwo aan macquul ahayn) in la baro iyo/ama la cabbiro. Astaamahani waa muhiim in la aqoonsado waana la xoojin karaa. Dhawr, laakiin aan dhammaantood ahayn, ayaa hoos ku taxan oo loogu talagalay in qofku naftiisa dib ula milicssado.

Liiska waxaa la sameeyay iyadoo la aqoonsanayo mawduucyada guud ee laga helay wada-hadallada ay qabteen bareyaasha dhaqan ahaan, juquraafi ahaan iyo barnaamij ahaanba kala duwan ee Minnesota. Kooxaha ka qaybqaatay doodaha dabeecadaha waxaa ka mid ah: macallimiinta dhallaanka, macallimiinta ilmaha aan weli gaarin da'da iskuulka, tababareyaasha, bixiyeyaasha daryeelka carruurta qoyska, daryeel bixiyeyaasha waalidka ah, la taliyayaasha caafimaadka dhimirka, shaqaalaha bulshada iyo macallimiinta kulliyadaha tacliinta sare. Inkasta oo kooxaha dhaqan ahaan kala duwani ay isticmaaleen kelmado isku mid ah si ay u qeexaan dabeecadaha la rabo, waxay u qeexeen habab kala duwan oo mid walba lagu muujiyo.

- Waa mid naxariis badan, u nugul baahida dadka kale iyo dareen shucuur ahaan la heli karo.
- Wuxuu leeyahay dareen kaftan wuxuuna noqon karaa mid cayaar badan.
- Waxa uu leeyahay xiisayn caruurnimada oo kale.
- Waxa uu noqon karaa mid dabacsan, hal-abuur leh oo khayraad waxtar leh.
- Wuxuu waydiiyaa su'aalo, muujiyaa xiisaha waxbarashada wuxuu ka tarjumayaa dhaqamada hadda jira si ay u wanaajiyo hab dhaqanka.
- Wuxuu jecel yahay carruurta wuxuuna aaminsan yahay inay awood u leeyihiin inay wax bartaan.
- Wuxuu qabaa rajo marka uu la kulmo caqabado.
- Wuxuu iskaashi la yeeshaa dadka kale.
- Wuxuu aad u xiiseeya la shaqaynta carruurta yaryar.
- Wuxuu u muujiyaa ixtiraam naftiisa iyo dadka kaleba.
- Wuxuu qiimeeyaa oo qaddariyaa kala duwanaanshaha; waa qof aan la yaabin.
- Wuxuu muujiyaa daacadnimo heer sare ah.
- Wuxuu u furan yahay fikradaha iyo qaaciidooyinka cusub.

Intaa waxaa dheer, dhowr caadooyin shaqo oo guud ayaa ka caawiya qofka inuu si guul leh ula shaqeeyo carruurta yaryar:

- Waa mid wakhtiga ilaaliya oo masuul ah.
- Wuxuu daryeelaa nadaafadda shakhsi ahaaneed oo u labbistaa si ku habboon hawsha.
- Wuxuu filaya oo ku jawaabaa dabacsanaan isbeddelka joogtada ah.
- Wuxuu la shaqeeyaa dadka ay wada shaqeeeyaan iyo in uu yahay xubin koox ahaan.
- Aqbalaa rayi celinta wax ku oolka ah oo uu wax ka bartaa khaladaadka.
- Si habboon ayuu wax u dhegaystaa oo uga jawaaba.

# Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore: La shaqaynta Carruurta aan Da'da Dugsiga Gaarin ee Barnaamijyada Xarumahaa iyo Iskuulka

Noocani wuxuu diiradda saarayaa halbeegyada iyo kartiyahaa ay u baahan yihiin bareyaasha kula shaqeeya carruurta aan weli gaarin da'da iskuulka goobo kala duwan waxaana laga yaabaa inay adeegsadaan dad badan oo ay ku jiraan: barnaamijyada waxbarashada diyaarinta, bixiyeyaasha waxbarashada sii wadista, iyo shaqaalaha barnaamijyada kala duwan. Noocyada barnaamijka waxaa ka mid ah barnaamijyada iskuulka ku saleysan sida Waxbarashada Carruurnimada ee Qoyska ee Carruurnimada, Early Head Start, xarumaha daryeelka carruurta iyo guryaha daryeelka carruurta qoyska. Iyadoo aan loo eegin goobta ama magaca shaqada, dadka la falgala carruurta dugsiga aasaasiga ah aan gaarin ayaa bixiya daryeel oo wax bara. Halbeegyada PELSB ayaa waxay isticmaalaan ereyga "macallin" si ay u muujiyaan dadka qaata shatiga waxbaridda.

Erayga "baraha" waxaa loo isticmaali doonaa sharaxaada kartiyaha si loogu daro dadka ka shaqeeya goobo kala duwan ee leh heerarka kala duwan ee waxbarashada. Erayga "qoysaska" waxaa ku jira waalidiinta, mas'uuliyiinta,

walaalaha, awoow/ayeeyada, xubnaha qoyska ee korinta ku meelgaarka ah, iyo dadka kale ee ku lug leh daryeelka iyo waxbarashada ilmaha. "Waalidiinta iyo dadka masuulka ka ah" waxaa loo isticmaali doonaa in lagu tixraaco kuwa sharci ahaan mas'uulka ka ah ilmaha.

*Noocyada dheeraadka ah ee qaabdhismeedka waxaa ka mid ah: Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida Minnesota ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore: La shaqaynta dhallaanka iyo socod baradka;Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida Minnesota ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore: La shaqaynta Carruurta Yaryar ee Guryaha Daryeelka Carruurta Qoyska; iyo Xirfadaha Muhiimka ah ee Da'da Iskuulka ee Minnesota loogu talagalay Xirfadlayaasha la shaqeeya da'da iskuulka iyo Daryeelka Dhalinyarada ee la shaqeeya carruurta da'doodu tahay 5 ilaa 12 iyo qoysaskooda*. Kuwaas waxaa laga heli karaa bogga Waxbarashada Hore ee websaydka Waaxda Waxbarashada ee Minnesota. Halbeegyada iyo kartiyaha maamulayaasha iyo tababarayaasha ayaa ka baxsan xadka mashruucan.

Dhammaan dadka isticmaalaya dukumeentigan waa inay fahmaan baahida carruurta ka imanaysa dhaqan, luqado, dhaqan-dhaqaale iyo deegaano kala duwan. Dood dheer ka dib, waxaa la go'aamiyay in xirfadaha loo baahan yahay in lagu daro carruurta ka soo jeeda asal kala duwan iyo sidoo kale kuwa naafada ah iyo qaba baahiyaha daryeelka caafimaadka in lagu dhex dari doono dukumeentiga oo dhan. Mawduucyadani waxay lagama maarmaan u yihiin dhammaan dhinacyada shaqada ee carruurta iyo qoysaska.

## 2020 Ilaha/Khayraadka

Dukumeentigani waa mid ka mid ah khayraad badan oo loo abuuray daryeel bixiyeyaasha Minnesota. Waxay la jaan qaaday agabka kale ee ay soo saareen Waaxaha Waxbarashada , Adeegyada Aadanaha iyo Caafimaadka ee Minnesota oo ay ku jiraan halbeegyada waxbarashada carruurnimada hore ee Minnesota, qalabka hagaha xirfada ee kombiyuurka lagaga qaybqaadanayo, diiwaanka shabakada xirfada shaqo iyo horumarinta xirfadda. Si aad u heshid acluumaad dheeri ah, khayraad iyo hagitaan, la xiriir Xarunta Horumarinta Xirfadlayaasha iyo Daryeelka ka Warqaba Carruurta ee Minnesota iyo Waaxda Shatiyada ee Waxbarashada ee Minnesota.. Khayraad dheeraadka ah ayaa ku jira dhamaadka dukumeentigan.

# 2020 Wax ku kordhinta lagu sameeyey Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida

Iyada oo ku salaysan rayi celin ka timid xirfadlayaasha daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada ee ku jira xirfada shaqo iyo isbeddelada uu sameeyey Gobolka Minnesota, saddex qaybood oo dheeraad ah ayaa lagu daray si loo wanaajiyo dukumeentiga Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida. Qaybahani waxay hagi doonaan oo ka caawin doonaan xirfadlayaasha daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada aqoonta iyo xirfadaha ay u baahanyihiin si ay carruurta iyo qoysaska u siiyaan waxbarasho tayo leh: Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka, Habdhaqan iyo Daryeel warqab u ah Dhaawaca masiibada, iyo La shaqaynta Caruurta iyo Qoysaska ku Hadla Luqadaha Badan.

### Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

Dhaqanku waa muraayada uu qofkasta oo bini aadam ahi ku fahmo kulana xiriiro adduunka. Waxay saamaynaysaa fahamka qofka ee wakhtiga, xiriirka, iyo sida loo wajaho hawsha gacanta ku jirta. Xirfadle carruurnimada hore ahaan waa lama huraan iyo mas'uuliyaddeena inaan fahamno muraayadda hiddaha dhaqameed ee qofka iyo sidoo kale carruurta iyo qoysaska aan kula kulanno la dhaqankeena isdhexgalka maalinlaha ah.

Nidaamyada Aqoonta Qoyska iyo Bulshada ayaa ah hababka lagu gudbiyo dhaqanka oo lagu xaqiijinta. Nidaamyadan waxaa ka mid ah siyaabaha carruurta, iyo qoysaska iyo bulshooyinka ay ku dhex jiraani, u bartaan oo ay ula macaamilaan adduunka. Tusaale ahaan, horumarinta dabeecadda, caddaaladda iyo mas'uuliyaddu waa hantida muhiim ah oo nolosha oo dhan joogaya oo ka dhex jira nidaamka aqoonta qoyska iyo bulshada waxayna si xooggan ula xiriiraan sinnaanta.

Fikradahani waxay si weyn uga dhex muuqdaan nolosha carruur badan oo midab leh, waxayna ogaadaan marka qiyamka sinnaantu uusan ka dhex muuqan waayo-aragnimada xirfadlayaasha carruurnimada hore. Arrimaha sinnaanta ayaa waxay soo muuqdaan horraanta nolosha da' yarta iyada oo soo maraysa waaya-aragnimada waalidiinta, awoow/ayeyaasha, walaalaha waaweyn, xubnaha qoyska ee kale, iyo asxaabta. Aqoonta iyo kartida la xiriirta nidaamyadan aqoonta qoyska iyo bulshada ayaa udub dhexaad u ah ku daritaankan waxayna ku dhex jiraan dhammaan qaybaha mawduuca/nuxurka ee dukumeentiga.

## Daryeel iyo Hab Dhaqan ka Warqaba Dhaawaca Masiibada Nuxurka Aagga IX

Dhammaan carruurta iyo qoysaska ka qaybqaata daryeelka caruurnimada hore iyo waxbarashada iyo adeegyada kale ee carruurnimada hore waxay la yimaadaan waayo-aragnimadooda iyaga si la mid ah sida ay sameeyaan dadka bixiya adeegyadan. Waayo-aragnimadaasi waxay qaabeeyaan fahamka iyo rajada laga filayo cilaaqaadka, in dunidu tahay meel ammaan ah oo lagu sahamiyo oo wax lagu barto, in aynu nahay u qalano daryeelka iyo caawinta, iyo sida ay u korayso maskaxda carruurta yaryar. Nasiib darro, dhaawaca masiibada iyo heerarka sarreeya ee welwelka ayaa dhammaantood ah kuwo aad u badan waxayna si xun u saamayn karaan korriinka maskaxda, oo ay ku jiraan awoodda aan u leenahay in aan maaamulno shucuurta dareenka iyo hab dhaqanka, xiriirrada iyo waxbarashada. Marka loo eego cilmi-baarista ay samaysay Waaxda Caafimaadka ee Minnesota in ka badan kala bar dadka reer Minnesota waxay la kulmeen ugu yaraan hal ACE (tilmaamaysa toban waayo-aragnimo carruurnimo oo suurtogal ah inay buuxiso qeexida dhaawaca masiibada), oo kuwa, in ka badan kala bar ayaa la kulmay laba ama in ka badan oo ah ACE. Carruurta yaryar ayaa ah kuwa ugu nugul saamaynta xun ee dhaawaca masiibada iyo kuwa ugu adkeysiga badan saamaynahan xun marka uu jiro cilaaqaad ka celinaya; sababtoo ah ilmaha yar maskaxdiisu si xawli ah ayey u koraysaa.

Xirfadlayaasha carruurnimada hore waxay la falgalaan carruurta yaryar iyo waalidkood wakhti xasaasi ah, keliya aan ahayn oo kaliya horumarka carruurta, laakiin sidoo kale horumarinta xiriirka waalidka iyo ilmaha. Ka warqabka saamaynta dhaawaca masiibadu ku leedahay korriinka iyo hab dhaqanka carruurta ayaa waxay fududayn kartaa awoodda daryeelayaasha si ay u tarjumaan dabeecadda iyo ka jawaabista siyaabaha kor u qaadaya adkaysiga iyo kabashada, aan ahayn oo kaliya carruurta iyo waalidkood, laakiin sidoo kale naftooda.

Aagga Mawduuca ee Daryeelka iyo Dhaqanka Warqabka u ah Dhaawaca masiibada waxaa loogu talagalay in lagu qeexo halbeegyada iyo waxyaabaha laga filayo ee ku saabsan aqoonta iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah dadka la shaqeeya dhallaanka, carruurta yaryar, qoysaskooda iyo daryeel-bixiyeyaasha laga yaabo inay la kulmeen dhaawaca masiibada. Dhaqannada ugu wanagsan waa inay ahaadaan kuwo korriinka warqab ka ah, warqab ka ah dhaawaca masiibada iyo mid xiriirka ku saleysan si kor loogu qaado adkeysiga carruurta, iyo sidoo kale adkeysiga qoysaskooda iyo daryeel bixiyeyaasha. Ka warqabka calaamadaha dhaawaca masiibada ee carruurta, qoysaska iyo nafteena ayaa kor u qaadaysa awoodeena in aan si wanagsan ugu daboolno baahiyaha dadka aan la shaqayno iyada oo loo marayo xiriirada taageerada iyo u gudbinta ilaha bulshada ee dhaawaca masiibada.

## La shaqaynta Caruurta iyo Qoysaska ku Hadla Luuqadaha Badan Nuxurka Aagga X

Si la mid ah sida dhammaan carruurta yaryar, carruurta ku hadasha luqadaha badan waxay soo galaan goobta daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada iyagoo leh aqoon badan. Waxay horeba wax badan ugu barteen guriga iyo bulshadooda dhexdeeda. Waxay diyaar u yihiin inay waxbarashada ku sii wataan deegaan daryeel iyo jawaab celin leh. Barayaashu waxay fahmaan in marka lala shaqaynayo dhammaan carruurta, gaar ahaan carruurta ku hadasha luqadaha badan, ay lama huraan tahay:

- In la fahmo baahidooda waxbarasho ee gaarka ah
- In laga fikiro sida caqiidada shakhsi ahaaneed ee ku saabsan dhaqanka iyo luqadda ay ula mid noqon karto, ama uga duwanyihiin, kuwa carruurta iyo qoysaska aan u adeegno.
- In loo doodo ka qaybgelinta xoogga ku salaysan, oo diiradda saaraya luqadda
- In kor loo qaado sinnaanta, deegaan dhaqanahaan ku habboon dhammaan carruurta ku hadasha luqadaha badan
- In uu yaqaano sida loogu xirmo WIDA Halbeegyada ama Halbeegyada  Horumarinta Luqadda carruurnimada Hore ee Minnesota iyo Tilmaamayaasha Horumarka ee Carruurnimada Hore ee Minnesota
- La shaqaynta Caruurta iyo Qoysaska Luqadaha badan ku hadla oo ah aag/mawduuc cusub ayaa ka caawinaysa xirfadlayaasha daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada inay fahmaan waxa ay u baahan yihiin inay ogaadaan oo ay awoodaan inay sameeyaan marka ay la shaqaynayaan carruurta luqadaha badan ku hadasha iyo qoysaskooda oo ay u adeegsadaan Waxqabadyada Muhiimka ah ee Sannadaha Hore ee WIDA in ay yihiin barta ay barayaashu ka galaan inta ay ka fikirayaan shaqadooda.

Ku daritaanada waxaa la suurta geliyey iyadoo la adeegsanayo maaliyad federaali ah, 93.434 - ESSA Deeqda Horumarinta Preschool Preschool-ka Dhalashada illaa Shan (Development Grants Birth through Five).

Ka qaybqaatayaasha wax ku biirinta 2020:

*Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka & hab-dhaqanka*

- Betty Emerita, Development & Training, Inc
- Richard Chase, Daraasaad Wilder

*Daryeel & Hab Dhaqan ka Warqaba Dhaawaca Masiibada*

- Jane Ellison, LMFT, IMH-E (IVC)
- Michelle Fallon, LICSW, IMH-E Mentor, Infant and Early Childhood Mental Health Consultant.

*La shaqaynta Caruurta iyo Qoysaska ku Hadla Luuqadaha Badan.*

- Patricia Blanco, M. Ed. Khabiirka Waxbarashada Xirfadlaha WIDA
- Lorena Mancilla, PhD Agaasimaha WIDA ee Sanadaha Hore

1

# Nuxurka Aagga I: **Horumarka Caruurta iyo Waxbarashada**

## Halbeegga PELSB

***Baraha dhallaanka ama da'da socod baradka, da'da aan weli gaarin dugsiga aasaasiga ah iyo carruurta da'da dugsiga aasaasiga ah waa in uu fahmayo horumarka iyo waxbarashada caruurta.***

Baruhu waa inuu fahmo:

- saldhigga cilmi baarista iyo hab dhaqanada ugu wanaagsan waxbarashada carruurnimada hore.
- horumarka jireed, bulsho, shucuureed, luqadda, garasho, iyo hal-abuurka carruurta yaryar laga bilaabo dhalashada ilaa da'da siddeed.
- sida ay carruurta yaryar ugu kala duwan yihiin korritaankooda iyo waxbarashadooda, iyo hababka taageeraya kala duwanaanshahan.
- aragtiyada ugu waaweyn ee korriinka iyo waxbarashada carruurnimada hore iyo saamaynta ay ku leeyihiin u adeegsiga carruurta yaryar laga bilaabo dhalashada ilaa da'da siddeed iyo qoysaskooda.
- fikradaha "ka mid ahaanshaha" iyo "isku xirnaanta qoyska" in ay muhiim u yihiin horumarka carruurta yaryar.
- in carruurta sida ugu wanaagsan loo fahmo iyada oo loo eegayo xaaladda qoyska, dhaqanka, iyo bulshada.
- xiriirka ka dhexeeya dhaqanka, luqadda, iyo fikirka iyo shaqaynta luqadda hooyo ee horumarinta carruurta yaryar.

# Kartiyaha

## A. Fahamka Koritaanka Carruurta

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| I.A.1 | Wuxuu aqoonsadaa dhammaan dhinacyada horumarka oo ay ku jiraan jir ahaan, bulshaynta iyo dareenada/shucuureed, haqaynta garaadka (qorshaynta, abaabulka, iyo la socodka dabeecadaha ku jihaysan yoolka), garashada, hal-abuurka iyo luqadda | Wuxuu doortaa oo adeegsadaa dhaqanka ugu wanaagsan ee hadda jira, cilmi-baarista ku saleysan, iyo dhaqamada hiddaha dhaqanka ee ku habboon si loo dhiirrigeliyo aasaaska horumarka oo ay ku jiraan jir ahaan, bulsho ahaan iyo shucuur ahaan, shaqaynta garaadka, garashada, hal-abuurka, iyo luqadda | Wuxuu naqdiyaa oo u faahfaahiyaa shaqaalaha la shaqeey iyo xubnaha bulshada aragtiyaha waaweyn iyo hababka ugu wanaagsan ee cilmi-baaris ku salaysan iyo dhaqamada hiddaha dhaqanka ee ku habboon ee la xiriira caafimaadka carruurta iyo korriinka jirkooda, luqadda, akhris-qoraalka, garashada, bulshaynta iyo shucuurta, shaqaynta garaadka iyo horumarka hal-abuurka |
| I.A.2 | Wuxuu qeexaa sida horumarka hal meel ahu uu u saameeyo horumarka meelaha kale | Wuxuu bixiyaa tusaalayaasha xiriirka ka dhexeeya caafimaadka carruurta iyo korriinka jirkooda, luqadda, akhris-qoraalka, garashada, bulshaynta iyo shucuurta, iyo horumarka hal-abuurka | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha la shaqeeya, qoysaska iyo bulshada aragtiyaha waaweyn iyo cilmi baarisyo la xiriirta saamaynta ay horumarka hal meel ahi ku leedahay meel kale iyo sidoo kale sida kala duwanaanshiyaha horumarka ay u saameeyaan qoyska, dhaqanka, luuqada iyo deegaanku |
| I.A.3 | Wuxuu aqoonsada horumarku ku yimaado qaabab la saadaalin karo kuwaas oo lagu aqoonsaday halbeegyada waxbarashada carruurnimada hore | Wuxuu bixiyaa tusaalayaal horumarka jireed, bulsho, shucuureed, garasho iyo luqadeed ee lagu aqoonsaday halbeegyada waxbarashada hore | Wuxuu u sharaxaa halbeegyada waxbarashada carruurnimada hore shaqaalaha la shaqeeyaan, qoysaska iyo xubnaha bulshada |
| I.A.4 | Wuxuu aqoonsadaa waxbarashada ku jirta ciyaarta dhexdeeda, isdhexgalka dadka kale, iyo marka ilmuhu sahamiyo agagaarka | Wuxuu bixiyaa tusaalayaal waxa ay carruurtu ku bartaan ciyaarta, isla falgalka dadka kale iyo sahaminta agagaarkooda | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha la shaqeeya, qoysaska iyo bulshada ujeedada laga leeyahay hababka ula kaca ah ee hababka waxbaridda ee caddaynta ku salaysan oo ay ku jiraan cilaaqaadka badbaado ah, xasilloon, kobcin leh, ciyaarta, isdhexgalka kooxaha tirada yar, xalinta dhibaatada, iyo sahaminta. |

## B. Fahamka Waxyaabaha Saameeya Koritaanka Carruurta

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| I.B.1 | Wuxuu qeexayaa sida waayo-aragnimada carruurnimada hore ee carruurta yaryar ay u saameeyaan koritaankooda iyo horumarkooda | Wuxuu sheegaa muhiimada waayo-aragnimada carruurnimada hore iyo cilaaqaadka ilmaha iyo waalidku u leedahay horumarinta maskaxda iyo aasaaska shaqo fulinta (qorshaynta, abaabulka, iyo la socodka dabeecadaha ku jihaysan yoolka)¬ | Wuxuu falanqeeyaa oo adeegsadaa fahamka aragtida hadda jirta iyo cilmi-baarista lagu sameeyo kor u qaadista waxbarashada iyo horumarka carruurta |
| I.B.2 | Wuxuu qeexaa sida carruurtu ugu koraan heerkooda shakhsiyeed iyo marka la eego macnaha guud ee dhaqankooda iyo qoyskooda | Wuxuu bixiyaa tusaalayaal ku saabsan sida dhaqanka, luqadda iyo xoogga qoyska iyo caqabaduhu u saameeyaan horumarinta xirfadaha | Wuxuu falanqeeyaa saamaynta/duufsiga qodobada deegaanka, sifooyinka qoyska, hiddaha dhaqanka iyo luqadaha, iyo hababka kala duwan oo wax lagu barto ay ku leeyihiin horumarka wuxuuna ka adeegsadaa macluumaadka si uu u sameeyo yoolal shakhsiga loo dejiyey oo wax lagu baro |
| I.B.3 | Waxa uu aqoonsan yahay in carruurtu ay u baahan yihiin saldhig adag xagga luqadda guriga iyo dhaqanka | Wuxuu muujiyaa muhiimada ay leeyihiin luqada guriga iyo dhaqanku isagoo siinaya fursado waxbarasho oo luqadda guriga ah si kor loogu qaado horumarka guud | Wuxuu milicsadaa oo uu aqoonsadaa muhiimada luqadda guriga iyo dhaqanka in ay saldhig u yihiin barashada iyo barashada luqadaha dheeraadka ah; waxa uu horumariyaa howlo waxqabadyo barasho oo taageeraya oo ku dhex daraya afka iyo dhaqanka guriga |
| I.B.4 | Wuxuu aqoonsadaa ku muujinta dabeecadaha ee welwelka iyo dhaawaca masiibadaa | Wuxuu bixiyaa tusaalooyin cawaaqibka koritaaneed ee ka yimaada welwelka iyo dhaawaca masiibada; qodobda difaaca, adkeysiga iyo horumarinta caafimaadka maskaxda; iyo muhiimada ay leeyihiin cilaaqaadka daryeel naxariis le oo lala yeesho qof qaan-gaar ah | Wuxuu ka bartaa qoyska iyo xubnaha bulshada doorka welwelku kuu ka qaato horumarka carruurta yaryar |

## C. Aqoonsiga Kala Duwanaanshaha Shakhsiyeed

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| I.C.1 | Wuxuu u fiirsada kala duwanaanshaha horumarka iyo kartida | Wuxuu qeexaa marxaladaha horumarka carruurta wuxuuna sharxayaa baaxadda ballaaran ee horumarka habboon | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo bulshada in ay jiraan horumar balaadhan oo haboon oo kala duwan iyo in heerarka shakhsiyeed ay inta badan saameeyaan qoyska, dhaqanka, luqadda iyo deegaanku |
| I.C.2 | Wuxuu aqoonsadaa oo aqbala qaababka waxbarasho ee shakhsiyeed, asalka dhaqameed iyo kartida dhammaan carruurta | Wuxuu fuliyaa dhaqamada ixtiraamka leh oo ay ku jiraan qaabka barashada shakhsiyeed ee ilmaha, asalka dhaqameed, iyo awoodaha waxbarasho | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa oo qorsheyaa isaga ooku salaynaya qaababka barasho ee shakhsiga, macluumaad sax ah oo ku saabsan sooyaalka dhaqameed ee carruurta ee kooxda iyo kartida ee ilma kasta |

## 2020 D. Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| I.D.1 | Wuxuu aqoonsadaa dhammaan dhinacyada horumarka oo ay ku jiraan jir ahaan, bulshaynta iyo dareenada/shucuureed, haqaynta garaadka (qorshaynta, abaabulka, iyo la socodka dabeecadaha ku jihaysan yoolka), garashada, hal-abuurka iyo luqaddu ay ku xiriirsanyihiin hiddaha dhaqanka Fiiri dukumentariga filimka, "Babies," ([http:// www.focusfeatures. com/ babies](http://www.focusfeatures.com/babies))<br><br>a) Wuxuu qeexayaa sida rajada la filayo ee korriinka khaas ahi uu si weyn ugu kala duwanaan karo dhaqamada kala duwan<br><br>b) Wuxuu aqoonsadaa oo magacaabaa qaar ka mid ah filashooyinka kobaca hab dhaqan ahaan ku salaysan ee ka horumarsan halbeegyada Maraykanka ee loo tixgeliyo in ay "caadi" ka yihiin gudaha dhaqankaas | Wuxuu doortaa oo adeegsadaa dhaqanka ugu wanaagsan ee hadda jira, cilmi-baarista ku saleysan, iyo dhaqamada hiddaha dhaqanka ee ku habboon si loo dhiirrigeliyo aasaaska horumarka oo ay ku jiraan jir ahaan, bulsho ahaan iyo shucuur ahaan, shaqaynta garaadka, garashada, hal-abuurka, iyo luqadda<br><br>Wuxuu ku daraa dhaqamada waxtarka leh ee ku salaysan cilmi baarista ee ay soo saareen ama ay aqoonsadeen cilmi-baarayaasha midabka leh **ee asal ahaan dhaqanka kasoo jeeda**<br><br>a) Wuxuu diyaariyaa waayo-aragnimo waxbarasho oo u sahlaysa carruurta ka kala socota bulshooyinka dhaqamada kala duwan inay ku dul dhistaan waxyaalaha ku wanaagsan iyo rajooyinka laga qabo koritaanka ee ay aqoonsadeen cilmi-baarayaal asal ahaan dhaqanka kasoo jeeda<br><br>b) Wuxuu bixiyaa tusaalayaal siyaabaha laga filashooyinka korriinka dhaqan ahaan ay ugu dhexjiraan manhajka iyo xeeladaha waxbaridda labadaba wuxuuna wax uga beddelaa habkooda si habboon si ay ugu habboonaato baahiyaha ilma kasta | Wuxuu la abuurtaa dadka ay goobta ka wada shaqeeyaan, qoysaska iyo xubnaha bulshada la qabsiga lagu sameeyo aragtiyaha waaweyn iyo hababka ugu wanaagsan ee cilmi-baaris ku salaysan iyo dhaqamada hiddaha dhaqanka ee ku habboon ee la xiriira caafimaadka carruurta iyo korriinka jirkooda, luqadda, akhris-qoraalka, garashada, bulshaynta iyo shucuurta, shaqaynta garaadka iyo horumarka hal-abuurka¬<br><br>a) Wuxuu sharaxa cilmi-baarista ku salaysan waxa lagu xoog badanyahay ee ku saabsan korriinka ee ay sameeyeen cilmi-baarayaasha midabka ah marka uu la kulmo waalidiinta iyo shaqaalaha oo uu weydiiyaa fikrado ku saabsan sidii loogu dari lahaa barnaamijka<br><br>b) Wuxuu naqshadeeyaa, talo soo jeedin u sameeyaa, oo u doodaa tababbarka horumarinta xirfadeed ee filashooyinka korriinka dhaqan ahaan ku salaysan iyo sida loo aqoonsado loona dhiso |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| I.D.2 | Wuxuu dhiirigeliaa horumarinta dabeecadda ee ilmo kasta, oo ay ku jiraan qiyamka sida daacadnimada, aaminimada, ixtiraamka, caddaaladda, iyo masuulnimada<br><br>Wuxuu u fiirsadaa oo uu qeexi karaa sida qiyamka gaarka ah loogu muujiyay xaalado dhaqameed kala duwan | Wuxuu horumariyaa oo taageeraa dhisidda dabeecadda isaga oo xoojinaya qiyamka carruurta iyo qoysaska kala duwan ee ku jira goobta fasalka<br><br>Wuxuu diyaariyaa waxqabadyo waxbarasho oo muujinaya sida qiyamka loogu muujiyo xaalado dhaqameed kala duwan | Wuxuu tusaaleeyaa oo ku tababaraa horumarinta dabeecadda, iyagoo la kaashanaya qoysaska si ay u samaystaan xeerarka fasalka iyo barnaamijka ee muujinaya qiyamkan |
| I.D.3 | Wuxuu aqoonsadaa xirfadaha bulsheed ee ay qiimeeyaan bulshooyinka dhaqamada kala duwan<br><br>Wuxuu dhiirigeliyaa xirfadaha bulshada ee carruurtu ay u baahan doonaan inay si wanaagsan u **dhexgalaan shabakadaha dhaqanka iyo bulshada** | Wuxuu dhiirigeliyaa oo taageeraa xirfadaha bulshada ee carruurtu ay u baahan doonaan inay si wanaagsan u dhexgalaan shabakadahooda dhaqanka iyo bulshada<br><br>Wuxuu diyaariyaa waxqabadyada fasalka oo ay ku jiraan muujinta iyo ka doodista xirfadaha bulsho ee gaarka ah ee goobaha dhaqameed kala duwan | Wuxuu muhiimada siiyaa la wadaagista macluumaadka shaqaalaha iyo asxaabta shaqada siyaabo lagu aqoonsado loona horumariyo xirfadaha bulshada ee carruurta bulshooyinka dhaqamada kala duwan ay u baahan doonaan inay si wanaagsan u dhexgalaan shabakadahooda dhaqanka iyo bulshada |
| I.D.4 | Wuxuu aqoonsadaa oo magacaabaa **qiyamka asaasiga** ah ee ay haysaan qoysaska ka soo jeeda bulshooyinka dhaqamada kala duwan iyo siyaabaha kala duwan ee dhaqan ahaan loo sheegi karo qiyam isku mid ah | Wuxuu doortaa xeelado kala duwan oo lagu taageero laguna dhiirigaliyo carruurta marka ay muujinayaan qiyamka qoyska ama bulshada | Waxay la abuurtaa shaqaalaha, asxaabta shaqada, iyo qoysaska xeelado kala duwan oo loogu talagalay in qiyamka loogu soo daro barnaamijka iyo in loo dabaaldego |
| I.D.5 | Wuxuu qeexaa astaamaha carruurta yaryar ee aagga juqraafiyeed iyo kala astaamaha kala soocaya kooxaha dhaqameed ee kala duwan<br><br>Wuxuu ku **dhaqmaa aqoonta dhaqamada** kala duwan iyo xirfadaha si fiican ula shaqeeya carruurta ka soo jeeda dhaqamo kala duwan | Wuxuu u qorsheeyaa waxqabadyada fasalka kuwaas oo ka imanaya waayo-aragnimada carruurta ka soo jeeda haqamada kala duwan ee lagu matalo fasalka<br><br>Wuxuu tusaaleeyaa aqoonta dhaqamada kala duwan iyo xirfadaha si fiican ula shaqeeya carruurta ka soo jeeda dhaqamo kala duwan | Wuxuu la abuuraa waalidiinta iyo shaqaalaha xeelado wax ku ool ah oo lagu wadaagayo macluumaadka kooxaha dhaqama ee ku jira barnaamijka iyo aqoonsashada fikradaha wanaagsan<br><br>Wuxuu hagaa oo tababaraa shaqaalaaha ka socda dhaqamada kala duwan iyo xirfadaha si fiican ula shaqeeya carruurta ka soo jeeda dhaqamo kala duwan |

2

Nuxurka Aagga II:

# Waayo aragnimada Waxbarasho ee Korriin ahaan Haboon

## Halbeegga PELSB

***Barahacarruurta yaryar waxay qorsheeyaan, naqshadeeyaan, oo fuliyaan khibradaha waxbarasho ee ku habboon korriinka.***

### A. Abuuritaanka Khibrad Barasho Wanaagsan: Guud ahaan

Baruhu waa inuu fahmo:

- korriinka garashada, bulshaynta iyo shucuurta, korriinka jir iyo hal-abuurka iyo sida horumarka iyo waxbarashadu isugu xiran yihiin.
- koriinka dhallaanka iyo socod baradka iyo saamaynta ay ku leedahay waxbarashada iyo korriinka carruurta dugsiga aasaasiga ah aan gaarin.
- sida loo abuuro oo loo ilaaliyo deegaan jir ahaan iyo nafsi ahaan badbaado leh iyo jawi waxbarasho caafimaad leh oo loogu talagalay carruurta dugsiga aasaasiga ah aan gaarin taas oo:
    - in uu qiro saamaynta uu goobtu, jadwalku, hawlaha joogtada ahi iyo kala beddelku/ kala guurku uu ku leeyahay carruurta oo u isticmaala khibradahan si kor loogu qaado horumarka iyo waxbarashada carruurta.
    - in uu qiro cawaaqibka koritaaneed ee ka yimaada welwelka iyo dhaawaca masiibada, qodobda difaaca iyo adkeysiga iyo horumarinta caafimaadka maskaxda iyo muhiimada ay leeyihiin cilaaqaadka taageeradu.
    - aqoonsada caafimadka aasaasiga ah, nafaqada iyo maaraynta badbaadada carruurta yaryar, oo ay ku jiraan hababka ku saabsan jirrooyinka carruurnimada iyo cudurrada faafa (eeg sidoo kale Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada).
    - Isticmaalka hababka qiimaynta caafimaadka ee ku haboon iyo sida loogu taliyo u gudbinta caafimaadka bulshada iyo adeegyada bulshada ee ku haboon marka loo baahdo (eeg sidoo kale Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada).
    - Aqoonsada calaamadaha murugada niyadeed, xadgudubka iyo dayaca ilmaha ee carruurta yaryar oo ay ogaadaan mas'uuliyadda iyo hababka looga warbixiyo xadgudubka ama dayacaadda la ogyahay ama la tuhunsan yahay.
- Sida loo qorsheeyo loona hirgeliyo manhaj ku habboon hab dhaqannada waxbaridda ee ku salaysan aqoonta korriinka ee carruurta dugsiga aasaasiga ah aan gaarin, bulshada, iyo hadafyada manhajka iyo nuxurka oo ay ku jiraan sida loo isticmaalo:

- hababka koriinka ku haboon oo ay ku jiraan ciyaarta, mashruucyada kooxo tiro yar, su'aalo waydiin furan, wada hadal kooxeed, xalinta dhibaatada, wax ku barashada iskaashiga iyo waayo-aragnimada waydiinta si ay u caawiyaan carruurta horumarinta xiisaha, xaliyaan dhibaatooyinka, iyo go'aano u qaataan.
- aqoonta taxanaha horumarka si loo abuuro loona hirgeliyo waayo-aragnimo waxbarasho oo isku dhafan oo macno leh iyadoo la adeegsanayo fikradaha carruurta, baahiyaha, xiisaha, dhaqanka iyo waayo-aragnimada guriga.

## Kartiyaha

1. Abuuritaanka Deegaan Barasho Wanaagsan (Sidoo kale eeg: Kor u qaadida Horumarka Shucuurta Dareenka)

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.A.1.1 | Wuxuu la dhisaa cilaaqaad wanaagsan ilmo kasta; wuxuu muujiyaa kalgacal jireed oo ku jira gudaha xuduudaha xirfadeed ee ku habboon | Wuxuu abuuraa oo uu ilaaliyaa xiriir daryeel oo togan oo uu la yeesho ilma kasta | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha la shaqeeeya, qoyska iyo xubnaha bulshada muhiimadda ay leedahay samaynta cilaaqaad diiran oo ammaan ah oo lala yeesho carruurta |
| II.A.1.2 | Wuxuu xaqiijiyaa ixtiraamka loo hayo oo ka warqabaa dhammaan dhinacyada barnaamijka, carruurta naafada ah, carruurta leh baahiyaha daryeel caafimaad oo gaarka ah, iyo kuwa ka soo jeeda asal dhaqameed iyo afaf kala duwan | Wuxuu xaqiijiyaa ka mid ahaaanshaha, dhammaan dhinacyada barnaamijka, carruurta naafada ah, carruurta leh baahiyaha daryeel caafimaad oo gaarka ah iyo kuwa ka soo jeeda asal dhaqameed iyo afaf kala duwan | Wuxuu qiimeeya, qiyaasaa oo si joogto ah u wanaajiya deegaanka si loo hubiyo in ay dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba ay ka warqab tahay oo ay kor u qaadayso ixtiraamka kala duwanaanshaha |
| II.A.1.3 | Wuxuu raacaa jadwalka maalinlaha ah iyadoo la aqoonsanayo muhiimada baahida gaarka ah ee ilmo kasta | Wuxuu qorsheeyaa jadwalka hawlo la saadaalin karo oo u ogolaanaya hawlaha gudaha iyo dibadda | Wuxuu qiimeeya, qiyaasaa oo si joogto ah u soo qaataa jadwalada hawlaha caadiga ah si ay u taageerto baahiyaha carruurta ee dhaqdhaqaaqa, kicinta dareenka, iyo hawlaha gudaha iyo dibadda |
| II.A.1.4 | Wuxuu ka jawaabaa baahida hurdo, cunto iyo jimicsi ee ilmo kasta | Wuxuu aqoonsadaa, u qorsheeyaa ugana jawaabaa ilmo kasta wax cunistiisa iyo habka hurdada iyo sidoo kale dookhooda raaxada | Wuxuu abuuraa hawlo joogto ah iyo wax qabadyo debecsan oo ku filan in ay daboolaan baahiyaha jireed ee nasashada, nadaafadda, musqusha, iyo nafaqada ee ilma kasta |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.A.1.5 | Wuxuu ku dhiirigeliyaa carruurta inay keli keli u dhexgalaan caruurta kale iyo koox yar ahaan iyo koox weynba marka ay sahaminayaan, tijaabinayaan, iyo xalinayaan dhibaatada | Wuxuu siiyaa carruurta waxqabadyo macne leh, gacan ku qabasho ah oo taageera oo ku celceliya xirfadaha cusub ee ay barteen, wuxuu dhiirigeliyaa sahaminta iyo tijaabinta | Wuxuu dhisaa jawi waxbarasho oo u ogolaanaya carruurta inay wax doortaan, ka qaybqaataan khibradaha shaqsi ahaan, koox yar ahaan iyo koox weynba marka ay sahaminayaan, tijaabinayaan, iyo xalinayaan dhibaatada |
| II.A.1.6 | Wuxuu aqoonsadaa oo raacaa waxa ilmuhu jecelyahay | Wuxuu diyaariyaa waayo-aragnimo waxbarasho ee ku habboon dhaqan ahaan iyo korriin ahaanba taasoo ku dhisan xiisaha ilmaha | Wuxuu abuuraa waayo-aragnimo waxbarasho oo ku haboon oo loogu talagalay koriinka shaqsiyaadka iyo kooxda isaga oo isticmaalaya macluumaadka ku saabsan baahiyaha/xiisaha, luqadda iyo dhaqanka, iyo waaya-aragnimada guriga |
| II.A.1.7 | Wuxuu aqoonsadaa in ilmo kasta oo koox ku jiraa uu ku jiro heer korriin oo shakhsi ahaan u isaga u gaar ah | Wuxuu did u milicsadaa kala duwanaanshaha Wuxuu dib u milicsadaa kala duwanaanshaha u dhexeeya heerka korriinka ee ilmaha iyo da'dooda; wuxuuna u waafajiyaan filashooyinka iyo qorshayaasha si waafaqsan | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha iyo qoysaska qodobada badan ee saameeya kartida, korriinka iyo hab dhaqanka ilmaha |
| II.A.1.8 | Wuxuu weydiiyaa su'aalo oo uu u sharaxaa welwelka ku saabsan horumarka carruurta kormeeraha; wuxuu ilaaliyaa sirta ilmaha iyo qoyska | Wuxuu aqoonsadaa kala duwanaanshiyaha kartida iyo horumarka ee muujin kara baahida loo qabo in fiiro gaar ah loo yeesho wuxuuna soo jeedinayaa u gudbin | Wuxuu tilmaamayaa horumarka aan ahayn heerka caadiga ee la xiriira jidhka, luqadda, garashada, horumarka shakhsi ahaaneed iyo bulsheed iyo wax curinta wuxuuna bilaabaa gudbinta ku habboon |
| II.A.1.9 | Wuxuu raacaa talooyinka Akadeemiyada Caafimaadka Carruurta ee Maraykanka wixii ku saabsan wakhtiga shaashadda ee loogu talagalay carruurta inta ay ku jiraan barnaamijka carruurnimada hore | Wuxuu hagaa wakhtiga shaashadda ee carruurta ka weyn 24 bilood isaga oo hubinaya inay xaddidan tahay, firfircoonaan iyo waxyaabo beddelaad ayuu bixiyaa | Wuxuu abuuraa xeerarka barnaamijka ee ku saabsan isticmaalka habboon ee warbaahinta, softiweerka iyo tignoolajiyada |

## B. Kobcinta Horumarka Garashada

Baruhu waa inuu fahmaa xeeladaha lagu qiimaynayo heerka soo baxaya ee korriinka garashada ee ilmaha aan weli gaarin dugsiga aasaasiga ah iyo sida loo isticmaalo macluumaadkan si loo dejiyo yoolalka horumarinta garashada shakhsi ahaaneed iyo qaabaynta khibradaha waxbarasho ee ku habboon korriinka kuwaas oo:

- fududaynaya helitaanka xirfado si loo kasbado, si loo habeeyo oo loo isticmaalo macluumaadka siyaabo si sii kordhaysa u adag.
- abuuraya waayo-aragnimo awood u siinaya ilmaha aan weli gaarin dugsiga aasaasiga ah inay u isticmaalaan ciyaarta iyaga oo ah abaabule ahaan inta u dhaxaysa helitaanka iyo isticmaalka macluumaadka.
- sii balaarinaya fikirka iyo waxbarashada carruurta oo una gudbiyaa heerar shaqo oo ka sii sarreeya.
- ka caawinaya carruurta inay ciyaaraan, qiimeeyaan, did u milicsadaan, dib u eegaan, oo ay ku sii dul dhistaan waaya-aragnimadooda.
- u ogolaanaya carruurta inay dhisaan is-fahamka ama cilaaqaadka ka dhexeeya walxaha, dadka iyo dhacdooyinka.
- dhiirigelinya isticmaalka xirfadaha dhismaha iyo xisaabinta.
- dhiirigelinaya horumarinta luqadda iyo xirfadaha wada hadalk/isgaarsiinta.
- dhiiri geli isticmaalka iyo dhismaha xirfadaha akhris-qorista.
- wuxuu ogolaadaa carruurta inay dhisaan aqoonta adduunka, in ay u maamulaan shayada si ay u yeeshaan saamaynta ay rabaan oo ay u fahmaan xiriirka sababta iyo saamaynta.

1. Kor u qaadista/dhiiri gelita xiisaha

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.B.1.1 | Wuxuu ka qaybqaata sahaminta firfircoon ee alaabada si loo dhiirigaliyo xiisaha | Wuxuu siiyaa carruurta fursado ay ku waydiiyaan su'aalo, jawaabo u helaan oo ay u habeeyaan macluumaadka iyada oo loo marayo sahamin firfircoon | Wuxuu kordhiyaa fikirka carruurta isagoo ka caawinaya inay fiirsadaan oo soo ururiyaan macluumaadka, in ay weydiiyaan su'aalo oo ay saadaaliyaan |
| II.B.1.2 | Wuxuu u fiirsadaa danaynta iyo xiisaha ilmaha ee dadka, walxaha iyo deegaankooda oo uu u sii dhisaa xiisaha | Wuxuu ku dhiirigeliyaa carruurta inay tijaabiyaan, xaliyaan masalada oo ay bartaan sababta iyo saamaynta | Wuxuu dhisaa waxqabadyo u ogolaanaya carruurta inay ku fahmaan adduunkooda tijaabinta iyo xallinta masalooyinka |
| II.B.1.3 | Wuxuu ka caawiyaa carruurta inay gartaan sababta iyo saamaynta marka ay wax qabtaan | Wuxuu u daadihiyaa carruurta fursado ay ku bartaan sababta iyo saamaynta marka ay ciyaarayaan oo ay ku tijaabinayaan walxaha | Wuxuu dhisaa waxqabadyo ka caawiya carruurta inay wax ka beddelaan walxaha si ay u bartaan sababta iyo saamaynta |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.B.1.4 | Waxay si daacad ah oo xushmad leh uga hadlaan waxyaabaha ay iskaga midka yihiin iyo waxyaabaha ay kala duwanaanta ee ay carruurtu ku arkaan dadka, qoysaska, iyo bulshada dhexdeeda | Wuxuu siiyaa carruurta fursado ay ku bartaan naftooda, qoyskooda, luqadaha ay ku hadlaan dadka ku jira barnaamijka iyo bulshadu | Wuxuu u abuuraa fursado ay carruurtu ku bartaan danaha/xiisaha, caadooyinka, luqadaha, dhaqamada, iyo dalalka ay ka soo jeedaan qoysaska kale ee ku jira barnaamijka iyo bulshadu |
| II.B.1.5 | Wuxuu ka qaybqaata hawl maalmeedka si kor loogu qaado barashada dabiiciga iyo sayniska | Wuxuu tusaaleeyaa xiriirka togan ee dabiiciga oo siiyaa fursado carruurta si ay ula falgalaan waxyaabaha dabiiciga ah iyo deegaanka | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo la-hawlgalayaasha bulshada muhiimadda ay leedahay kobcinta xiriirka lala yeesha dabiicadda iyo bannaanka |

2. Dhiirigelinta Wada hadalka/Isgaadhsiinta

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.B.2.1 | Wuxuu aqoonsadaa oo uu ka jawaabaa isku dayga hadalka ah iyo midka aan hadalka ahayn ee carruurtu isku dayaan ah inay wada xiriiraan/ hadlaan | Wuxuu fududeeyaa wada xiriirka/hadalka afka hadalka ah iyo ka aan hadalka ahayn ee ay la yeeshaan dadka waaweyn caruurta kale, oo ay ku jiraan fursadaha loogu talagalay carruurta si ay uga qayb qaataan ku wada sheekaysiga luqadda guriga iyo waayo-aragnimada. | Wuxuu dhisaa cilaaqaad wanaagsan oo dhexmara carruurta leh xirfado hadalka/ xiriirka oo kala duwan waxayna ku dhiirigeliyaan inay la hadlaan dadka waaweyn iyo carruurta kale |
| II.B.2.2 | Wuxuu ka qaybqaata wada hadallada horay iyo gadaal ah ee carruurta ee ku saabsan noloshooda gudaha iyo dibadda barnaamijka caruurnimada hore | Wuxuu adeegsadaa eray bixin habboon, naxwaha iyo qaab-dhismeedka jumladaha oo habboon marka uu uga sheekeynayo ficillada carruurta yaryar iyo marka uu la hadlayo carruurta waaweyn | Wuxuu tusaaleeyaa adeegsiga noocyada kala duwan ee ereyada iyo qaab-dhismeedka jumladaha si uu u ballaariyo xirfadaha luqadda ee carruurta ee isticmaalaya erayada si ay wada xiriiraan |
| II.B.2.3 | Wuxuu aqoonsadaa in da'yarta Bartayaasha Labada Luqaddood (DLL) ay u baahan yihiin inay maqlaan oo lagu taageero inay ku wada xidhiidhaan horumarinta luqadda guriga iyo horumarinta luqadda Ingiriisiga. | Si ulakac ah ayuu ugu jawaabaa Bartayaasha Labada Luqadood (DLL) isagoo adeegsanaya xeelado ku dhiirigeliya DLL inay dareemaan kalsooni inay bartaan luqadooda hooyo iyo luqad cusub | Wuxuu ku dabaqaa cilmi baarista hadda jirta iyo fikradaha isticmaalka luqadda, barashada luqadda iyo horumarinta luqadda labaad oo ay ku jirto adeegsiga luqadaha guriga ee howlaha meelo u gaarka ah |

3. Dhisidda Aasaaska Akhris-qoraalka iyo Barashada Tirooyinkan

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.B.3.1 | Wuxuu aqoonsadaa oo uu ku sii dul dhisaa ciyaarta xisaabta si dabiici ahaan ah uga dhex dhacda carruurta | Wuxuu qorsheeyaa waayo-aragnimada barashada ee siinaysa carruurta fursado ay ku matalaan fikradaha xisaabeed oo ay u sameeyaan xiriiro | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa cilmi-baarista hadda jirta iyo hababka ugu wanaagsan ee baridda iyo barashada xisaabta |
| II.B.3.2 | Wuxuu ku dhiirigeliyaa carruurta inay bartaan xisaabta hore oo ay ku jiraan lambarada iyo xisaabinta, qaababka iyo ogaanshaha cabirrada goobta, qaababka, cabbirka iyo isticmaalka xisaabta si ay u sameeyaan macnaha macluumaadka iyadoo la siinayo agab iyo khibrado ay ka mid yihiin kuwa ka caawiya carruurta inay sahamiyaan sida qaababka kala duwani ugu habboon yihiin weelasha. | Wuxuu bixiyaa jawi waxbarasho oo qani ku ah xisaabta oo dhiirigeliya sahaminta tirooyinka iyo xisaabinta, qaababka iyo ogaanshaha cabirrada goobta, qaababka, cabbiraadda iyo falanqaynta xogta ama isticmaalka xisaabta si loo sameeyo macnaha macluumaadka | Wuxuu qaabeeyaa oo siiyaa qoysaska agabka xisaabta iyo macluumaadka |
| II.B.3.3 | Wuxuu yaqaanaa oo adeegsadaa ereyada xisaabta, sida erayada "ka badan", "ka yar" "ka korraysa", "ka hoosaysa", 'ka dheer', magacyada qaababka iyo tirooyinka | Wuxuu tusaaleeyaa luqadda xisaabta iyadoo la isticmaalayo su'aalo iyo erayada xisaabta | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo la-hawlgalayaasha bulshada muhiimadda ay leedahay isticmaalka wada hadalku si loo dhiso aqoonta xisaabta iyo xirfadaha fahamka |
| II.B.3.4 | Wuxuu ka qayb qaataa ciyaarta ereyada iyo dhawaaqa, heesida, akhriska iyo sheeko ka sheekaynta | Wuxuu adeegsadaa xeelado kala duwan si uu u soo bandhigo ciyaarta kelmadaha, heeso, wax akhris iyo sheeko kaga sheekayn luqada guriga iyo luqadaha kale | Wuxuu hindisaa hawlo akhris-qoraal oo ku hawlgeliya carruurta barashada ciyaarta ereyga iyo dhawaaqa, akhrinta iyo sheeko ka sheekaynta iyadoo la adeegsanayo aqoonta hababka barashada luqadda koowaad iyo labaad |
| II.B.3.5 | Wuxuu tilmaamaa calaamadaha qoran oo ku daabacan deegaanka | Wuxuu diyaariyaa deegaan qani ku ah luqadda oo ay ku jiraan agabka ku qoran luqadaha ka turjumaya bulshada. | Wuxuu daadihiyaa fahamka xiriirka ka dhexeeya erayada lagu hadlo iyo kuwa daabacan |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.B.3.6 | Wuxuu ka qayb qaataa hawlaha qorista iyo sawiridda soo baxaya ee carruurta | Wuxuu bixiyaa fursadaha loogu talagalay qorista iyo sawiridda ee soo baxaya | Wuxuu ku soo daraaa noocyo kala duwan oo qoraal ah, sawirid ah iyo agabka farshaxanka oo loogu talagalay carruurta si ay u kala doortaan odhaahda dhammaadka furan |
| II.B.3.7 | Wuxuu fuliyaa hawlo akhris iyo akhris-qoraal ee soo baxaya oo kala duwan | Wuxuu fududeeyaa xiisaha carruurta ee daabacaadda, u fiirsashada dhawaaqyada, wada sheekaysiga, aqoonta xarfaha iyo erayada wuxuuna isku xiraa akhris-qoraalka iyo luqadda | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha la shaqeeeya, qoysaska iyo xubnaha bulshada dhaqamada xoojinaya oo kor u qaada horumarinta akhriska iyo akhris-qoraalka ee soo baxaya |

## C. Kobcinta Horumarka Bulshaynta iyo Dareenka

Baruhu waa inuu fahmaa xeeladaha lagu qiimaynayo heerka soo baxaya ee korriinka horumarinta bulshaynta iyo dareenka ee ilmaha aan weli gaarin dugsiga aasaasiga ah iyo sida loo isticmaalo macluumaadkan si loo dejiyo yoolalka horumarinta bulshaynta iyo dareenka shakhsi ahaaneed iyo qaabaynta khibradaha waxbarasho ee ku habboon korriinka kuwaas oo:

- abuuraya jawi ay ka jiraan is-dhexgal warqab ah oo la saadaalin karo.
- qaabaynaya fasalka si kor loogu qaado isdhexgalka, cilaaqaadka  wax dhisida togan ee u dhexeeya iyo carruurta dhexdooda.
- kor u qaadaya xiriirada caafimaadka qaba ee lala yeesho faca.
- dhisaya dareenka ka nid ahaanshaha, amniga, qiimaha shakhsi ahaaneed, iyo isku kalsoonaanta xagga waxbarashada ee ilmo kasta.
- u ogolaanaya dhisidda aqoonta bulshada, sida iskaashiga, caawinta, gorgortanka, iyo la hadalka dadka kale si loo xalliyo dhibaatooyinka.
- fududeeya horumarinta is-aqbalitaanka nafeed, is-xakamaynta iyo u jawaabista bulshada ee carruurta iyada oo la adeegsanayo farsamooyinka hagitaanka oo wanaagsan.
- kor u qaadaya fahamka carruurta, aqbalaadda iyo qaddarinta kala duwanaanshaha aadanaha iyadoo ay ugu wacan tahay arrimaha bulshada, dhaqanka, jirka ama qodobada korriinka.

## 1. Samaynta Xiriir Badbaado, Xasilooni, Cilaaqaad naxariis Korineed leh oo Kobcinaya Horumarka Bulshaynta iyo Dareenka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.1.1 | Wuxuu la samaystaa xiriir aamin ah, warqab ah oo wuxuuna ka caawiyaa ilmo kasta inuu dareemo in la aqbalay | Wuxuu abuuraa dareenka kalsoonida iyo ka mid noqoshada kooxda carruurta ah | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa oo horumariyaa dhaqamada, isdhexgalka iyo hawlaha loogu talagalay in lagu horumariyo dhisidda cilaaqaadka |
| II.C.1.2 | Wuxuu muujiyaa joogtaynta, sii waddida iyo ka jawaab celinta marka ay taageerayaan horumarka shucuureed ee carruurta | Wuxuu bixiyaa jawi waxbarasho oo la saadaalin karo oo ka jawaabaya taageerada horumarka shucuureed | Wuxuu soo saaraa xeerar iyo habraacyo ka caawiya ilaalinta joogtaynta daryeelka iyo waxbarashada |
| II.C.1.3 | Wuxuu aqoonsadaa in cilaaqaad ammaan ah, xasiloon, oo daryeel naxariis leh uu bixin karo difaac ka dhan ah saamaynta welwelka iyo/ama dhaawaca masiibada oo daba dheeraada | Wuxuu bixiyaa cilaaqaad ammaan ah, xasiloon, oo daryeel naxariis u leh carruurta la kulma welwelka iyo/ama dhaawaca masiibada | Wuxuu siiyaa qoysaska taageero iyo macluumaad ku saabsan adeegyada bulshada marka ay qoysasku la kulmaan welwelka iyo/ama dhaawaca masiibada |
| II.C.1.4 | Wuxuu ka caawiyaa carruurta inay bartaan oo isticmaalaan xirfado bulsho oo wanaagsan oo ay sameeyaan kala doorashooyin ku habboon | Wuxuu bixiyaa waayo-aragnimo iyo waxqabadyo oo uu sidoo kale isticmaalaa is-hadalka nafeed si uu u horumariyo horumarka bulshada iyo dareenka shucuurta | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa habka ugu wanaagsan ee hadda jira iyo dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan ee horumarinaya horumarka bulshada iyo dareenka shucuurta |

## 2. Taageerida Is-xakamaynta

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.2.1 | Wuxuu aqoonsadaa oo uu dhiirigeliyaa carruurta marka ay baranayaan inay maareeyaan jawaabahooda jireed iyo shucuureed, in ay ilaaliyaan feejignaanta, iyo xasilinta naftooda | Wuxuu bixiyaa waxqabadyo wuxuuna abaabulaa deegaanka si uu u taageero koboca is-xakamaynta ilmaha | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo la-hawlgalayaasha bulshada muhiimadda ay leedahay is-xakamaynta carruurta yaryar iyo muhiimadda taageerooyinka dibadda ah oo ay ku jiraan taageerada ka timaada kuwa kale |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.2.2 | Wuxuu la sameeyaa cilaaqaad ammaan ah, xasiloon ilmo kasta si uu u helo saldhig sugan oo uu ka sahamiyo | Wuxuu daadihiyaa dareenka sii kordhaya ee ismaamulka iyo madax-bannaanida isaga oo si joogto ah u siinaya saldhig sugan oo laga sahamiyo | Wuxuu dejiyaaa xeerar iyo habraacyo taageeraya dareenka sii kordhaya ee ismaamulka iyo madaxbannaanida |

3. Fududeynta Kala-fogaanshaha Wanaagsan, Dib-u-midaynta iyo Kala-guurka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.3.1 | Wuxuu ka caawiyaa ilmaha la qabsiga barnaamijka carruurnimada hore | Wuxuu aqoonsadaa oo uu ku daydaa caadooyinka qoyska si uu u bixiyo sii socoshada ka bedelashada hal goob ilaa goob kale iyo ka bedelashada qof ilaa qof kale | Wuxuu dejiyaa xeerar iyo habraacyo lagu fududaynayo kala-beddelka oo kor loogu qaadayo joogtaynta isku mid ahaanshaha guud ahaan iyo gudaha goobaha |
| II.C.3.2 | Wuxuu qeexaa jawaabaha shucuureed ee ilmaha iyo waalidka inta lagu jiro kala tegitaanka, isu imaatinka iyo kala beddelka | Wuxuu taageeraa muujinta shucuurta wuxuuna soo jeediyaa xeelado lagula tacaalayo inta lagu jiro kala tegitaanka, isu imaatinka iyo kala-beddelka | Wuxuu aqoonsadaa oo uu wax ka qabtaa falcelinta shucuurta ee aan caadiga ahayn ee kala tegitaanka, isu imaatinka iyo kala beddelka |
| II.C.3.3 | Wuxuu raacaa habraacyada loo dejiyay ee ka beddelashada hawl una beddalashada hawl kale | Wuxuu siiyaa wakhti ku filan iyo taageero si habsami leh u kala-beddelka  hawl in looga gudbo hawl kale | Wuxuu kala shaqeeyaa dadka kale si ay u naqshadeeyaan kala beddelka fudud ee laga beddelayo koox da' ah oo loo beddelayo koox da' kale ah |
| II.C.3.4 | Wuxuu aqoonsadaa waxqabadyada joogtada ah iyo kala-beddelku inay yihiin wakhtiyo wax laga baran karo | Wuxuu adeegsadaa waxqabadyada joogtada ah iyo kala-beddelka si loo dhiso xiriirka, si loo ballaariyo xiisaha ilmaha iyo dhisidda xirfadaha | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha la shaqeeeya, qoysaska iyo xubnaha bulshada muhiimada ay jadwalada joogtada ah iyo kala-beddelku ay u leeyihiin waxbarashada |

## 4. Dhiirigelinta Muujinta Dareenka Shucuurta

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.4.1 | Wuxuu aqoonsadaa kala duwanaanshaha iyo siyaabaha kala duwan ee ilmuhu u muujiyaan shucuurta iyo baahiyaha; si habboona uga jawaabaa | Wuxuu dejiyaa deegaan ay carruurtu ku dareemaan ammaan si ay u sahamiyaan shucuurtooda oo ay taageero u helaan | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha la shaqeeeya, qoysaska iyo la-hawlgalayaasha bulshada muhiimadda ay leedahay deegaan taageeraya ku muujinta shucuurta habab ku habboon koritaan iyo hiddaha dhaqanka. |
| II.C.4.2 | Wuxuu ka caawiyaa carruurta inay muujiyaan dareenka, baahiyaha iyo rabitaannada oo ay fahmaan kuwa dadka kale | Wuxuu isticmaalaa xeelado kala duwan si uu uga caawiyo carruurta inay bartaan inay u muujiyaan shucuurta siyaabo ku habboon xaaladda qoyska iyo/ama hiddaha dhaqanka | Wuxuu horumariyaa waxqabadyo waxbarasho oo ay carruurtu ku bartaan inay xakameeyaan dareenka, in ay ku muujiyaan dareeno kala duwan, in ay is-maamulaan, in ay sameeyaan doorashooyin oo ay xalliyaan dhibaatooyinka¬ |
| II.C.4.3 | Wuxuu aqoonsadaa saamaynta welwelka iyo dhaawaca masiibada wuxuuna ku taageeraa ilmaha gudaha barnaamijka daryeelka carruurta qoyska | Wuxuu aqoonsadaa calaamadaha welwelka shucuureed ee ilmaha/qoyska wuxuuna qaadaa tillaabada lagama maarmaanka ah, sida bilaabista wada xaajoodka qoyska, bixinta macluumaadka iyo agabka si looga hortago xadgudubka ilmaha; wuxuu u gudbiyaa taageerada bulshada iyo/ama uga warbixiyaa dawlada | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha la shaqeeeya, qoysaska iyo bulshada cawaaqibta korriinka ee ka timaada welwelka iyo dhaawaca masiibada ee la xiriiraa waayo-aragnimada xun sida kala guurka, waayitaanka, dayaca iyo xadgudubka |

## 5. Taageerida Cilaaqaadka iyo Isdhexgalka Faca ee Caafimaad leh

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.5.1 | Wuxuu ka caawiyaa carruurta inay la ciyaaraan kuwa kale | Wuxuu siiyaa carruurta fursado ay ku dhexgalaan dadka kale ee leh astaamo isku mid ah iyo kuwa kala duwan | Wuxuu naqshadeeyaa waaya-aragnimada si uu u baro isixtiraamka iyo isqadarinta dadka kale |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.5.2 | Wuxuu qiraa wadaagista, caawinta, iskaashiga iyo isdhexgalka wanaagsan ee carruurta dhexdooda | Wuxuu daadihiyaa is dhexgalka faca wuxuuna ka caawiaaa carruurta inay si isu hogaansan leh u wada dhaqmaan | Wuxuu naqshadeeyaa oo fulisaa xeelado kala duwan si loo baro carruurta inay ka xaajoodaan khilaafka oo ay xalliyaan isdhexgalka adag |
| II.C.5.3 | Wuxuu u soo jeediyaa dareenka midaarka, codadka, iyo muujinta dareenka wejiga ee carruurta kale wuxuuna kala hadlaa dareenka, fikradaha iyo falalka kuwa kale | Wuxuu adeegsadaa xilliyo maalin kasta ah si uu uga caawiyo carruurta inay horumariyaan fahamka dareenka, fikradaha iyo ficillada dadka kale; wuxuu aqoonsadaa dadka dhaqamada kala duwan in ay siyaabo kala duwan u cabbiraan dareenka | Wuxuu abuuraa waxqabadyo iyo fursado uu ku caawiyo carruurta inay fahmaan dareenada, fikradaha iyo ficillada dadka kale oo ay taageero u fidiyaan dadka kale |

6. Bixinta Hagitaanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.6.1 | Wuxuu qeexayaa filashooyinka macquulka ah ee hab dhaqanka ee carruurta ku jirta da'da korriinka kala duwan | Wuxuu fahmaa sida qodobo kala duwani ay saamayn ugu yeelan karaan hab dhaqanka ilmaha | Wuxuu qiimeeyaa arrimaha la yaqaan iyo kuwa aan la aqoon ee laga yaabo inay saamayn ku yeeshaan hab dhaqanka ilmaha; wuxuu yareeyaa loo hayo xoogaa awood xakamayn ah |
| II.C.6.2 | Wuxuu ka caawiyaa carruurta inay raacaan xeerar fudud, jadwallo joogto ah iyo tilmaamo | Waxay qorsheeyaan jadwalada, howlaha joogtada ah, iyo jawiga barnaamijka iyadoo lagu ku salaysan rajooyinka macquulka ah | Wuxuu u hagaajiyaa jadwalada, hawlaha joogtada ah iyo deegaanka iyadoo lagu salaysan aqoonta ilmaha, da'da ilmaha, dabeecadda, luqadda, xirfadaha wada xiriirka, xiisaha, dhaqamada iyo kartida |
| II.C.6.3 | Wuxuu u firsadaa oo uu isku dayaa in uu aqoonsado shucuurta ku hoos jirta dabeecadaha adag; wuxuu aqoonsadaa kala duwanaanta dhaqanka ee muujinta shucuurta | Waxay baraan carruurta siyaabo kala duwan oo ay ula qabsadaan una muujiyaan shucuurta dareenada | Wuxuu dib u milicsadaa falcelinta shakhsiyeed ee muujinta dareenka shucuurta xooggan iyo dabeecadaha adag; wuxuu abuuraa deegaan taageeraya korriinka dareenka isku-kalsoonaanta ee ilmo kasta, ismaamulka iyo madaxbannaanida |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.6.4 | Wuxuu ka soo ururiyaa macluumaad qoysaska si uu u helo faham qoto dheer oo ku saabsan dabeecada carruurta | Wuxuu la kaashadaa xubnaha qoyska si ay kor ugu qaadaan ka jawaab celinta joogtada ah ee dabeecadaha adag | Wuxuu abuuraa xeelado togan oo kala duwan si wax looga qabto dabeecadaha adag wuxuuna la shaqeeyaa qoyska si ay u aqoonsadaan xeeladaha la isku raacsan yahay |
| II.C.6.5 | Wuxuu adeegsadaa xeelado hagitaan togan oo ay dejiyeen shaqaalaha, asxaabta shaqada iyo qoysasku si uu wax uga qabto dabeecadaha adag ee ilmaha | Wuxuu sii naawilaa oo uu ka leexdaa dabeecadaha adag isagoo isticmaalaya xeelado hagitaan togan | Wuxuu qiimeeyaa oo uu si joogto ah u hagaajiyaa xeeladaha hagidda |
| II.C.6.6 | Si muuqaal ah u eegaa oo u kormeera deegaanka daryeelka carruurnimada hore si uu u saadaaliyo oo uu u jiheeyo dhaqan-xumaynta iman karta | Wuxuu muujiyaa jawaab celinta ku habboon marka dabeecadaha adag aan la baajin karin; wuxuu daryeelaa caruurta ay khusayso oo ogaysiisaa waalidka(iinta) haddi ay haboontahay | Wuxuu dejiyaa xeerar iyo habraacyo ku saabsan dabeecadaha adag oo ay ku jiraan xeelado firfircoon oo ka tag leh si looga hortago oo si ku habboon looga jawaabo marka aan laga hortagi karin |

## D. Horumarinta Korriinka Jirka

Daryeel bixiyuhu waa inuu fahmaa xeeladaha lagu qiimaynayo heerka soo baxaya ee korriinka jireed ee ilmaha iyo sida loo isticmaalo macluumaadkan si loo dejiyo yoolalka shakhsiyeed ee korriinka jireed iyo qaabaynta khibradaha waxbarasho ee ku habboon korriinka kuwaas oo:

- dhiirigalinaya habdhaqan togan oo ku wajahan jimicsig jidhka.
- kor loogu qaadayo xirfadaha garaadka ee carruurta yaryar; dheelitirka iyo iskudubarid; iyo dabacsanaan, xoogga, iyo u dulqaada hawleed muddo dheer.
- taageeraya qaadashada khatarta ku habboon da'da ee gudaha xuduudo nabdoon.
- ka caawinaya carruurta inay noqdaan kuwo karti u leh inay helaan xirfadaha dhaqdhaqaaqa muruqyada guud ee aasaasiga ah iyo kuwa yaryar.
- fududaynta fahamka carruurta ee ilaalinta heerka la doonayo ee nafaqada, caafimaadka, jirdhiska iyo badbaadada jireed.
- daboolaya baahida nololeed ee carruurta ee jimicsiga, kicinta dareenka, hawo cusub, nasasho, nadaafada iyo nafaqada iyo saxarada iyo kaadida.

1. Horumarinta Korriinka Jirka (Sidoo kale eeg: Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada)

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.D.1.1 | Wuxuu si firfircoon uga qayb qaataa oo ka caawiyaa carruurta ku celcelinta caadooyinka caafimaadka qaba | Wuxuu siiyaa waayo-aragnimo macno leh iyo waxqabadyo la xidhiidha caafimaadka, badbaadada iyo nafaqada kuwaas oo ka caawiya carruurta inay horumariyaan caadooyin caafimaad qaba noloshooda oo dhan | Wuxuu qiimeeyaa, qiyaasaa oo si joogto ah u wanaajiyaa hab dhaqamada caafimaadka, badbaadada iyo nafaqadaa ee ku salaysan cilmi baarista hadda jirta |
| II.D.1.2 | Wuxuu dhiirigeliyaa oo ka qaybqaataa ciyaarta habaysan iyo ciyaarta aan qaabaysnayn isagoo si firfircoon u kormeeraya | Wuxuu qorsheeyaa hawlo ku habboon da'da ugu yaraan laba jeer maalintii kuwaas oo dhiirigeliya dhaqdhaqaaqa jidhka oo lagu sameeyo meelo bannaan, ammaan ah; wuxuu ka qaybgeliyaa qoysaska qorsheynta iyo ka qayb qaadashada dhaqdhaqaaqa jireed ee carruurta | Wuxuu abuuraa xeerar, dhaqamo iyo deegaan kor u qaadaya caadooyinka dhaqdhaqaaqa jirka oo nolosha oo dhan ah oo lagu sameeyo goobaha ciyaarta ee gudaha iyo dibadda wuxuuna xaddidaa wakhtiga shaashadda; wuxuu qoysaska u sheegaa talooyinka ku salaysan cilmi-baarista ee ciyaarta firfircoon ee carruurta iyo wakhtiga shaashadda |
| II.D.1.3 | Wuxuu qeexaa xirfadaha lagu horumarinayo dhaqdhaqaaqa muruqyada waawayn, dheelitirnaanta iyo ogaanshaha meesha uu jirkaagu joogo iyo horumarinta isku dubaridka gacan-isha | Wuxuu qorsheeyaa hawlaha gudaha iyo dibadda, qalabka iyo meesha(meelaha) ku habboon korriinka ilma kasta ee xirfadiisa dhaqdhaqaaqa murqaha waawayn, fahamka nidaamyada dareenta meelaynta jirka (proprioception) iyo dareenka dheelitirka (vestibular) | Wuxuu u abuuraa hawlo ku salaysan aqoonta heerarka horumarka ee korriinka jirka/murqaha, iyo nidaamyada dareenka dheelitirka (vestibular) iyo dareenta meelaynta jirka (proprioception), si kor loogu qaado horumarka ugu fiican ee ilmo kasta |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.D.1.4 | Wuxuu si firfircoon uga qayb qaataa oo uu ka caawiyaa carruurta inay fuliyaan dhaqdhaqaaqyo jireed oo kala duwan; wuxuu qeexaa waxa qalabka kala duwan uu sameeyo si ay u taageero horumarinta | Wuxuu bixiyaa wakhtti ku filan oo dhulka lagu ciyaaro iyo hawlo si loo dhiirigaliyo dhaqdhaqaaqa, korriinka jirka, xirfadaha dhaqdhaqaaqa murqaha waawayn iyo kuwa yaryar, fahamka nidaamyada dareenta meelaynta jirka (proprioception) iyo dareenka dheelitirka (vestibular) | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa habka ugu wanaagsan ee hadda jira iyo dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan si loo horumariyo korrinka jireed, xoogga muruqyada waaweyn iyo isku-dubaridka, iyo horumarinta nidaamyada dareenka dheelitirka (vestibular) iyo dareenta meelaynta jirka iyo dhaqaaqyada (proprioception) |
| II.D.1.5 | Wuxuu ka caawiyaa carruurta waxqabadyada dhisaya aragtiga iyo isku dubaridka indhaha-iyo-gacanta iyo xirfadaha dhaqdhaqaaqa muruqyada yaryar | Wuxuu qorsheeyaa oo ay bixiyaan hawlo macno leh si kor loogu qaado horumarinta aragga, iskudubarid indhaha-iyo-gacanta, iyo korriinka maskaxda, taas oo horseedda xirfadaha dhaqdhaqaaqa muruqyada yaryar | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa habka ugu wanaagsan ee hadda jira iyo dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan si loo horumariyo isku dubaridka isha-gacanta, xoogga gacanta iyo farsamada; wuxuu filaa marxaladda xigta si kor loogu qaado horumarka shakhsiyeed |
| II.D.1.6 | Wuxuu aqoonsanyahay in carruurtu u baahan yihiin waxqabadyo u ogolaanaya isticmaalka dhammaan dareenkooda oo si firfircoon uga qaybqaataan hawlahan | Wuxuu siisaa waxyaabo dareeno badan leh iyo waaya-aragnimada sahaminta | Wuxuu falanqeeyaa, qorsheeyaa, doortaa iyo/ama kaa soo raadsadaa agab dabiiciga ah si loo hubiyo bixinta khibrado qani ah oo kor u qaada horumarka jirka iyo dareenka |
| II.D.1.7 | Wuxuu adeegsadaa fahamka qaababka korriinka ee la saadaalin karo si uu u taageero carruurta marka ay baranayaan inay dhammaystiraan hawlaha is-caawinta nafeed sida ugu madax-bannaan ee suurtogalka ah | Wuxuu bixiyaa fursado iyo farsamooyin taageerida si ay u taageeraan carruurta ee xiisaynaysa oo korriin ahaana diyaar u ah inay horumariyaan xirfadaha is-caawinta nafeed oo ay ku jiraan taxanaha dhaqdhaqaaqa sida labiska, barashada musqusha, iyo wax cunista | Wuxuu ku hawlgeliyaa shaqaalaha iyo qoysaska inay ogaadaan calaamadaha u diyaar ahaanta ee ilmuhu in ay sameeyaan xirfadaha is-caawinta nafeed ee habboon |

## E. Kobcinta Horumarka Hal-abuurka

### 1. Dhiirigelinta Ismuujinta

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.E.1.1 | Wuxuu ku dhiirigeliyaa carruurta inay isticmaalaan noocyo kala duwan oo agabka ah maalin kasta ah si ay iskaga yeelyeelaan, u qoob ka ciyaaraan, u sameeyaan muusig oo ay u abuuraan | Wuxuu siiyaa wakhti, agab iyo meel si loogu ogolaado carruurta inay sahamiyaan oo ay tijaabiyaan is-muujinta shakhsiyeed iyo hal-abuurka iyada oo loo marayo waxyaabo kala duwan | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha la shaqeeeya, qoysaska iyo bulshada sida carruurtu u matalaan fikradahooda, dareenkooda, iyo fikradahooda iyagoo u maraya wadooyin hal abuur leh |
| II.E.1.2 | Wuxuu aqoonsan yahay in agabka oo siyaabo cusub loo isticmaalo ay tahay hal-abuurnimo | Wuxuu abuuraa jawi lagu la qadariyo ismuujinta iyo hal-abuurka | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha la shaqeeeya, qoysaska iyo bulshada in hal-abuurku muhiim u yahay xallinta mashaakilaadka, is-muujinta dareenka, horumarinta isku kalsoonida iyo fikirka goonida ah |
| II.E.1.3 | Wuxuu dhiirigeliyaa habka hal-abuurka halkii uu ka dhiirigelin lahaa abuuritaanka shayga | Wuxuu ku dhiirigelisaa carruurta inay si xushmad leh u muujiyaan waxay jecel yihiin iyo waxay aysan jeclayn ee muusigga, fanka iyo riwaayadaha | Wuxuu baraa carruurta inay muujiyaan ku hal-abuurnimo iyo waayo-aragnimada bilicda gudaha bulshadooda iyo dhaqamada kala duwan |
| II.E.1.4 | Wuxuu adeegsadaa la hadalka nafteeda iyo hadalka dhinac socodka ah  (self and parallel talk) si uu u sharaxo hal abuurka ilmuhu sameeyo | Wuxuu waydiiyaa su'aalo furan si uu u dhiirigaliyo u isticmaalka agabka siyaabo kala duwan, wuxuu taageeraa horumarinta hal-abuurka, uuna aqbalaa dookhyada shakhsiyeed | Wuxuu qiimeeyaa, qiyaasaa oo si joogto ah u wanaajiyaa farshaxanka, muusiga, iyo waayo-aragnimada riwaayadaha |
| II.E.1.5 | Wuxuu ku dhiirigeliyaa carruurta inay u isticmaalaan agabka hal hab wax ka badan | Wuxuu bixiyaa alaabo fikrad furfuran oo loo isticmaali karo in ka badan hal qaab | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha la shaqeeeya, qoysaska iyo bulshada waxa ay carruurtu ka bartaan fursadaha ay ku sameeyaan tijaabada iyo in ay u isticmaalaan alaabada u xallinta masalooyinka siyaabo hal abuur leh |

2. Taageerida Ciyaarta Riwaayadeed

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.E.2.1 | Wuxuu bixisaa wakhti isku xiran aan kala go' lahayn si ay u dhiirigeliso ciyaarta iska yeelyeelka ah | Wuxuu u qorsheeyaa wakhti ku filan gudaha iyo dibadda iyo agabka ciyaarta riwaayada ah oo loogu talagalay shaqsi iyo koox ahaan | Wuuxuu u sharaxaa asxaabta, qoysaska iyo xubnaha bulshada muhiimada ay leedahay ciyaarta iyo barashada la soo bandhigo, oo ay ku jiraan xirfadaha bulshada, is-xakamaynta iyo horumarinta luqadda |
| II.E.2.2 | Wuxuu ula shaqeeyaa carruurta xilliga ciyaarta si yaabo kor loogu qaadayo waxbarashada | Wuxuu adeegsadaa xeelado kala duwan si uu u dhiirrigeliyo korriinka carruurta, horumarka iyo waxbarashadooda xilliga ciyaarta | Wuxuu qiimeeyaa jadwalka maalinlaha ah iyo manhajka si loo hubiyo in xooga la saaro ciyaarta, sahaminta iyo isdhexgalka bulshada |

## 2020 F. Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.F.1 | Wuxuu xaqiijiyaa ixtiraamka loo hayo oo ka warqabaa dhammaan dhinacyada barnaamijka, carruurta naafada ah, carruurta leh baahiyaha daryeel caafimaad oo gaarka ah, **dhaawaca masiibada taariikhiga ah**, iyo kuwa ka soo jeeda asal dhaqameed iyo afaf kala duwan | Wuxuu xaqiijiyaa ka mid ahaaanshaha, dhammaan dhinacyada barnaamijka, carruurta naafada ah, carruurta leh baahiyaha daryeel caafimaad oo gaarka ah, dhaawaca masiibada taariikhiga ah, iyo kuwa ka soo jeeda asal dhaqameed iyo afaf kala duwan | Wuxuu qiimeeya, qiyaasaa oo si joogto ah u wanaajiya deegaanka si loo hubiyo in ay dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba ay ka warqab tahay oo ay kor u qaadayso ixtiraamka kala duwanaanshaha |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.F.2 | Wuxuu aqoonsadaa muuqaalada iyo hab dhaqamada xunxun ee bulsho wayn ee ku wajahan ilmaha iyo kooxda hiddaha dhaqankooda, qoomiyadkooda, bulshadooda, jinsigooda, ama luqada<br><br>Wuxuu aqoonsadaa saamaynta xun ee la'aanta sawiro caddaynaya aqoonsiga carruurta laga tirada badan yahay ee kooxda hiddaha dhaqankooda, qoomiyadkooda, bulshadooda, jinsigooda, ama luqada | Wuxuu wax ka beddelaa deegaanka fasalka si uu uga hortago muuqaalada iyo hab dhaqamada xunxun ee bulsho wayn ee ku wajahan ilmaha iyo kooxda hiddaha dhaqankooda, qoomiyadkooda, bulshadooda, jinsigooda, ama luqada iyo in kor loo qaado kuwa wanaagsan. Wuxuu doortaa, ka hadlaa, oo xoojiyaa buugaagta, sawirada, tusaalooyinka luqadaha, iyo hawlaha si ay u muujiyaan noocyo kala duwan ee mar dhif ah uun la arko ee ah, sawirro wanaagsan sanadka oo dhan, oo aah ahayn kaliya munaasabadaha gaarka ah<br><br>Wuxuu odorosaa saamaynta sawirada warbaahinta caanka ah iyo fariimaha kuwaas oo laga yaabo inay saameyn xun ku yeeshaan carruurta ka soo jeeda bulshooyinka dhaqamada qaarkood waxayna baaraan siyaalo wax ku ool ah oo iyaga loogaga hortago fasalka dhexdiisa | Wuxuu u doodaa isbedelada jawiga barnaamijka oo uu kor u qaadaa waxbarashada la wadaago ee ka dhexaysa dadka wada shaqeeya si ay uga hortagaan muuqaalada iyo hab dhaqamada xunxun ee bulsho wayn ee ku wajahan ilmaha iyo kooxda hiddaha dhaqankooda, qoomiyadkooda, bulshadooda, jinsigooda, ama luqada iyo in kor loo qaado kuwa wanaagsan<br><br>Wuxuu doortaa oo uu gaarsiiyaa shaqaalaha iyo asxaaba shaqada ilaha buugaagta, sawirada, muusiga, iyo hawlaha muujinaya noocyo kala duwan oo dhif la arko oo ah, muuqaalo wanaagsan oo caruurta iyo qoysaska ka soo jeedakooxaha hiddaha dhaqamo, qowmiyad, bulsho, jinsi, iyo luqadaha kala duwan |
| II.F.3 | Wuxuu aqoonsadaa oo bixiyaa tusaalooyin siyaabaha lagu muujiyo ixtiraamka luqadda guriga ama lahjadda carruurta (ay ku jirto luqadda midaarka) markay baranayaan Ingiriisiga caadiga ah<br><br>Wuxuu aqoonsadaa oo bixiyaa tusaalooyin siyaabo lagu taageero dadaalka qoysaska si ay carruurtoodu dib u soo ceshadaan iyo/ama u ilaashadaan afkooda hooyo | Wuxuu qorsheeyaa siyaabaha lagu muujiyo ixtiraam muuqaal ahaan iyo waxqabadyada barashada ee loogu talagalay luqadaha guriga iyo/ama lahjadaha (ay ku jiraan luqadda midaarka) ee carruurta iyo qoysaskooda<br><br>Wuxuu odorosaa xiisaha wuxuuna aqoonsadaa xeeladaha fasalka ee taageeraya dadaalka qoysaska si ay carruurtoodu dib u soo ceshadaan iyo/ama u ilaashadaan afkooda hooyo | Wuxuu abaabulaa oo kor u qaada tababbarka horumarinta xirfadeed ee hababka loogu daro barnaamijka oo dhan ixtiraamka iyo ilaalinta luqadda guriga ama lahjada carruurta (ay ku jirto luqadda midaarka) markay baranayaan Ingiriisiga caadiga ah |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.F.4 | Waxay si daacad ah oo xushmad leh uga hadlaan waxyaabaha ay iskaga midka yihiin iyo waxyaabaha ay kala duwanaanta ee ay carruurtu ku arkaan dadka, qoysaska, iyo bulshada dhexdeeda | Wuxuu siiyaa carruurta fursado ay ku bartaan naftooda, qoyskooda, luqadaha ay ku hadlaan dadka ku jira barnaamijka iyo bulshadu | Wuxuu u abuuraa fursado ay carruurtu ku bartaan danaha/xiisaha, caadooyinka, luqadaha, dhaqamada, iyo dalalka ay ka soo jeedaan qoysaska kale ee ku jira barnaamijka iyo bulshada deegaanka barnaamijka. |
| II.F.5 | Wuxuu aqoonsadaa kala duwanaanshaha dhaqameed ee qaababka xirrirka/ isgaarsiinta iyo hababka loo xalliyo dhibaatooyinka oo wata soo dhawayn iyo xaqiijinta danaha, halkii lala yaabi lahaa<br><br>Wuxuu qeexaa qaababka ugu wanaagsan ee xirfadaha lagama maarmaanka ah, sida xushmada iyo tixgelinta, ee dhaqamada kala duwan | Wuxuu u diyaariyaa hawlo sahamin ah oo u suurtageliya carruurta inay adeegsadaan habab kala duwan oo waxbarasho, **oo ay ku jiraan xirfadaha wadaaga, isku-tiirsanaanta, iyo madax-bannaanida**<br><br>Wuxuu muujiyaa oo ka hadlaa siyaabaha ay xirfadaha lagama maarmaanka ah, sida xushmada iyo tixgelinta, loogu muujiyo dhaqamada kala duwan oo uu u dejiyaa halbeegyada fasalka | Wuxuu kala shaqeeyaa shaqaalaha, qoysaska, iyo asxaabta si ay u qaabeeyaan habab lagu wadaago macluumaadka ku saabsan isku mid ahaanshaha dhaqanka iyo kala duwanaanshaha ee barnaamijka oo dhan iyo in la dejiyo halbeegyada barnaamijka ee horumarinta dabeecadda, ixtiraamka, iyo tixgelinta. |

3

# Nuxurka Aagga III: **Xiriirka Qoysaska**

## Halbeegga PELSB

***Baraha carruurta yaryar wuxuu aasaasaa oo ilaaliyaa xiriir togan, iskaashi lala yeesho qoysaska.***

Baruhu waa inuu fahmo:

- baahida loo qabo in la ixtiraamo xulashooyinka qoysaska iyo yoolalka caruurtooda, iyo baahida loo qabo in qoysaska lagala hadlo manhajka iyo horumarka caruurtooda
- baahida loo qabo dareensanaaanta kala duwanaanshaha qaab dhismeedka qoyska iyo sooyaalka bulsho iyo dhaqameed.
- aragtiyaha qoysaska iyo sifooyinka, doorarka iyo cilaaqaadka qoysaska gudohooda iyo qoysaska iyo bulshada dhexdooda.
- sida qoysaska loogu taageero qiimaynta fursadaha waxbarashada iyo samaynta go'aannada la xiriira korriinka iyo barbaarinta ilmaha.
- sida loogu xiriiriyo qoysaska adeegyo kala duwan oo qoyska ku jihaysan iyadoo lagu salaynayo khayraadka, mudnaanta, iyo walaacyada jira.

## Kartiyaha

### A. Fahmitaanka Qoysaska

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.A.1 | Wuxuu fahamsanyahay in barbaarintu ay tahay hab noloshaada oo dhan ah | Wuxuu qeexaa isku xirnaanta, xiriirka, isku tiirsanaanta iyo ahaanshaha qoysas jiilal badan ka kooban ee horumarka qoyska | Wuxuu aqoonsadaa oo sharxaa cilladaha barbaarinta, xeeladaha iyo guulaha la xiriira marxalad kasta oo marxaladaha horumarka ah |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.A.2 | Wuxuu aqoonsadaa muhiimada ay caruurta u leeyihiin cilaaqaadka qoyskoodu wuxuuna ka taageeraa waalidiinta kartiyaha soo baxaya | Wuxuu taageeraa oo xoojiyaa awoodda waalidka iyo qoyska, kartiyaha soo baxaya, iyo isdhexgalka waalidka iyo ilmaha; wuxuu soo jeediyaa xeelado si qoyska looga caawiyo in ay ilmaha ku daboolaan nolol mashquul ah iyo in ay ka helaan farxad barbaarinta ilmahooda | Wuxuu ku dul dhistaa awoodaha waalidka iyo qoyska; wuxuu xoojiyaa isdhexgalka wanaagsan ee waalidka-ilmah; Wuxuu kor u qaadaa kartiyahaa waalidka ee wajahida caqabadaha iyo xalinta dhibaatooyinka¬ |

**B. Ka qaybgalinta Qoysaska** (Sidoo kale eeg: Qiimaynta, Qiyaasidda iyo Ku habboonaysiinta shaqsiga)

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.B.1 | Wuxuu aqoonsadaa muhiimada ay leedahay muddada hanuunintu, wuxuu ka jawaabaa su'aalaha ku saabsan barnaamijka wuxuuna ka caawiyaa ilmaha la qabsiga barnaamijka | Wuxuu siiyaa wakhti hanuunin si ay uga caawiso ilmaha usoo gudbida barnaamijka; wuxuu wax ka bartaa qoyska, caadooyinka, asalka, luqadaha lagaga hadlo guriga iyo wadamada ay u arkaan in ay muhiim u yihiin aqoonsigooda | Wuxuu dejiyaa muddada hanuuninta (shaqo baridda) oo taageerta ilmaha cusub in uu la qabsado kooxda iyo sidoo kale xubnaha jira; wuxuu sharxayaa muhiimada ay leedahay hanuunintu |
| III.B.2 | Wuxuu soo dhaweeyaa qoysaska maalin kasta oo uu ka caawiyaa ilmaha marka la kala tagayo iyo isu imaatinka | Wuxuu abuuraa oo uu ilaaliyaa goob soo dhawayn leh si loo fududeeyo kala taga iyo isu imaatinka togan | Wuxuu isticmaalaa macluumaadka ku saabsan qoys kasta si ay u abuurto jawi soo dhaweyn leh oo ka tarjumaya dhaqanka guriga, qowmiyadaha iyo luqadaha; wuxuu tusaaleeyaa kala tegid iyo isu imaatinka togan |
| III.B.3 | Waxay isweydaarsadaan xubnaha qoyska macluumaadka ku saabsan waxqabadyada ilmaha; macluumaadka waxaa lagu bixiyaa afkooda hooyo iyo iyadoo la adeegsanayo istiraatijiyada ay doorbidayaan qoysku mar kasta oo ay suurtagal tahay | Wuxuu sameeyaa xiriiri furfuran, iskaashi, labada dhinaba ah oo uu la yeesho qoys kasta; dhacdooyinka maalinlaha ah waxaa lagu sheegaa iyadoo la adeegsanayo luqadda guriga iyo istiraatijiyada ay qoysku doorbidayaan mar kasta oo ay suurtagal tahay | Wuxuu galaa oo adeegsadaa agabka si uu ugu fududeeyo wada xixiirka xubnaha qoyska afkooda hooyo iyo iyadoo la adeegsanayo istiraatijiyada ay doorbidayaan qoysku mar kasta oo ay suurtagal tahay |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.B.4 | Wuxuu si habboon uga jawaabaa su'aalaha qoyska ee ku saabsan koritaanka iyo horumarka | Wuxuu siiyaa macluumaadka iyo caawinta qoysaska si ay uga caawiso inay fahmaan koritaanka iyo horumarka caadiga ah; waxa ay samayn karaan si ay kor ugu qaadaan caafimaadka, shaqaynta garaadka (qorshaynta, abaabulka, la socodka dabeecadaha ku jihaysan hadafka), luqadda, horumarinta dareenka bulshada iyo garashada iyo sidoo kale dhismaha xiriirka qoyska | Wuxuu adeegsadaa agabka si uu u balaariyo qotada iyo ballaadhka macluumaadka la siiyo qoysaska iyo shaqaalaha la shaqeeeya, iyo sidoo kale inuu naftiisa wax ku baro |
| III.B.5 | Wuxuu fuliyaa hawlaha lagu gaadhayo hadafyada lagu heshiiyey ee qoysasku u dejiyeen ilmahooda | Wuxuu la shaqeyaa qoysaska si ay ugu daraan dhaqamada korineed ee la isku raacay; wuxuu isu dheelli tiraya rabitaanka iyo yoolalka qoysas badan ee loogu talagalay ilmahooda marka ay wax qorsheynayaan | Wuxuu kala shaqeeyaan qoyska si ay u qiimeeyaan horumarka laga gaarayo yoolalka korriinka ilmaha; wuxuu qorsheeyaa waxqabadyada barashada si ay uga jawaabaan qorshaynta wadajirka ah wuxuuna hubiyaa in qoysasku helaan macluumaad si ay u gaaraan go'aamo xog ogaal ah oo ku saabsan korriinka iyo horumarka ilmahooda |
| III.B.6 | Wuxuu u fiirsadaa oo u sharaxaa xubnaha qoyska horumarka uu ilmuhu ka gaarayo hadafyada lagu heshiiyey | Wuxuu kala hadlka waalidka horumarka ilmaha ee ku wajahan hadafyada lagu heshiiyey; wuxuu qabtaa shirarka waalidka muddadiiba mar | Wuxuu dejiyaa xeerarka iyo nidaamyada wada xiriirka joogtada ah oo ku saabsan horumarka laga gaaro hadafyada lagu heshiiyey |
| III.B.7 | Wuxuu aqoonsadaa in qoysasku u gudbiyaan caadooyinkooda iyo hiddaha dhaqanka carruurtooda ayna ku dhiirigeliyaan xubnaha qoyska inay ku wadaagaan hibadooda, xirfadaha iyo hab dhaqamada hiddaha dhaqameed barnaamijka daryeelka carruurnimada hore ee qoyska | Wuxuu ku casuumaa xubnaha qoyska inay wadaagaan hibadooda, xirfadaha iyo hab dhaqamada hiddaha dhaqameed wuxuuna qoysaska u habeeyaa fursadaha si ay uga qayb qaataan hawlaha waxbarashada carruurta ee guriga | Wuxuu tixgeliyaa saamaynta hiddaha dhaqameedku ay ku leeyihiin qiyamka, go'aamada, iyo hab-dhaqanka naftaada iyo dadka kale |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.B.8 | Wuxuu sharaxaa qiyamka dhaqanka, dhaqaalaha iyo qoyska ee la xiriira isticmaalka cuntada | Wuxuu qor u qaadaa ogaanshaha qiyamka dhaqanka, dhaqaalaha iyo qoyska ee la xiriira isticmaalka cuntada | Wuxuu abuuraa hab ay ku jiraan qoysasku go'aannada ku saabsan isticmaalka cuntada |
| III.B.9 | Wuxuu raacaa xeerarka iyo habraacyada si loola shaqeeyo qoysaska marka la muujiyo tabashooyinka ama isku dhacyada | Wuxuu ka shaqeeyaa xeelado iskaashiga si wax looga qabto isku dhaca | Wuxuu u isticmaalaa qoysaska farsamooyin wax ku ool ah oo xallinta isku dhaca ah marka loo baahdo |
| III.B.10 | Wuxuu u aragkaa qoysaska in ay la yihiin howl-wadaag qorsheynta isbeddelada kooxaha ama waaya-aragnimada waxbarasho | Wuxuu siiyaa qoysaska macluumaad wuxuuna dejiyaa xiriirinta barnaamijyada carruurnimada hore ee mustaqbalka | Wuxuu la shaqeeyaan qoysaska iyo howl-wadaagyada bulshada si ay isugu dubbaridaan adeegyada carruurta ka tagaysa fasalka barnaamijka carruurnimada hore ama barnaamijka |
| III.B.11 | Wuxuu ka caawiyaa ilmaha ku dhaqanka xirfadaha isaga oo isticmaalaya xeelado lagu aqoonsaday Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEPs), Qorshayaasha Adeegga Qoyska ee Shakhsiga ah (IFSPs), iyo Qorshayaasha Wax ka Qabashada Shakhsiyeed ee Hay'adaha u Dhexeeya (IIIPs) | Waxay kala qaybgalaa qoysaska iyo kooxda waxbarashada gaarka ah si ay u horumariyaan Barnaamijyada Waxbarashada Shakhsiyeed (IEPs),Qorshaha Adeega Qoyska ee Shaqsiyeed (IFSPs) iyo Qabashada Shakhsiyeed ee Hay'adha u Dhexeeya(IIIPs) kuwaas oo cad oo la fahmi karo | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha ay wada shaqeeyaan, qoysaska iyo bulshada xuquuqda sharci ee qoysku u leeyahay adeegyada waxbarashada gaarka ah iyo nidaamka adeega hay'adaha u dhexeeya; wuxuu qoyska ka taageeraa u doodista adeegyada ilmahooda |

## C. Ku Xiriirinta Qoysaska Khayraadka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.C.1 | Wuxuu raacaa xeerarka ilaaliyaa sir ahaanshaha macluumaadka qoyska, u fiirsashada ilmaha, diiwaanada qiimaynta iyo hab dhaqanka ilmaha | Wuxuu fuliyaa xeerarka sir ahaanshaha macluumaadka qoyska, u fiirsashada ilmaha, diiwaanada qiimaynta iyo hab dhaqanka ilmaha | Wuxuu ka qabgeliyaa qoysaska horumarinta sir ahaanshaha iyo xeerarka kale ee barnaamijka |
| III.C.2 | Wuxuu u qeexaa bulshada, caafimaadka iyo khayraadka bulshada qoysaska | Wuxuu aqoonsadaa kheyraadka bulshada oo siiya qoysaska macluumaadka; u gudbiya waalidiinta iyo qoysaska hay'adaha bulshada, caafimaadka, ama adeegyada bulshada marka loo baahdo | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa habka ugu wanaagsan ee hadda jira iyo dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan si uu u go'aamiyo marka gudbin/u diritaan loo baahan yahay |

## 2020 D. Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.D.1 | Wuxuu aqoonsadaa muhiimada ay caruurta u leeyihiin cilaaqaadka qoyskoodu wuxuuna ka taageeraa waalidiinta iyo qoysaska iyo kartiyaha soo baxaya | Wuxuu taageeraa oo xoojiyaa awoodda waalidka iyo qoyska, kartiyaha soo baxaya, iyo isdhexgalka waalidka iyo ilmaha; wuxuu soo jeediyaa xeelado dhaqan ahaan la mid ah si qoyska looga caawiyo in ay ilmaha ku daboolaan nolol mashquul ah iyo in ay ka helaan farxad barbaarinta ilmahooda | Wuxuu ku dul dhistaa awoodaha waalidka iyo qoyska; wuxuu xoojiyaa isdhexgalka wanaagsan ee waalidka-ilmah; Wuxuu kor u qaadaa kartiyaha korinta ilmaha ee dhaqan ahaan gaarka u ah, sare u qaadida fursadaha, wajihidda caqabadaha iyo xalinta dhibaatooyinka |
| III.D.2 | Wuxuu aqoonsadaa xaaladda iyada oo loo eegayo dhaqan-dhaqaale, sharci, iyo garsoor ee ay qoysaska ka soo jeeda bulshooyinka dhaqamada kala duwan ku jiraan¬<br><br>Wuxuu aqoonsadaa oo uu **adeegsadaa farriimaha dhaqameed** ee togan ee laga soo sheego carruurta ka soo jeeda asal kala duwan si loo xoojiyo xiriirka qoysaska iyo bulshooyinkooda | Wuxuu xiriiriyaa farriimaha dhaqameed ee togan ee ku saabsan carruurta meelo kala duwan ka soo jeeda iyo waxqabadyada waxbarasho si uu u soo jeediyo waxqabadyo waxbarasho oo sidoo kale gacan ka geysan kara qoysaskooda, reerkooda, iyo bulshooyinkooda, iyadoo la aqoonsanayo in koox kasta oo dhaqameed laga yaabo inay leedahay yoolal dhaqan ahaan ku salaysan oo ay udejiyeencarruurtooda<br><br>Wuxuu ku hawlgeliyaa qoysaska wada sheekaysiga si ay u go'aamiyaan noocyada hawlaha waxbarasho oo sidoo kale gacan ka geysan kara qoysaskooda, reerkooda, iyo bulshooyinkooda, isku xirka ka dhexeeya guriga iyo iskuulka | Wuxuu la shaqeeyaa asxaabta shaqada si loo naqshadeeyo habab lagu dhex geliyo farriimaha dhaqameed ee togan oo kala duwan ee laga sheego carruuraha ka soo jeeda asal dhaqamo kala duwan oo loogu soo daro deegaanka barnaamijka<br><br>Wuxuu qabanqaabiyaa tababaro iyo kulamo tababaro kuwaas oo farsamooyinka barbaarinta ilmaha ee dhaqan gaar ah ee ay ku taliyaan cilmi-baarayaasha midabka leh ee dhaqan ahaan ku salaysani ay ku taliyeen oo ay sharaxeen |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.D.3 | Wuxuu aqoonsadaa in qoysasku u gudbiyaan hiddaha dhaqanka, caadooyinkooda, iyo dhaqanka carruurtooda; wuxuuna ayna ku dhiirigeliyaa xubnaha qoyska inay ku wadaagaan hibadooda, xirfadaha iyo hab dhaqamada hiddaha dhaqameed barnaamijka Caruurnimada hore; oo ay ku muujiyaan isbeddelada ama la qabsiga lagu samayn karo jawaab celin | Wuxuu ku casuumaa xubnaha qoyska inay wadaagaan, aragtidooda dhaqameed, hibadooda, xirfadaha iyo hab dhaqamada hiddaha dhaqameed wuxuuna qoysaska u habeeyaa fursadaha si ay uga qayb qaataan hawlaha waxbarashada carruurta ee guriga, iyagoo muujinaya hiddaha dhaqamada kala duwan | Wuxuu kor u qaada oo kulataliyaa shaqalaha in ay u tixgeliyaan saamaynta saamaynta hiddaha dhaqameedku ay ku leeyihiin qiyamka, go'aamada, iyo hab-dhaqanka naftaada iyo dadka kale |
| III.D.4 | Wuxuu aqoonsadaa aragtiyaha dhaqameed iyo xoogga ay soo bandhigaan qoysasku, sida isku-duubnida bulshada ee yar iyo waayeelka iyo adkaysiga<br><br>Wuxuu aqoonsadaa baahida loo qabo in la beddelo ama lala qabsado hab-dhaqannada, qaabka, qaab-dhismeedka, iyo/ama xeeladaha si looga jawaabo waxa ay ka baratay/uu ka bartay qoysaska iyo bulshada | Wuxuu beddelaa ama hagaajistaa hab dhaqamada waxbaridda, hababka, iyo qaab-dhismeedka si loogu sii dul dhiso xoogga hiddaha dhaqameed iyo aragtida qoysaska iyo bulshada<br><br>Wuxuu qorsheeyaa waxqabadyada jiilalka oo dhexmara qoysaska kuwaas oo xoogga saaraya qiyamka dhaqameed ee kala duwan sida isku-tiirsanaanta, xalinta dhibaatada, iyo mas'uuliyadda | Wuxuu naqshadeeyaa oo uu u doodaha kulannada dib umilicsiga ee shaqaalaha iyo dadka ay isla shaqeeyaan ay ku falanqayn karaan oo ay isbarbar dhigi karaan fikradaha dhaqameed ee saameeya naqshadaynta barnaamijka, hababka hawlgalka, iyo qaab dhismeedka waxbarista.<br><br>Wuxuu horumariyaa isbeddelada barnaamijka wuxuuna kala shaqeyaa shaqaalaha ay isla shaqeeyaaan la-qabsiyada ku sii dul dhisa xoogga hiddaha dhaqameed iyo aragtida qoysaska iyo bulshada |
| III.D.5 | Wuxuu u qeexaa bulshada, caafimaadka iyo khayraadka bulshada qoysaska, oo ay ku jiraan kuwa dhaqan ahaan isku midka ah | Wuxuu aqoonsadaa kheyraadka bulshada ee dhaqan ahaan isku midka ah ee bulshadu ku kalsoon tahay oo siiya qoysaska macluumaadka; u gudbiya waalidiinta iyo qoysaska hay'adaha bulshada, caafimaadka, ama adeegyada bulshada marka loo baahdo | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa habka ugu wanaagsan ee hadda jira iyo dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan ee dhaqan ahaan ku habboon si loo go'aamiyo marka u gudbin adeegyada loo baahan yahay |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.D.6 | Wuxu aqoonsadaa oo sharaxaa qaybaha muhiimka ah ee ururada dhaqan ahaan la midka ah bulshooyin dhaqameedyo gaar ah<br><br>Wuxu aqoonsadaa oo sharaxaa qaybaha muhiimka ah ee ururada bixiya adeegyo aad u fiican oo la siiyo shakhsiyaadka ka socda dhaqamo kala duwan | Wuxuu uu ku xiraa qoysaska ururada taageera dhaqan ama bulsho ahaan, u doodayaasha, iyo munaasabadaha bulshadooda<br><br>Wuxuu aqoonsadaa agabyo kala duwan oo ku habboon qofka iyo sidoo kale dookhyada dhaqanka<br><br>Wuxuu meesha ka saaraa malo-awaalka ah in shakhsiyaadka ka soo jeeda kooxaha dhaqameedyada qaar ay mar walba door bidaan adeegyada bulshadooda dhaqameed | Wuxuu dhisaa xiriiro uu la yeesho ururo dhaqan iyo bulsho taageera wuxuuna u sheegaa shaqaalaha iyo ururada qoysaska, u doodayaasha, iyo munaasabadaha ka jira bulshooyinka ee ka tarjumaya qoysaska carruurta loo adeego.<br><br>Wuxuu uu la shaqeeyaa shaqaalaha si ay u abuuraaraan habab lagu caawiyo qoysaska in ay xidhiidh la yeeshaan ururada dhaqan ama bulsho ahaan taageera, u doodayaasha, iyo munaasabadaha ka jira bulshooyinkooda dhaqameed iyo sidoo kale kuwa ku jira dhaqanka dadka ugu badan |
| III.D.7 | Wuxuu liisteeyaa oo helaa hay'adaha aqoonta leh iyo bulshada ku salaysan ee la aaminsanyahay, machadyada, iyo ganacsiyada oo ka tarjumaya bulshooyinka dhaqanka ee qoysaska loogu adeego. | Wuxuu la shaqeeyaa ururada ama machadyada bulshada ku salaysan ee aqoonta iyo kalsoonida leh si ay u bixiyaan talo, adeegyo, iyo khibrad¬<br><br>Wuxuu siisaa qoysaska fursada ah inay ku xidhmaan ururada bulshada ku salaysan iyo machadyada ama kuwa ku jira dhaqanka sarreeya ee ixtiraamaya xaqa qoys kasta uu u leeyahay inuu sameeyo doorashooyin xog warqab ah. | Wuxuu u doodaa oo mudnaanta siiyaa ka-qaybgalka hay'adaha aqoonta leh iyo bulshada ku salaysan ee la aaminsanyahay, machadyada, iyo ganacsiyada si ay u bixiyaan adeegyada iyo khibradda ay u leeyihiin barnaamijka<br><br>Wuxuu uu la shaqeeyaa shaqaalaha si ay u abuuraaraan habab lagu caawiyo qoysaska in ay samaystaan xidhiidh ka baxsan goobta barnaamijka oo ay la leeyihiin hay'ado iyo machadyo aqoon leh oo la aamini karo oo bulshada ku salaysan ama kuwa ku jira dhaqanka dadka ugu badan |

# Nuxurka Aagga IV: **Qiimaynta, Qiyaasidda iyo ku Habboonaysiinta Shakhsiga**

## Halbeegga PELSB

***Baraha carruurta yaryar wuxuu isticmaala qiimayn aan rasmi ahayn iyo mid rasmi ah iyo xeelado qiimayn iyo qiyaasid si uu u qorsheeyo oo ay uga shaqsiga ugu habboonaysiiyaan manhajka iyo dhaqamada waxbaridda.***

Baruhu waa inuu fahmo:

- sida loogu fiirsado, loo diiwaangeliyo, loona qiimeeyo horumarka iyo waxbarashada carruurta yaryar oo loogu hawlgeliyo carruurta inay is-qiimeeyaan.
- sida loo isticmaalo macluumaadka lagu helo u fiirsashada isku xirnaanta qoyska iyo cilaaqaadka si loo taageero waxbarashada ilmaha.
- sida loo isticmaalo natiijooyinka qiimaynta si loo aqoonsado baahiyaha iyo qaababka waxbarashada si loo qorsheeyo barnaamijyada ku haboon, deegaanka, iyo isdhexgalka.
- sida loo abuuro oo loo isticmaalo qalabyada qiimaynta barnaamijka qaabaynta iyo soo koobitaanka si kor loogu qaado loona ilaaliyo tayada barnaamij dhamaystiran oo loogu talagalay carruurta, qoysaska, iyo bulshada.

## Kartiyaha

### A. U fiirsashada, Duubista iyo Qiimaynta Horumarka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.A.1 | Wuxuu u fiirsadaa ilmo kasta maalin kasta isagoo isticmaalaya habraacyada uu dejiyo barnaamijku | Wuxuu adeegsadaa habab kala duwan, marar badan si uu u eego una qiimeeyo meelaha ay ku wanaagsan yihiin, baahiyaha, danaha, dookhyada, iyo siyaabaha ay ugu jawaabaan dadka iyo dhacdooyinka | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha ay wada shaqeeyaan fikradaha qiimaynta, hababka cilmi-baarista iyo muhiimada ay leedahay la wadaagida qoysaska natiijooyinka |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.A.2 | Wuxuu raacaa habraacyada ururinta indha-indhaynta, duubista iyo kaydinta macluumaadka | Wuxuu soo ururiyaa oo habeeyaa macluumaadka ku saabsan ilmo kasta, oo ay ku jiraan sawiro, qoraallada u fiirsiga, muunada shaqo, warbixinnada xubnaha qoyska iyo diiwaannada xasuus qorada si loogu isticmaalo doodaha iyo u qorsheynta ilmo kasta | Wuxuu dejiyaa shuruudo, habraacyo iyo hababka diiwaanka ee qiimaynta horumarka ilmaha ee Ingiriisiga iyo luqaddooda guriga; wuxuu hogaamiyaa dadaallada lagu qiimaynayo ilmo kasta waxa uu ku wanaagsan yahay iyo baahidiisa |
| IV.A.3 | Wuxuu qeexaa asalka luqadeed iyo dhaqan ee ilmo kasta oo uu u fiirsaday | Wuxuu ku qiimeeyaa ilmaha Ingiriisi iyo afkiisa ama afkeeda guriga mar kasta oo ay suurtagal tahay | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa habka ugu wanaagsan ee hadda jira iyo dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan ee la xiriirta qiimaynta carruurta kala duwan dhaqan iyo luqad ahaanba |
| IV.A.4 | Wuxuu u sharaxaa kuwa kale ee kooxda qiimaynta ku jira waxqabadka ilmaha ee waxqabadyada iyo hawlaha | Wuxuu soo koobaa oo la wadaagaa natiijooyinka qiimaynta qoysaska; wuxuu waydiiyaa fikradooda | Wuxuu falanqeeyaa natiijooyinka qiimaynta oo wuxuu la adeegsadaa macluumaadka qoysaska si ay u abuuraan dhaqamada korrinta ilmaha oo la isku raacsan yahay iyo yoolalka loogu talagalay koritaanka ilmaha |
| IV.A.5 | Wuxuu raaca tilmaamaha marka uu samaynayo qiimaynta socota si uu u hubiyo in si sax ah loo sameeyay | Waxay fuliyaa hababka qiimaynta oo qaabaynta oo socda; wuxuu adeegsadaa indho-indhayn joogto ah si loo aqoonsado horumarka laga muujiyay hadal ahaan iyo mid aan hadal ahaynba | Wuxuu qiimeeyaa oo doortaa qalabka qiimaynta ee ku haboon in loo isticmaalo iyadoo uu ku salaynayo baahiyaha ilmaha iyo ku haboonaanta korriinka ee habka xog ururinta (haddii turjumaan la isticmaalayo, wuxuu fahmayaa muhiimada daacad ahaanta habka qiimaynta) |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.A.6 | Wuxuu aqoonsadaa sida goobta la joogo, macnaha guud iyo qofka qiimaynayaa ay u saamayn karaan habka qiimaynta iyo natiijooyinka | Wuxuu aqoonsadaa oo yareeyaa saamaynta goobta la joogo, macnaha guud ama sifooyinka qiimeeyuhu ay ku leeyihiin habka qiimaynta iyo natiijooyinka | Wuxuu tusaaleeyaa, jiheeyaa oo dib ula eegaa hababka qiimaynta shaqaalaha la shaqeeya kuwaas oo dhimaya iyo/ama tirtiraya saamaynta ay ku leeyihiin natiijooyinka qiimaynta; waxa ku jira saamaynta xaalada/macnaha guud marka la turjumayo natiijooyinka |
| IV.A.7 | Wuxuu sheegaa xeerarka iyo qawaaniinta ee loogu talagalay caafimaadka iyo baaritaanada korriinka; wuxuu qeexaa farqiga u dhexeeya baarista, qiimaynta iyo qiyaasidda | Wuxuu siiyaa qoysaska macluumaadka ku saabsan baaritaanka iyo shuruudaha gobolka; wuxuu aqoonsadaa agabka carruurta leh qodobada khatarta; wuxuu la wadaagaa agabka waalidka iyo/ama mas'uuliyiinta; wuxuu sameeyaa u gudbinta adeegyada oo ku habboon | Wuxuu u sharxaa shaqaalaha la shaqeeeya, qoysaska iyo bulshada nidaamka maxalliga ah ee u gudbinta carruurta yaryar ee laga qabo welwelka caafimaadka iyo korriinka |

**B. Qiimaynta iyo Isticmaalka Xogta si wax loo Qorsheeyo** (Sidoo kale eeg: Cilaaqaadka lala leedahay Qoysaska)

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.B.1 | Wuxuu ka warbixiyaa macluumaadka maalinta ee ilmaha oo u siiyaa qoyskiisa ama keeda si ay uga caawiyaan u gudbitaanka wakhti ka baxsan daryeelka ilmaha qoyska | Wuxuu qoyska kala hadlaa hawlaha maalinlaha ah ee ilmaha si loo qorsheeyo oo kor loogu qaado joogtaynta u dhaxaysa guriga iyo barnaamijka daryeelka carruurta qoyska | Wuxuu dejiyaa oo la wadaaga xeelado wax ku ool ah qoyska si loo hubiyo in baahiyaha ilmaha la daboolayo; wuxuu kala shaqeyaa qoysaska in ay aqoonsadaan siyaabaha wax lagu baranayo in lagu kordhiyo guriga |
| IV.B.2 | Wuxuu dib u milicsadaa indha-indheynta oo si degdeg ah uga jawaabaa si uu u taageero xirfadaha cusub ee soo koraya | Wuxuu adeegsadaa indho-indhaynta ilmaha si uu u qorsheeyo hawlo macno leh oo kor u qaadaya korriinka iyo horumarka oo uu ku wargeliyaa xubnaha qoyska | Wuxuu falanqeeyaa natiijooyinka dhabta ah, qiimaynta waxqabadka ku salaysan ee barashada ilmaha ee Ingiriisiga iyo luqadda guriga; wuxuu si ula kac ah u isticmaalaa macluumaadka si uu u qorsheeyo oo u hago manhajka, waxbarista iyo la macaamilka ilmaha; wuxuu uga warbixiyaa qoysaska |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.B.3 | Wuxuu ilmaha u hagaajiyaa hawlaha isaga oo isticmaalaya macluumaadka qiimaynta | Wuxuu fududeeyaa barashada ilmaha iyadoo lagu salaynayo ilo badan oo macluumaad ah oo la ururiyay muddo wakhti ah (warbixinta waalid, indho-indhayn, baaritaan, qiimaynta qaabaynta) | Wuxuu u bedelaa deegaanka waxbarashada iyo xeeladaha waxbarista iyadoo ku salaysan natiijooyinka qiimaynta ilmaha; wuxuu bedelaadaha la socodsiiyaa shaqaalaha la shaqeeya iyo mutadawiciinta |
| IV.B.4 | Wuxuu u fiirsadaa isdhexgalka qoysaska oo si uu ula kac ah xubnaha qoyska ugu sheegaa waxyaabaha ay ku xooganyihiin | Wuxuu soo ururiyaa macluumaad si uu si fiican u fahmo dabiicadda iyo xoogga qoys kasta si ay u bixiyaan macluumaadka, hagitaanka iyo taageerada loogu talagalay qoyska oo ah cilaaqaadka aasaasiga ah ee ka dhex jira waxbarashadu. | Wuxuu tixgeliyaa arrimaha ka qaybqaata adkeysiga iyo khatarta ku jira horumarinta cilaaqaadka qoyska ee caafimaadka qaba wuxuuna ku soo daraan barnaamijka |

## C. Qiimaynta iyo Isticmaalka Xogta si kor loogu Qaado loona Ilaaliyo Tayada Barnaamijka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.C.1 | Wuxuu ka qaybqaata qiimaynta barnaamijka oo ay ku jirto isticamaalka qalabka qiimeynta si loo xaqiijiyo horumarinta barnaamijka oo joogto ah | Wuxuu ka tarjumayaa waxtarka barnaamijka isagoo adeegsanaya xogta qiimaynta iyo natiijooyinka qiimaynta si uu u hubiyo si loo hubiyo horumarinta barnaamijka oo joogto ah | Wuxuu doortaa farsamooyin kala duwan, qalab qiimayn iyo habraacyo lagu qiimeeyo waxtarka barnaamijka; wuxuu wax ka beddelaa barnaamijka marka loo baahdo |
| IV.C.2 | Wuxuu ka qaybqaataa dejinta yoolka barnaamijka | Waxa uu ka qayb qaataa qorshaynta istiraatijiyadeed iyo dejinta yoolalka barnaamijka ee ku salaysan qiimaynta | Wuxuu kala shaqeeyaa qorshaynta istiraatijiyadeed iyo dejinta yoolalka barnaamijka iyadoo adeegsanayo cilmi-baarista hadda jirta iyo isbeddellada moodeelada barnaamijka |

## 2020 D. Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.D.1 | Wuxuu ku dhiirigeliyaa carruurta inay keli keli u dhexgalaan caruurta kale iyo koox yar ahaan iyo koox weynba marka ay sahaminayaan, tijaabinayaan, iyo xalinayaan dhibaatada iyagoo xaqiijinaya kala duwanaanshaha shakhsi ahaaneed iyo dhaqameed. | Wuxuu siiyaa carruurta waxqabadyo macne leh, gacan ku qabasho ah oo taageera oo ku celceliya xirfadaha cusub ee ay barteen, wuxuu dhiirigeliyaa sahaminta iyo tijaabinta iyda oo lagu sii dul dhisayo xirfadaha lagu soo bandhigay guriga iyo iskuulka | Wuxuu dhisaa jawi waxbarasho oo u ogolaanaya carruurta inay wax doortaan, ka qaybqaataan khibradaha shaqsi ahaan, koox yar ahaan iyo koox weynba marka ay sahaminayaan, tijaabinayaan, iyo xalinayaan dhibaatada iyagoo ku sii dul dhisaya xirfadaha lagu soo bandhigay guriga iyo iskuulka |
| IV.D.2 | Wuxuu aqoonsadaa xirfadaha sarreeya iyo kartida ay carruurtu ku soo bandhigaan guriga ee lagu qiimeeyo dhaqankooda oo ay qiimeeyaan qoysaskooda<br><br>Wuxuu ku dhiirigeliyaa qoysaska inay ogaadaan oo ay ka hadlaan xirfadaha iyo awoodaha ay carruurtu ku soo bandhigaan guriga<br><br>Wuxuu meesha ka saarayaa malo-awaalka ah in carruurta midabka ah uu inta badan koritaankoodu uu daahsanyahay, wuxuuna aqoonsan karaa xirfadaha horumarsan iyo sidoo kale marka ay caajisaan carruurta midabka ah. | Wuxuu ka qaybgeliyaa qoysaska wada sheekaysiga ku saabsan xirfadaha horumarsan ee ilmaha iyo kartida lagu soo bandhigo guriga oo laga yaabo inaan si fudud loogu arki karin/loogu qeexin iskuulka<br><br>Wuxuu qorsheeyaa hawlaha waxbarashada oo xaqiijiyanaya oo wax ku ool ah isagoo weydiinaya su'aalo qoysaska oo soo saaraya faahfaahinta gacan ka geysaneysa horumarinta xeeladaha waxbarista ee si fiican ugu shaqeeya carruurta ka soo jeeda asal dhaqameedyo kala duwan | Isticmaalka fikradda qoyska, wuxuu iskaashi la sameeyaa dadka la shaqeeya si ay si sax ah ugu turjumaan oo si habboon isugu xiraan xirfadaha iyo kartida carruurtu ku soo bandhigayaan guriga iyo iskuulka Tusayaasha Horumarka Carruurnimada Hore ee Minnesota iyo halbeegyada kale iyo qiimaynaha loo isticmaalo goobta |
| IV.D.3 | Wuxuu u fiirsadaa ilmo kasta maalin kasta, isagoo isticmaalaya habraacyada uu dejiyo barnaamijku ee ay wargeliyaan waalidiinta/qoysasku | Wuxuu adeegsadaa habab kala duwan, oo ay ku jiraan qaar dhaqan ahaan gaar ah, marar badan si uu u eego una qiimeeyo meelaha ay ku wanaagsan yihiin, baahiyaha, danaha, dookhyada, iyo siyaabaha ay ugu jawaabaan dadka iyo dhacdooyinka | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha la shaqeeya fikradaha qiimaynta iyo hababka cilmi-baarista, oo ay ku jiraan qaar dhaqan gaar u gooni, iyo muhiimada ay leedahay la wadaagida qoysaska natiijooyinka |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.D.4 | Wuxuu aqoonsadaa marka u fiirsashada fasalka iyo qiimayntu aysan qaban ama ka tarjumaynin xirfadaha iyo kartida ay qoysasku qadariyaan, kuwaas oo qaarkood laga yaabo inay dhaqan ahaan gaar u yihiin. | Wuxuu doortaa qalabka ku habboon ee dhaqan ahaan cayiman wuxuuna la shaqeeyaa qoysaska si uu u caawiyo aqoonsiga xirfadaha iyo kartida iyo inuu ku wargeliyo qiimeynta carruurta | Wuxuu u doodaa oo mudnaanta siiya qalabka ku habboon dhaqan ahaan iyo dhaqan ahaan cayiman in lagu isticmaalo barnaamijka qiimaynta carruurta<br><br>Wuxuu ku tababaraa iyo ku hagaa shaqaalaha siyaabaha loo isticmaalo macluumaadka dheeraadka ah ee qoysaska ka yimaada qiimeynta carruurta |

5

# Nuxurka Aagga V:
# **Horumarka Taariikhiga ahaa iyo ka Casriga ah ee Waxbarashada Carruurnimada Hore**

## Halbeegga PELSB

***Baraha carruurta yaryari wuxuu fahmayaa horumarka taariikhiga ahaa iyo ka casriga ah ee waxbarashada carruurnimada hore.***

Baruhu waa inuu fahmo:

- aasaasyada taariikhaha badan, falsafada, iyo aasaaska bulsho ee waxbarashada carruurnimada hore iyo sida aasaasyadani u saameeyaan fikirka iyo hab dhaqanka hadda jira.
- saamaynta xaaladaha bulshada ee carruurta iyo qoysaska, iyo arrimaha hadda jira iyo isbeddellada, arrimaha sharciga, sharci dejinta, iyo siyaasadaha kale ee dadweynaha ee saameeya carruurta, qoysaska, iyo barnaamijyada carruurta yaryar iyo xirfadda shaqo ee carruurnimada hore.

## Kartiyaha

### A. Fahamka Aasaaska Horumarka/Korriinka Carruurnimada Hore

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| V.A.1 | Wuxuu aqoonsadaa dhaqamada taariikhiga ahi in laga yaabo in ay saamayn ku yeelan karaan barnaamijka iyo isdhexgalka carruurta | Wuxuu soo koobaa saamaynta taariikheed, bulsho, iyo siyaasadeed ay ku leeyihiin hab dhaqamd carruurnimada hore ee hadda jira | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha la shaqeeeya, qoysaska iyo bulshada xirfadda carruurnimada hore iyo saamaynta taariikheed, bulsho, iyo siyaasadeed ee hab dhaqamdeeda hadda jira |
| V.A.2 | Wuxuu ogsoonyahay in aragtida korriinka iyo cilmi-baaristu ay matalaan aragtiyo gaar ah oo aanay daruuri ahayn in dhammaan la wada aaminsanyahay | Waxa uu ka hadlaa aragtiyo kala duwan oo horumarineed iyo dhaqameed, aragtiyaha iyo cilmi baarista | Wuxuu dib u milicsadaa aragtiyaha horumarinta dhaqanka iyo cilmi-baarista iyo sida ay u saamayso dabeecadda shakhsi ahaaneed iyo hab dhaqanka |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| V.A.3 | Wuxuu aqoonsadaa in aragtiyo hadda socdaa jiraan oo laga yaabo inay saameyn ku yeeshaan barnaamijka iyo la falgalka carruurta | Wuxuu aqoonsadaa aragtiyo hadda jiraa ay jiraa iyo hab waxqabadka caddaynta ku salaysan ee xirfada shaqo ee carruurnimada hore oo uu dib u eegis ugu sameeyaa hab dhaqanka si waafaqsan | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa habka ugu wanaagsan ee hadda jira iyo dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan ee isdhexgalka maalinlaha ah iyo la adeegsadaa carruurta iyo qoysaska |
| V.A.4 | Wuxuu aqoonsanyahay qiimaha ay tayadu u leedahay barnaamijyada daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada | Wuxuu tusaaleeyaa dadaalka horumarinta/hagaajinta ah ee joogtada ah si loo dhiso barnaamij tayo leh | Wuxuu horumariyaa dadaallada horumarinta tayada ee maxalliga ah, gobolka iyo qaranka; wuxuu baraa macaamiisha |

## B. U hogaansanaanta Xeerarka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| V.B.1 | Wuxuu sheeqaa xeerarka barnaamijka | Wuxuu fuliyaa xeerarka barnaamijka | Wuxuu gacan ka geystaa abuurista xeerarka gobolka ama barnaamijka |
| V.B.2 | Wuxuu qeexaa xeerarka federaalka, gobolka, qabaa'ilka iyo deegaanka ee saameeya barnaamijka carruurnimada hore sida dadaallada tayada | Wuxuu bixiyaa barnaamijyo waafaqsan heerarka ay dajiyeen federaalka, gobolka, qabaa'ilka iyo xeerarka caruurnimada hore ee deegaanku | Wuxuu gacan ka geystaa horumarinta iyo/ama wuxuu u sharaxaa dadka wada shaqeeyaan, qoysaska iyo xubnaha bulshada sharciyada dawlada dhexe, gobolka, qabiilka iyo deegaanka ee la xiriira barnaamijka carruurnimada hore |

# Nuxurka Aagga VI: **Xirfadle ahaaanshaha**

## Halbeegga PELSB

***Bareyaasha carruurta yaryar wuxuu muujiyaa aragtida horumarka xirfadeed in uu yahay dadaalka iyo mas'uuliyadda socota nolosha xirfadaada oo dhan, oo ay ku jiraan ka qaybgalka barashada shakhsiyeed maalin kasta iyo dadaal dheer oo xirfada shaqo oo dhan ah iyo mas'uuliyad si ay u wargeliso hab dhaqamada waxbarida iyo la falgalka carruurta yaryar.***

Baruhu waa inuu fahmo:

- ka qayb qaadashada waxbarashada joogtada ahi waxay lama huraan u tahay bixinta daryeel iyo waxbarasho wax ku ool ah.
- sida loo dhaqangeliyo hab dhaqamada waxtarka leh.
- hab dhaqamada muujiya hab dhaqanka xirfada iyo akhlaaqda shaqada.

## Kartiyaha

### A. Engaging in Professional Development

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.A.1 | Wuxuu ka qaybqaataa hawlaha horumarinta xirfadeed ee socda, waxa uu waydiiyaa su'aalo, oo ka dib u milicsi ku sameeyaa waxbarashada | Wuxuu qorsheeyaa, hawlgeliyaa oo dib u milicsadaa siyaabaha lagu horumarinayo kartida shakhsi ahaaneed iyada oo loo marayo shirarka xirfadeed, khayraadka, waxbarasho iyo fursadaha tababarka oo dheeraad ah | Waxay mudnaanta siiyaa hawlaha horumarinta xirfadeed oo joogto ah naftiisa iyo dadka kaleba, wuxuuna waafajiyaan hab dhaqamada |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.A.2 | Wuxuu fahmayaa in koboca xirfadeed yahay geedi socod joogto ah; wuxuu ka tarjumayaa barashada oo ku soo daraa u fulinta ficil ahaan | Wuxuu horumariyaa oo qaabeeyaa hab-dhaqannada ugu wanaagsan mar kasta, oo ay ku jiraan marka ay la shaqaynayaan ardayda, mutadawiciinta/tabaruceyaasha iyo qoysaska | Wuxuu kormeeraa dadka ay wada shaqeeyaan, macalimiinta ardayda, ardayda tababarka shaqada ku jirta iyo mutadawiciinta si uu uga taageero adeegsiga hababka ugu wanaagsan iyo gaaritaanka yoolalka horumarinta xirfadda |
| VI.A.3 | Wuxuu aqoonsadaa meelaha uu ku wanaagsanyahay iyo fursadaha koritaanka iyo isbeddelka; wuxuu kaga jawaabaa rayi celinta waxtarka leh isaga oo kormeeraya oo beddelaya dabeecadda | Wuxuu dib u milicsadaa waxbarista iyo hab dhaqanada barnaamijka, indho-indheynta carruurta, natiijooyinka, rayi celinta iyo dhaleecaynta wax dhisaysa si loo sii horumariyo yoolalka gaarka ah ee waxbarista iyo hagaajinta hab dhaqamada | Wuxuu qiimeeyaa kala duwanaanshaha shaqiyaadka, aragtiyaha badan iyo qiyamka lagu arkay hab dhaqamada waxbarida ee kala duwan |
| VI.A.4 | Wuxuu leeyahay ama uu kasbanayaa xirfado teknolojiyad oo waxtar leh si uu u taageero yoolalka barnaamijka | Wuxuu adeegsadaa xirfadaha tignoolajiyada si uu u gaaro yoolalka barnaamijka | Wuxuu abuuraa xeerarka barnaamijka ee ku saabsan isticmaalka habboon ee warbaahinta, softiweerka iyo tignoolajiyada iyo isticmaalkeeda |
| VI.A.5 | Waxa uu aqoonsanyahay in websaysyadu ay leeyihiin heerar kala duwan oo macluumaad lagu kalsoonaan karo | Waxa uu dib u eegaa macluumaadka websaydyada si uu u go'aamiyo heerka kalsoonida isaga oo adeegsanaya halbeegyada caadiga ah | Wuxuu falanqeeyaa macluumaadka websaydyada wuxuuna si joogto ah ugu tiirsan yahay khayraadka lagu kalsoonaan karo; si habboon u tixraaca macluumaadka |

## B. Muujinta Anshaxa Xirfadle ahaaanshaha

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.B.1 | Wuxuu sheegaa hadafka iyo ujeedada barnaamijka | Wuxuu dhiirigeliyaa hadafka iyo ujeedada barnaamijka | Wuxuu u sharaxaa hadafka, ujeedada iyo halbeegyada barnaamijka asxaabta shaqada, qoysaska, iyo dadka kale |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.B.2 | Wuxuu aqoonsadaa nidaamka caqiidiisa ee ku saabsan daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada | Wuxuu qeexaa falsafada shakhsiyeed ee daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada | Wuxuu qiimeeyaa barnaamijka(yada) daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore iyo hab dhaqamadu in ay waafaqsanyihiin falsafada shaqsiyeed |
| VI.B.3 | Wuxuu la samaystaa xuduudaha xirfadeed ee uu la leeyahay carruurta, qoysaska iyo dadka la shaqeeya | Wuxuu qeexaa oo uu ka hadlaa arrimaha iyo xuduudaha cilaaqaadka uu la leeyahay qoysaska iyo asxaabta | Wuxuu abuuraa xeerar wuxuuna sharxaa arrimaha la xiriira samaynta cilaaqaad xirfadeed oo lala yeesho qoysaska iyo dadka la shaqeeya |
| VI.B.4 | Wuxuu aqoonsadaa marka arrimaha khuseeya anshaxu ay soo baxaan  uu la wadaagaa welwelka shaqaalaha la shaqeeya | Wuxuu u hoggaansamaa oo uu tixraacaa xeerka anshaxa ee Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar (NAEYC) ee daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore oo uu tusaaleeyaa u adeegsigeeda go'aan qaadashada | Wuxuu u sharaxaa dadka la shaqeeeya iyo qoysaska sida xeerka anshaxa ee NAEYC loogu isticmaali karo samaynta go'aannada xirfadeed; wuxuu gacan ka geysataa xallinta dhibaatooyinka kooxeed ee ku salaysan jaahwareerka anshaxa |
| VI.B.5 | Wuxuu muujiyaa isogaanshaha nafeed iyo daryeel naftiisa | Wuxuu dib u milicsadaa fayo-qabkiisa niyadeed, saamaynta ay ku leedahay carruurta yaryar iyo faciisa wuxuuna qaadaa tillaabooyin si ay maskax ahaan u caafimaad qabaan iyo sidoo kale inay iska ilaaliyaan ka daalitaanka | Wuxuu u tusaaleeyaa kuwa kale siyaabaha ay isu daryeeli karaan si ay si wanaagsan u daryeelaan dadka kale |
| VI.B.6 | Wuxuu magacaabi karaa hal hawl xirfad-yaqaan, urur, guddi ama kooxaha isku xirka | Wuxuu ka qaybqaataa hal ama wax ka badan oo ah hawl xirfad-yaqaan, urur, guddi ama kooxaha isku xirka ah | Wuxuu u adeegaa boos hogaamin ah oo ah hawl xirfad-yaqaan, urur, guddi ama kooxaha isku xirka ah |

## 2020 C. Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.C.1 | Wuxuu aqoonsadaa meelaha uu ku wanaagsanyahay iyo fursadaha koritaanka iyo isbeddelka isagoo raadinaya xaaladaha uu qofku dhaqan, isir, ama qowmiyad ahaan yahay kuwa laga tirada badan yahay; wuxuu kaga jawaabaa rayi celinta ay siiyaan xirfadlayaasha ee waxtarka leh isaga oo kormeeraya oo beddelaya dabeecadda | Wuxuu dib u milicsadaa waxbarista iyo hab dhaqanada barnaamijka, indho-indheynta carruurta, natiijooyinka, rayi celinta iyo dhaleecaynta wax dhisaysa ee ka timaadda faca kale ee jinsiyadda, dhaqanka, ama qowmiyad kala duwan si loo sii horumariyo yoolalka gaarka ah ee waxbarista iyo hagaajinta hab dhaqamada | Wuxuu qiimeeyaa kala duwanaanshaha shaqiyaadka, aragtiyaha badan iyo qiyamka lagu arkay hab dhaqamada waxbarida ee kala duwan, isagoo fiiro gaar ah ugu fiirsanaya fikradaha aan ku talagalka ahayn, ee dhaqanka ku salaysan |
| VI.C.2 | Wuxuu sahamiyaa oo dib u milicsadaa aqoonsiga dhaqankiisa, malo-awaalka, dookhyada, mudnaanta uu haysto, iyo eexda/qof jeclaysiga, isagoo qeexaya sida ay ku yimaadeen oo loo xoojiyay ama loo dhimay. | Wuxuu aqoonsadaa siyaabaha qofka dhaqankiisa iyo mudnaanta uu haysto ay u saameeyaan hab dhaqamada, hababka, iyo xeeladaha<br><br>Wuxuu go'aamiyaa isbeddelada ay tahay in la sameeyo si si wax ku ool ah wax loo baro carruurta ka soo jeeda asal dhaqameedyo gooni ah | Wuxuu kor u qaadaa oo iskaashi la sameeyaa dadka ay wada shaqeeyaan, macalimiinta ardayda ah iyo ardayda tababarka shaqo ku jirta si ay u habeeyaan taageerada loogu talagalay dib u milicsiga ee mudnaanta shakhsiyeed, wacyiga dhaqameed, iyo eexda qarsoon ee naftooda iyo shaqaalaha barnaamijka |
| VI.C.3 | Wuxuu aqoonsadaa udub dhexaad ahaanshaha dhaqanka, jinsiyada, iyo aqoonsiga qowmiyadeed ay u leeyihiin horumarka caafimaadka qaba | Wuxuu muujiyaa oo tusaaleeyaa xiisaha iyo aqoonta ku saabsan shaqada cilmi-baarayaasha midabka leh ee ku saabsan mabaadi'da horumarka ilmaha caafimaadka qaba ee bulshooyinka dhaqameedyada gaarka ah<br><br>Wuxuu hab dhaqankiisa ku fuliyaa mabaadi'da muhiimka ah ee gaarka u ah korriinka ilmaha caafimaadka qaba ee bulshooyinka dhaqameed | Wuxuu ku taliayaa cilmi-baarayaasha midabka leh, horumarinta iyo iskwaashiga asxaabta shaqada, macallimiinta ardayda ah iyo ardayda tababarka shaqada ku jirta inay ku daraan shaqadooda ku habboon xeerarka iyo hab dhaqanka barnaamijka<br><br>Wuxuu dejiyaa tallaabooyinka la xisaabtanka ee shaqaalaha iyo dadka ay wada shaqeeyaan doorkooda ku aaddan horumarka caafimaadka leh ee carruurta |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.C.4 | Wuxuu u fiirsadaa oo dib u milicsadaa dhaqamadiisa edbinta si uu u ogaado haddii noocyo gaarka ah oo carruurta ah uu si xun iyo si aan la sinnayn kuwa kale uu u soo qabsado, tusaale, carruurta maqaarkoodu madow yahay, ama carruurta aad u firfircoon oo dareenkooda sheegta. | Wuxuu doortaa tababarayaal iyo hagayaal si uu u garto eexda qarsoon iyo horumarinta xeeladaha lagaga gudbi karo<br><br>Wuxuu doortaa tababarayaal iyo hagayaal caawinooo xagga farsamooyinka maaraynta fasalka ee waxtarka leh ee carruurta ka soo jeeda dhaqamo kala duwan | Wuxuu abuuraa  oo abaabulaa fursadaha loogu talagalay shaqaalaha iyo dadka wada shaqeeya si ay u helaan macluumaad, tababaro wax ku ool ah, hagitaan, iyo hogaamin, iyadoo xoogga saaraysa doorka ay qaadato eexda aan tooska ahayn ay ka qaadato farsamooyinka wax ku oolka ah ee maaraynta fasalka ee carruurta ka soo jeeda dhaqamo kala duwan |

# Nuxurka Aagga VII:
# **Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada**

## Halbeegga PELSB

***Baraha carruurta qoyska ee carruurta yaryar waxa uu fahmaa muhiimada ay leedahay samaynta iyo ilaalinta deegaan hubinaya caafimaadka, badbaadada iyo nafaqada ilmo kasta.***

Baruhu waa inuu fahmo:

- sida loo dhiso hab dhaqamo caafimaad leh.
- sida loo hubiyo badbaadada.
- sida loo bixiyo nafaqo caafimaad leh.

## Kartiyaha

### A. Abuuritaanka Hab Dhaqamo Caafimaadka leh

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.A.1 | Wuxuu siiyaa tusaalayaasha ilaha qaranka iyo deegaanka ee halbeegyada caafimaadka iyo badbaadada ee barnaamijyada caruurnimada hore; wuxuu u hoggaansamaa xeerarka shatiga ee caafimaadka, badbaadada iyo nafaqada | Wuxuu dejiyaa oo si joogto ah dib u eegaa hawlaha caafimaadka iyo deegaanka waxbarashada si loo hubiyo u hoggaansanaanta xeerarka shatiga oo uu kusoo daraa halbeegyada caafimaadka qaranka | Wuxuu falanqeeyaa oo qiimeeyaa siyaasadaha iyo hababka hadda jira inay waxtarka leeyihiin iyo u hoggaansanaanta halbeegyada caafimaadka iyo badbaadada qaranka iyo sidoo kale xeerarka federaalka, gobolka iyo deegaanka;wuxuu hirgeliyaa isbeddelka marka loo baahdo; wuxuu la shaqeeyaa xirfadlayaasha caafimaadka iyo badbaadada si ay u hagaan hab dhaqanka hadda jira |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.A.2 | Wuxuu bixiyaa tusaalooyin ku saabsan hab dhaqamada caafimaadka iyo badbaadada leh | Wuxuu kala hadlaa xeerarka caafimaadka iyo badbaadada xubnaha qoyska wuxuuna siiyaa qoysaska macluumaad qoraal ah oo ku saabsan xeerarka caafimaadka iyo badbaadada kahor intaan la diiwaaangelin | Wuxuu ka war hayaa oo la socodsiiyaa macluumaadka cusub ee caafimaadka iyo badbaadada shaqaalaha, qoysaska iyo hawl-wadaagyada bulshada; wuxuu isbeddellada lagu taliyey ku soo daraa hab dhaqanka maalinlaha ah |
| VII.A.3 | Wuxuu ku sameeyaa baaritaan caafimaad oo maalinle ah carruurta marka ay soo galayaan goobta daryeelka carruurnimada hore; wuxuu garanayaa calaamadaha jirrada wuxuuna raacaa tilmaamaha loogu talagalay saaritaanka/ bixinta carruurta jirran | Wuxuu siiyaa xubnaha qoyska fikradda ka dambeeya xeerarka ku saabsan ka saarista iyo dib ugu soo celinta carruurta iyo dadka ay wada shaqeeyaan ee jirran; wuxuuna la xiriirtaa qoysaska ay suurtagal tahay in ay soo gaareen cudurrada faafa | Wuxuu uga warbixiyaa cudurrada faafa hay'adaha caafimaadka dadweynaha ee ku habboon wuxuuna fuliyaa talooyinka caafimaadka dadweynaha si looga hortago loona xakameeyo sii faafitaanka cudurrada kale |
| VII.A.4 | Wuxuu ku dhaqmaa halbeegyada ku habboon da'da si loo yareeyo faafitaanka cudurrada faafa sida gacmaha dhaqidda, adeegsiga musqulaha, nadiifinta alaabta carruurtu ku ciyaarto, iyo xafaayadaynta | Wuxuu baraa (oo caawiyaa) carruurta, wuxuuna ku wargeliyaa xubnaha qoyska iyo shaqaalaha hab dhaqamada nadaafadda aasaasiga ah sida gacmo-dhaqashada, caafimaadka afka, kaydinta alaabta shakhsiyeed sida mujurucyada iyo cadayga | Wuxuu la shaqeeyaa la-taliyayaasha caafimaadka carruurnimada hore/daryeelka carruurta iyo wakaaladaha caafimaadka dadweynaha si loo ilaaliyo sharciyada iyo dhaqamada caafimaadka ee ku salaysan cilmi baarista iyo hababka ugu wanaagsan (tusaale, nafaqo yaqaanka, deegaan yaqaanka, la taliyaha caafimaadka) |
| VII.A.5 | Wuxuu aqoonsadaa in ilmo kasta uu leeyahay diiwaan caafimaad; wuxuuna ilaaliyaa sir ahaaanshaha | Wuxuu la shaqeeyaa qoysaska si uu u ilaaliyo diiwaanada caafimaadka oo ku cusboonaysiisan baaritaanada jirka iyo afka, talaallada, baaritaanada korriinka iyo macluumaadka xiriirka xaaladaha degdega ah | Wuxuu soo jeediyaa habraac wuxuuna fuliyaa qorshaha loogu talagalays caafimaadka iyo badbaadada ee ilmo kasta |
| VII.A.6 | Wuxuu raacaa qorshayaal caafimaad oo qoran iyo qorshaha xaaladaha degdeg ah oo loogu talagalay ilmo kasta oo qaba baahiyaha daryeelka caafimaadka iyo naafonimada oo ay ku jiraan xaaladaha sida sonkorowga, suuxdinta, neefta, iwm. | Wuxuu la shaqeeyaa qoysaska iyo xirfadlayaasha caafimaadka si loo hubiyo in ilmo kasta oo leh baahiyo caafimaad oo gaar ah uu leeyahay qorshe caafimaad iyo qorshaha xaaladaha degdeg ah oo qoran oo la raaco | Wuxuu la shaqeeyaan xirfadlayaasha caafimaadka bulshada si loo hubiyo in baahiyaha caafimaad ee carruurta iyo qoysaska la daboolo |

## B. Hubinta Badbaadada

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.B.1 | Wuxuu sameeyaa hubinta badbaadada maalinlaha ah ee gudaha iyo dibadda deegaanka iyo qalabka; wuxuu aqoonsadaa khataraha iman kara wuuna saxaa | Wuxuu isticmaalaa aqoonta halbeegyada caafimaadka iyo badbaadada qaranka iyo sidoo kale khatarta dhaawaca ee la xiriirta heerka korriinka ilmaha iyo awoodaha si uu u qorsheeyo jawi u ogolaanaya ilmaha inuu ciyaaro oo sahamiyo isagoo ammaan ah oo si wanaagsan loo kormeerayo. | Wuxuu abuuraa xeerar qoran wuxuuna adeegsadaa halbeegyada iyo xeeladaha cilmi-baarista ku salaysan si kor loogu qaado badbaadada loogana hortago dhaawacyada |
| VII.B.2 | Wuxuu qeexaa qorshayaasha xaaladaha degdega ah wuxuuna raacaa xeerarka iyo nidaamyada barnaamijka | Wuxuu qorsheeyaa oo ku dhaqmaa tababarada xaaladaha degdega ah oo ku salaysan jadwal joogto ah; wuxuu ilaaliyaa oo xaqiijiyaa helitaanka macluumaadka xiriirka xaaladaha degdega ah iyo agabka gargaarka koowaad mar kasta | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa cilmi-baarista hadda jirta iyo hababka ugu wanaagsan ee hababka xaaladaha degdega ah oo uu fuliyaa isbeddellada |
| VII.B.3 | Wuxuu sharaxaa oo raacaa xeerarka iyo nidaamyada kaydinta iyo maamulka dawada | Wuxuu fahmaa oo uu fuliyaa xeerarka maamulka daawaynta iyo habraacyada daawooyinka duwaanka laga soo iibsado iyo daawooyinka dhakhtarku qoro, oo ay ku jiraan diiwaangelinta, kaydinta dawada, waxa ay tarto iyo iyo waxyeelada | Wuxuu la shaqeeyaa xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka si ay u qiimeeyaan, u qiyaasaan oo ay si joogto ah ugu horumariyaan sharciyada iyo hababka daawaynta ee ku salaysan cilmi baarista hadda ah iyo hababka ugu wanaagsan |
| VII.B.4 | Wuxuu sharaxaa oo raacaa xeerarka iyo hababka ugu wanaagsan ee gaadiidka badbaadada leh ee carruurta baabuurka saaran | Wuxuu barayaa shaqaalaha ay wada shaqeeyaan, qoysaska iyo mutadawiciinta iyo kuwa kale ee loo oggolaaday inay qaadaan carruurta wax ku saabsan badbaadada ilmaha gaadiidka saaran iyo isticmaalka hababka xakamaynta ilmaha ee baabuurta kuwaas oo da'da iyo miisaanka ku haboon oo u hoggaansamaya sharciyada iyo xeerarka gobolka iyo federaalka | Wuxuu soo saaraa xeerar qoran oo qeexaya hababka la isticmaalo in si badbaado leh loogu qaado carruurta baabuurta |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.B.5 | Wuxuu qeexaa xeerarka iyo xeeladaha looga hortagayo dhaawacyada wuxuuna bixiyaa kormeer joogto ah | Wuxuu horumariyaa ka-hortaga dhaawaca ku yimaada ilmaha isaga oo baraya carruurta iyo qoysaska dhaqamada ammaanka ah; wuxuu hubiyaa in jawiga deegaanka iyo waxqabadyada la qorsheeyay loo abuuray loona ilaaliyo in ay yihiin waxbarasho badbaado leh | Wuxuu dejiyaa xeerar qoran oo qeexaya hababka la isticmaalo si looga hortago dhaawacyada lama filaaka ah oo ay ku jiraan dhicitaanka, dabka iyo gubashada, qarqidda iyo sunta; wuxuu siiyaa qoysaska xogta iyo agabka la xiriira ka hortagga dhaawaca caruurnimada |
| VII.B.6 | Wuxuu si toos ah carruurta ugu kormeeraa aragga ama maqalka mar kasta; wuxuu saadaaliyaa oo uu ka ilaaliyaa carruurta xaaladaha aan ammaan ahayn; wuxuu ka caawiyaa carruurta inay raacaan xeerarka badbaadada | Wuxuu baraa fikradaha iyo xeerarka badbaadada carruurta, qoysaska iyo dadka la shaqeeya; wuxuu ugu dhaqmaa si joogto ah | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa cilmi-baarista hadda jirta iyo hababka ugu wanaagsan si loo dhiso xeerar iyo nidaamyo badbaado leh |
| VII.B.7 | Wuxuu aqoonsadaa oo uu ka ilaaliyaa carruurta inay la kulmaan khataraha la xiriira deegaanka (sida sunta cayayaanka, daawaynta cawska, xayawaanka/ xawayaanka rabaayada ah, caaryada, caaryada, qashinka, xafaayadda, injirta, cayayaanka, tayada hawada, iwm.) | Wuxuu ilaaliyaa xeerarka iyo nidaamyada la xiriira khataraha deegaanka iyo caafimaadka iyo badbaadada ilmaha | Wuxuu qiimeeyaa oo meesha ka saaraan cilladaha deegaanka iyo welwelka wuxuuna xaqiijiyaa xeerarka iyo habraacyadu inay cusboonaysiisanyihiin |
| VII.B.8 | Wuxuu qaataa oo uu haystaa shahaadada aan dhicin oo ah Gargaarka Koowaad iyo CPR; wuxuu bixiyaa daryeel ku habboon dhaawacyada wuxuuna diyaar u yahay inuu sameeyo CPR | Wuxuu dejiya oo ilaaliyaa nidaamka diiwaangelinta iyo ka warbixinta dhaawacyada; wuxuu qoysaska siiyaa digniinaha cusub ee badbaadada macaamiisha ah iyo talooyinka | Wuxuu falanqeeyaa oo qiimeeyaa heerarka dhaawaca iyo qaababkooda oo adeegsadaa dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan iyo habka ugu wanaagsan ee hadda jira si kor loogu qaado badbaadada loogana hortago dhaawacyada; wuxuuna Guddida Badbaadada Alaabta Macaamiisha uga warbixiyaa badeecooyinka laga yaabo inay dhaawac u geysteen |

## C. Bixinta Cunto Caafimaad leh

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.C.1 | Wuxuu raac xeerarka shatiga iyo qawaaniinta cuntada ee la xiriira nafaqada, kaydinta cuntada ee badbaadada leh, diyaarinta, maaraynta iyo qaybinta, (oo ay ku jiraan caanaha naaska) | Wuxuu tusaaleeyaa oo uu kormeeraa diyaarinta iyo qaybinta cuntada ee badbaadada leh (oo ay ku jiraan caanaha naaska) | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa cilmi-baarista hadda jirta iyo hababka ugu wanaagsan si loo dejiyo xeerarka iyo dhaqamada diyaarinta iyo qaybinta cuntada ee badbaadada leh |
| VII.C.2 | Wuxuu liisteeyaa qaybaha ay ka koobantahay cuntada caafimaadka leh ee loogu talagalay carruurta yaryar isaga oo isticmaalaya Tilmaamaha Waaxda Beeraha-Barnaamijka Cuntada Daryeelka Carruurta iyo Dadka Waaweyn ee Maraykanka (USDA-CACFP) | Wuxu xaqiijiyaa in diiwaanada cuntadu ay hoggaansamaan hagaha nafaqada ee USDA-CACFP oo ay siiyaan cuntooyin beddelaad iyo cunto fudud carruurta qabta xasaasiyadda cuntada ama baahiyaha cunto ee gaarka ah. | Wuxuu ka qaybgeliyaa carruurta iyo qoysaska qorshaynta diiwaanka cuntada wuxuuna ku daraa dookhyada cuntada dhaqamada; wuxuu bixiyaa macluumaad ku saabsan doorashooyinka cuntada caafimaadka leh |
| VII.C.3 | Wuxuu la fadhiistaa oo wax la cunaa carruurta; wuxuu tusaaleeyaa hab-dhaqan cunto caafimaad leh oo dhiirigelinaysa wada sheekeysiga togan iyo is-dhexgalka bulshada | Wuxuu u bixiyaa cuntooyinka qaabka qoyska iyo wakhtiyada cuntada fudud kuwaas oo dhiirigeliya dhaqamada cuntada caafimaadka leh iyo ka qaybgalka bulshada | Wuxuu dhisaa deegaan taageeraya horumarka ku habboon da'da ee quudinta, is-caawinta nafeed iyo xirfadaha bulshada iyo dareenka shucuurta |
| VII.C.4 | • Wuxuu aqoonsadaa oo iska ilaaliyaa khataraha caafimaadka ee la xiriira cuntada sida ku saxashada iyo xasaasiyadda. | Wuxuu bixiyaa cunto ku habboon da'da oo aan la xiriirin saxashada ama khatarta gubashada; wuxuu si firfircoon u kormeeraa inta lagu guda jiro waxqabadyada cuntada si loo hubiyo in carruurtu ay fariistaan marka ay wax cunayaan oo aanay ku hawlanayn waxqabadyo keeni kara khatarta in ay ku mergadaan (sida, in afka lagu ururiyo cuntada ama in la seexdo); wuxuu aqoon u leeyahay carruurta leh xasaasiyadda cuntada wuxuuna diyaar u yahay inuu ka jawaabo baahiyaha caafimaad ee iman kara marka ay soo baxaan | Wuxuu dejiyaa xeerar iyo habraacyo loogu talagalay carruurta leh baahiyaha daryeelka caafimaadka iyo daryeelka caafimaadka degdegga ah ee goobta dhexdeeda, dhammaan shaqaalaha la shaqeeyana si habboon ayaa loo tababaray |

## 2020 D. Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.D.1 | Wuxuu u aqoonsan tahay cunsuriyadda in ay tahay xaalad caafimaad oo wuxuu qeexaa siyaabaha ay sida xun u saamayso fayo-qabka carruurta cunsiriyeyntu soo wajahday, fal dambiyeedka lagu sameeyay, iyo/ama lagu dhibay cunsuriyadda. Albert Einstein College of Medicine (https://einstein.pure.elsevier.com/en/publications/the-impact-of-racism-on-child-and-adolescent-health) | Wuxuu aqoonsadaa oo uu fuliyaa xeelado caafimaad qaba si loo yareeyo saamaynta cunsuriyaddu ay ku leedahay carruurta cunsiriyeyntu soo wajahday, fal dambiyeedka lagu sameeyay, iyo/ama lagu dhibay cunsuriyadda.<br><br>Wuxuu aqoonsadaa tusaalooyinka caafimaadka wanaagsan, bogsashada, iyo ka hortagga ee ka yimaada caadooyinka dhaqama kala duwan<br><br>Wuxuu fuliyaa xeeladaha waxbaridda ee ku soo daraya tusaalooyinka caafimaadka wanaagsan, bogsashada, iyo ka hortagga ee ka yimaada caadooyinka dhaqama kala duwan | Wuxuu u abuuraa fursado naftiisa iyo asxaabta shaqada si ay si qoto dheer ugu fahmaan saamaynta caafimaad ee cunsuriyaddu ku leedahay carruurta carruurta cunsiriyeyntu soo wajahday, fal dambiyeedka lagu sameeyay, iyo/ama lagu dhibay cunsuriyadda iyo inay abuuraan xeelado lagu dhimayo saamaynta ay ku leedahay barnaamijka dhexdiisa..<br><br>Wuxuu fahmaa, ka hadlaa, oo ku muujiyaa ficillo in hiddaha dhaqanku yahay bogsiinyo; dhaqanku waa furaha caafimaadka wanaagsan; oo dhaqanku waa ka hortag |

# Nuxurka Aagga VIII:
# **Ku- dhaqan loo marayo Khibrada Caafimaad**

## Halbeegga PELSB

***Baraha carruurta yaryar waxa uu adeegsadaa hab waxbarid wax ku ool ah oo lagu barayo carruurta yaryar iyada oo loo marayo khibradaha caafimaad oo kala duwan oo hore iyo mid joogto ah in loo adeegsado dhallaanka iyo socod baradka, da'da dugsiga hoose kahor iyo carruurta da'da dugsi hoose iyada oo leh noocyo kala duwan oo barnaamijyo waxbarasho ah.***

Baruhu waa inuu fahmo:

- Sida loo dhaqangeliyo hab dhaqamada waxbarista waxtarka leh.

## Kartiyaha

### A. Applying Instructional Practices through Clinical Experiences

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VIII.A.1 | Wuxuu magacaabaa oo dib u milicsadaa dabeecadda shakhsi ahaaneed ee bixinta daryeelka iyo waxbarashada carruurta yaryar | Wuxuu dib u milicsadaa oo qiimeeyaa dabeecadaha shakhsiyeed marka uu la falgalayo barnaamijka carruurnimada hore | Wuxuu ka hadlaa dabeecadaha oo uu u tusaaleeyaa dadka kale dabeecadaha kale ee waxtarka u leh la shaqaynta carruurta yaryar |
| VIII.A.2 | Wuxuu ugu fiirsada habaynta goobta deegaanka siyaabo kala duwan (la joog dhab ahaan, muuqaal ama habayn caruurnimada hore oo jilitaan ah) oo ay joogaan kooxo da'o kala duwan | Wuxuu u qorsheeya jawi waxbarasho oo loogu talagalay da'daha cayiman ee ilmaha, wuxuu raadiyaa rayi celin celin xirfadeed iyo tababar, wuxuuna dib u milicsadaa guulaha iyo caqabadaha | Wuxuu yaqaanaa oo qiimeeyaa goobo waxbarasho oo badan; isticmaala jawi ku haboon ardayda |
| VIII.A.3 | Wuxuu qeexayaa jawiga shucuureed (diirinaanta, ku raaxaysiga iyo ixtiraamka la muujiyay) iyo xeeladaha waxbarida ee loo arkay dhab ahaan, fiidyow ahaan ama lagu jilay goobaha caruurnimada hore) | Wuxuu fuliyaa hawlo shaqsi ahaan iyo koox tiro yar ah loo qorsheeyey iyada oo la adeegsanayo xeelado waxbarid oo badan; wuxuu raadiyaa rayi celin xirfadeed iyo tababarid, wuxuu did u milicsadaa guulaha ama caqabadaha | Wuxuu sharxaaa sida wax looga beddelo jawiga shucuureed iyo xeeladaha waxbarista si loo daboolo baahiyaha gaarka ah |

9

2020

# Nuxurka Aagga IX: **Daryeel iyo Hab Dhaqan ka Warqaba Dhaawaca Masiibada**

Baruhu waa inuu fahmo:

- dhaawaca masiibada, baahsanaanteeda iyo fikradaha dhaawaca masiibada la xiriira
- nidaamka jawaab celinta caruurta ee ee welwelka iyo dabeecadaha ayaa waxaa saameeya dhaawaca masiibada.
- xiriirka u dhexeeya dhaawaca masiibada iyo horumarka: dhaawaca masiibadu wuxuu wiiqi karaa horumarka, oo saameynta dhaawaca masiibadana waxaa saameeya marxalada korriinka ee ilmaha.
- cilaaqaadka waxaa saameeya dhaawaca masiibada waxayna ka celin karaan carruurta saameynta dhaawaca masiibada.
- taageerada loogu talagalay qoysaska ay saamaysay dhaawaca masiibadu.
- saamaynta dhaawaca masiibada iyo dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo ay ku leedahay barayaasha carruurnimada hore.
- saamaynta dhaawaca masiibada ee jiilasha dhexdooda ah iyo ta taariikhiga ah ay ku leedahay carruurta iyo qoysaska iyo daryeel bixiyayaasha.
- nidaamyada lagu taageerayo carruurta iyo qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada

### Maxaan uga jeednaa dhaawaca masiibada (trauma)?

- Dhacdooyinka loo arko inay khatar ku yihiin nolosha/ sharafta jireed ee ilmaha ama qof muhiim u ah ilmaha (oo loo arko in khatartu isla beddesho hadba heerka korriinka carruurta);
- Sababista dareen argagax leh, gargaar la'aan, iyo argagax cabsi;
- Soo saarista saamayn jireed oo daran sida wadne garaaca xoogga ah, neefsasho degdeg ah, gariirid;
- Oo si buuxda oo xad dhaaf ah u carqadaynta xeeladaha la qabsiga ilmaha ee diyaarka ah. [marka mar ilmuhu kasii yaryahay, xeeladaha la qabsiga ay haystaan ayaa sii yaraada.]

Tusaalooyinka waxaa ka mid ah: xadgudubka, dayaca, arkidda rabshadaha, ka kaxaynta daryeele muhiim ah, habraacyo caafimaad oo xanuun badan leh, shilalka, saboolnimo qoto dheer, waaya aragnimada qaxoontinimada iyo dhaawaca masiibada ee jinsiyada ku salaysan.

# Kartiyaha

## A. Fahamka qeexitaannada dhaawaca masiibada, baahsanaanteeda iyo fikradaha dhaawaca masiibada la xiriira

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.A.1 | Wuxuu muujiyaa fahamka qeexida dhaawaca masiibada iyo sida ay ugu badan tahay carruurnimada hore | Wuxuu muujiyaa fahamka baahida loo qabo 'indho u lahaanta dhaawaca masiibada'/ xog-ogaalnimo u ah ('trauma lens'), taas oo ah Baahida loo qabo dhaqamada dhaawaca masiibada iyo hababka ka warqaba dhaawaca masiibada oo ka jawaabaya saamaynta welwelka dhaawaca masiibada ee carruurta, qoysaska, iyo daryeelayaasha | Waxay kor u qaadaa wacyiga laga ay qabaan bulshada caruurnimada hore ee ku aaddan qeexidda baahsanaanta waayo-aragnimada dhaawaca masiibada ee carruurta yaryar; wuxuu u doodaa hababka ka warqaba dhaawaca masiibada oo ka jawaabaya saamaynta welwelka dhaawaca masiibada ee carruurta, qoysaska, iyo daryeelayaasha |
| IX.A.2 | Wuxu qiraa saamaynta xun ee ay ku leedahay dhaawaca masiibadu korriinka maskaxda eexilliga hore, waxbarashada, horumarka shucuurta-bulsheed, ku xirnaanta iyo xiriirka, cilaaqaadka iyo caafimaadka jirka | Wuxuu bixiyaa tusaalooyin ku saabsan saameynta xun ee dhaawaca masiibadu uu ku leeyahay horumarka | Wuxuu u fududayaa in waalidiinta iyo daryeelayaasha kale ay isticmaalaan aragti xog-ogaalnimo u leh dhaawaca masiibada ee horumarka carruurta qofkiiba |
| IX.A.3 | Wuxuu qiraa in dhallaanka iyo carruurta yaryar ay awood u leeyihiin inay 'xusuutaan' dhacdooyinka dhaawaca masiibada iyagoo isticmaalaya dareenka iyo xusuusta 'jirka ku salaysan' iyo falcelinta kale ee jirka<br><br>Tusaalooyinka waxaa ka mid ah dhawaaqyada, urta, taabashada, neefsashada degdega ah | Wuxuu bixiyaa tusaalayaal xusuusta dareenka iyo jirka ku salaysan, sida ay u kicin karaan, iyo sida ay ugu muuqan karaan carruurta yaryar | Wuxuu si naxariis leh u dhisaa fahamka xusuusta jirka ku salaysan ee dhaawaca masiibada ee carruurta yaryar ee waalidiinta iyo dadka la shaqeeya |

**B. Wuu fahmayaa in nidaamka jawaab celinta caruurta ee ee welwelka iyo dabeecadaha ay saamayso dhaawaca masiibadu.**

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.B.1 | Wuxuu aqoonsanyahay in dhaawaca masiibadu ay saamayso nidaamka ka jawaab celinta welwelka ee maskaxda iyo horumarinta ismaamulitaanka | Wuxuu qiraa in dabeecadaha, sida xanaaqa, gardarada ama ka bixitaanku, ay noqon karaan natiijada dhaawaca masiibada iyo xasuusinta waayintaan ama ay noqon karaan xirfado la qabsi oo xun oo loo samaysto si looga jawaabo dhaawaca masiibada. | Wuxuu la shaqeeyaa kuwa kale si loo tixgeliyo saamaynta dhaawaca masiibada ee hab dhaqanka carruurta oo uu fuliyaa xeeladaha isku-dubbaridka xog ogaalka ah |
| IX.B.2 | Wuxuu u wajahaa dabeecadaha adag isagoo xiisayn iyo furfurnaan u leh suurtogalnimada in welwelk/ dhaawaca masiibadu ay qayb ka noqon karto hab-dhaqanka carruurta oo uu tan tixgaliyaa marka uu u jawaabayaan ilmaha | Wuxuu Shakhsi ku haboonaysiiyaa oo fuliyaa xeeladaha la maaraynta isxakamaynta ee ku habboon korriinka¬ | Wuxuu tababaraa daryeel-bixiyeyaasha si ay dib ugu milicsadaan macnaha hab-dhaqanka carruurta iyaga oo isticmaalaya eegitaan dhaawaca masiibada ka warqaba oo ay hirgeliyaan xeeladaha maaraynta isxakamaynta oo warqab u ah dhaawaca masiibada¬ |
| IX.B.3 | Wuxuu aqoonsadaa baahida loo qabo in la samaysto xeeladaha wax looga qabanayo dabeecadda carruurta iyadoo la adeegsanayo aragtiyaha warqabka u ah dhaawaca masiibada | Wuxuu samaystaa xeeladaha wax looga qabanayo dabeecadda carruurta isagoo adeegsanaya aragtiyaha warqabka u ah dhaawaca masiibada; tusaale ahaan, bixinta taageero dheeraad ah inta lagu jiro xilliga kala beddelka | Wuxuu hagaa dadka kale si ay u hirgeliyaan xeelado warqab u ah dhaawaca masiibada si looga jawaabo dabeecadaha carruurta, oo ay ku jiraan mudnaanta in la siinayo dhaqamada daryeelka aasaasiga ah ee kor u qaadaya xiriirka kalsoonida iyo ula kac ah istraatijiyadaha la maaraynta isxakamaynta |
| IX.B.4 | Wuxuu qeexayaa baahida loo qabo deegaan badbaado leh, nidaamsan lagu garto jadwalo hawleed, la saadaalin karo iyo sii socoshada daryeelka | Wuxuu bixiyaa deegaan nidaamsan oo lagu garto kala beddelaado xaddidan oo la saadaalin karo, hawlo joogto ah leh<br>Wuxuu fuliyaa kala beddelaado deggan, oo la saadaalin karo, oo bixinaya taageerada shakhsi ahaaneed ee carruurta haddii loo baahdo | Wuxuu mudnaan siiyaa sii wadida daryeelka iyada oo loo marayo xeerarka barnaamijka iyo hab dhaqamada, oo ay ku jiraan isticmaalka dhaqamada daryeelka aasaasiga ah oo uu la wadaagaa shaqaalaha iyo qoysaska xeeladaha la saadaalin karo oo si hawlo joogto ah iyo kala bedelaada |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.B.5 | Wuxuu qirayaa in waayo-aragnimada carruurta ee dhaawaca masiibadu uu ka muuqan karto ciyaartooda | Wuxuu yeeshaa mawqif aan layaabitaan ku jirin marka uu u jihaynayo carruurta dhinaca ciyaarta badbaadada, wax dhisitaanka leh;<br>Wuxuu muujiyaa ka warqabka habka si kor looga warqabo walaacyada iyo samaynta u gudbinta adeegyada si looga jawaabo caddaynta dhaawaca masiibada ee lagu arko ciyaaro | Wuxuu kala hadlaa qoysaska welwelka  ku saabsan caddaynta ka soo muuqashada ee dhaawaca masiibadaee ciyaarta carruurta wuxuuna sameeyaa u gudbin ku habboon si loo helo taageerada ilmaha iyo qoyska;<br>Wuxuu la shaqeeyaa adeeg bixiyeyaasha kale marka la tilmaamo si loo xaqiijiyo badbaadada carruurta |

**C. Wuxuu fahmaa xiriirka u dhexeeya dhaawaca masiibada iyo horumarka: dhaawaca masiibadu wuxuu wiiqi karaa horumarka, oo saameynta dhaawaca masiibadana waxaa saameeya marxalada korriinka ee ilmaha.**

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.C.1 | Wuxuu aqoonsadaa saamaynta dhaawaca masiibada ee dhammaan qaybaha korriinka iyo baahida loo qabo taageero shaqsiyeed | Wuxuu bixiyaa taageerada korriinka shaqsiyeed iyo taageerida marka carruurtu la kulmaan dhaawaca masiibada | Wuxuu lataliyaa qoysaska iyo daryeelayaasha kale si ay ula qabsadaan dhaqamada daryeelka si ay u taageeraan carruurta la kulantay dhaawaca masiibada, caawinta heerkooda korriinka iyo baahida ee qayb kasta oo qaybaha korriinka ah. |
| IX.C.2 | Wuxuu muujiyaa xiisaha ku saabsan bal in/sida ay dhaawaca masiibadu u saamayn karaan horumarka carruurta, tusaale marka ay jirto caddaynta dib u dhac koritaanka ama daahitaan | Wuxuu ka raadiyaa macluumaadka ilaha ku habboon si uu u go'aamiyo haddii iyo sida ay dhaawaca masiibadu laga yaabo in ay u saameeyaan korriinka ilmaha | Wuxuu fududeeyaa u gudbinta khayraadka ku habboon ee qiimaynta iyo faragelinta si loo aqoonsado baahiyaha koritaanka carruurta marka carruurta/ qoysasku ay la kulmen dhaawaca masiibada. |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.C.3 | Wuxuu aqoonsadaa in dhallaanku ay la kulmaan dhaawaca masiibada si loo eegayo awooddooda korriinta iyo hawlahooda | Wuxuu aqoonsadaa sida dhallaanku ay ula kulmaan dhaawaca masiibada si loo eegayo awooddooda korriinta iyo hawlahooda, tusaale ahaan, dhisidda isku-xirnaan sugan, abaabulida khibradaha dareenka iyo xakamaynta soo ifbaxaysa | Wuxuu naqshadeeyaa qorshaynta daryeelka si loo waafajiyo awoodaha korriinka iyo hawlaha dhallaanka la kulmay dhaawaca masiibada; tusaale ahaan, wanaajinta sii wadida daryeelka uu sameeyo daryeel bixiye gaar ah (tusaale qaabka daryeelka aasaasiga ah) iyo kor u qaadista taageerada xakamaynta |
| IX.C.4 | Wuxuu aqoonsadaa in socod baradku ay la kulmaan dhaawaca masiibada si loo eegayo awooddooda korriinta iyo hawlahooda | Wuxuu aqoonsadaa sida dhallaanku ay ula kulmaan dhaawaca masiibada si loo eegayo awooddooda korriinta iyo hawlahooda, oo ay ku jiraan madaxbannaanida iyo kala-tagga, hawlaha iyo horumarinta joogtada ah ee xakamaynta | Wuxuu naqshadeeyaa qorshaynta daryeelka si loo waafajiyo awoodaha korriinka iyo hawlaha socod baradka la kulmay dhaawaca masiibada; tusaale ahaan, taageeridda dheelitirka u dhexeeya ku-tiirsanaanta iyo madax-bannaanida marka la waxyeeleeyo, in la xoojiyo taageerada isxakamaynta |
| IX.C.5 | Wuxuu aqoonsadaa in ilamaha aan gaarin da'da iskuulku ay la kulmaan dhaawaca masiibada si loo eegayo awooddooda korriinta iyo hawlahooda | Wuxuu aqoonsadaa sida ilmaha aan da'da iskuulka gaarin ay ula kulmaan dhaawaca masiibada si loo eegayo awooddooda korriinta iyo kartiyahooda, oo ay ku jiraan xakamaynta shucuurta, is dhexgalka bulshaynta facooda, kordhinta xalinta dhibaatooyinka iyo hawlaha u diyaarsanaanta iskuulka | Wuxuu naqshadeeyaa qorshaynta daryeelka si uu u daboolo baahiyaha gaarka ah ee carruurta da'da iskuulka kahor ee ay saamaysay dhaawaca masiibadu oo bartilmaameedsanaysa baahiyahooda korriinka, ee aan daruuri ahaan ahayn da'da isku xigxigta, oo ay ku jirto la-maaraynta isxakamaynta. |

**D. Wuxuu fahmaa sida cilaaqaadka ay u saameeyaan dhaawaca masiibada ayna ka celin karaan carruurta saameynta dhaawaca masiibada labadaba.**

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.D.1 | Wuxuu aqoonsadaa in xiriirka daryeel bixiyaha iyo ilmuhu ay saameyn ku yeelato dhaawaca masiibada; Taariikhda cilaaqaadka ee carruurtu waxay saamaysaa filashada carruurta ee cilaaqaadka taas oo keenta tilmaamo jahawareer ah oo ku wajahan daryeelayaasha | Wuxuu u fiirsadaa dabeecadaha cilaaqaadka ee ilmaha si uu u fahmo saamaynta ka dhalan karta dhaawaca masiibada oo uu si waafaqsan wax uga beddelaa dhaqamada daryeelka | Wuxuu fuliyaa xeerar kor u qaadaya doorka xiriirka daryeel bixiyaha iyo ilmaha in uu noqdo gaadiid lagu bogsiinayo waxyeelada dhaawaca masiibada. Wuxuu mudnaanta siiyaa sii wadida daryeelka (tusaale ku dhaqanka daryeelka aasaasiga ah) si loo taageero cilaaqaadka sugan oo u dhexeeya daryeel bixiyaha iyo ilmaha |
| IX.D.2 | Wuxuu aqoonsadaa in cilaaqaad ammaan ah, xasiloon, oo daryeel naxariis leh uu bixin karo difaac ka dhan ah saamaynta welwelka iyo/ama dhaawaca masiibada oo daba dheeraada | Wuxuu bixiyaa si ula kac ah meel badbaado u ah, joogto ah, cilaaqaad warqab ah oo loogu talagalay carruurta ay la kulantay dhaawaca masiibada | Wuxuu taageeraa oo la taliyaa kuwa kale si ay shaqsiga ugu habboonaysiiyaan una waafajiyaan dhaqamadooda daryeelka si ay mudnaanta u siiyaan cilaaqaadka ka dhexeeya iyaga iyo carruurta ay daryeelayaan |
| IX.D.3 | Wuxuu aqoonsadaa in ilmaha ay saamaysay dhaawaca masiibadu uu fasalka keeno waayo-aragnimadaas taas oo saamaysa facooda fasalka iyo isku xirnaanta kooxda | Wuxuu bixiyaaa fursadaha ku hbboonaysiinta shakhsiga ee taageerada carruurta ee cilaaqaadka facooda iyo isdhexgalkooda ay saamaysay dhaawaca masiibadu; Wuxuu tixgeliyaa siyaabaha uu faca uga ilaalin lahaa saamaynta xun ee dhaawaca masiibada ee ay wajeheen ilmuhu | Wuxuu fuliyaa xeerarka iyo dhaqamada taageeraya awooda daryeelayaasha si ay u siiyaan taageero shaqsiyeed carruurta ay saameysay dhaawaca masiibadu iyada oo loo eegayo xaalada daryeelka kooxda |

## E. taageerada qoysaska ay saamaysay dhaawaca masiibadu

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.E.1 | Wuxuu aqoonsanyahay in dhaawaca masiibadu ay saamayso qoyska oo dhan, haddii ay dhacday waalidka ama ilmaha ama labadaba | Wuxuu tixgeliaa haddii/ sida ay dhaawaca masiibadu u saamaynayaan ilmaha iyo qoyska; tusaale ahaan, dhibaatooyinka ka-tegitaanka, xakamaynta kacsanaanta iyo dareenka shucuurta, akhrinta iyo ka jawaabista tilmaamaha carruurta | Wuxuu kula taliya kuwa kale si ay u gartaan uguna jawaabaan si xasaasi ah waalidiinta/ daryeelayaasha carruurta laga yaabo in ay la kulmeen dhaawaca masiibada taas oo saamayn karta awooddooda ay ku caawiyaan caruurtooda |
| IX.E.2 | Wuxuu aqoonsadaa awoodda cilaaqaadka si uu qoysaska uga ilaaliyo saameynta dhaawaca masiibada; Wuxuu abuuraa soo dhawayn, taageero iyo deegaan aan la yaabitaan lahayns qoysaska | Wuxuu la kaashadaa qoysaska si ay u horumariyaan fahamka macnaha hab-dhaqanka ilmaha taas oo tixgalinaysa saamaynta dhaawaca masiibada, u xiriirida siyaalo taageero ah, oo aan layaabitaan lahayn oo ku martiqaada qoysaska inay la wadaagaan hawlahooda joogtada ah iyo hab haqankooda ay u isticmaalaa si ay u dejiyaan ilmahooda ulana wadaagaan xeeladaha daryeelka qoysaska. | Wuxuu horumariyaa dhaqamada iyo xeerarka warqabka u ah dhaawaca masiibada ee mudnaanta siiya cilaaqaadka daryeel bixiyayaasha-ilmaha, waalidka-ilmaha, iyo cilaaqaadka daryeelbixiyaha iyo waalidka, oo ay ku jirto sii wadida daryeelka iyo kala hormarinta xiriirada joogtada ah, taageerada lala yeesho waalidka |
| IX.E.3 | Waxay hayaa ka warqabka in khayraad bulshadu diyaar u yihiin qoysaska ay ku dheceen dhaawaca masiibada | Wuxuu raadiyaa oo siiyaa qoysaska taageero iyo macluumaad ku saabsan adeegyada bulshada marka ay qoysasku la kulmaan welwelka iyo/ama dhaawaca masiibada | Wuxuu baraa dadka kale wax ku saabsan helitaanka khayraadka bulshada dhexdeeda ka jira ee taageera qoysaska ay ku dheceen heerar sarreeya ee welwel iyo dhaawaca masiibada ah |

**F. Wuxuu fahmayaa saamaynta dhaawaca masiibada iyo dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo ay ku leedahay barayaasha carruurnimada hore.**

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.F.1 | Wuxuu garwaaqsadaa in daryeel bixiyayaashu ay la kulmeen dhaawaca masiibada oo iyaga u gaar ah oo la soo 'kicin karo'/dhaqaajin karo iyadoo ay joogaan carruurta yaryar iyo qoysaskoodu | Wuxuu muujiyaa xiiso iyo iska warqab ku saabsan saamaynta daryeelka carruurtu ay ku leedahay xusuusta nafeed iyo dabeecadaha daryeel bixinta. | Wuxuu kula taliyaa shaqaalaha ku dhaqanka xiiso iyo iska warqab ku saabsan saamaynta suurtagalka ah ee waaya-aragnimadooda nololeed ay ku leeyiin aragtidooda iyo dabeecadaha daryeel bixinta. Wuxuu u diraa shaqaalaha khayraadka ku habboon hadba sida ay ugu baahanyihiin |
| IX.F.2 | Wuxuu aqoonsadaa in la shaqaynta carruurta iyo qoysaska ay saamaysay dhaawaca masiibadu iyo saamaynta ay ku leedahay daryeelayaasha, taasoo gacan ka geysata dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo, ku daalitaanka iyo ka tegitaanka shaqaalaha | Wuxuu muujiyaa is-wacyigelinta nafeed wuxuuna aqoonsadaa calaamadaha dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo wuxuuna ku dhaqmaa istiraatijiyad is-daryeel/ waaritaan | Wuxuu qaadaa tillaabooyin ka hortag ah si uu uga ilaaliyo daryeelayaasha dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo |
| IX.F.3 | Wuxuu aqoonsanyahay in dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo uu wax u dhimi karo daryeelka carruurta iyo qoysaska | Wuxuu ilaaliyaa ka warqabka in dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo uu saamayn ku yeelan karo hab dhaqamada daryeelka oo uu raadsado taageero | Wuxuu kalataliyaa shaqaalaha in ay gartaan calaamadaha dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo ee ku jirta naftooda iyo inay raadsadaan ilo taageero marka loo baahdo |

**G. Wuxuu fahmaa saamaynta dhaawaca masiibada ee jiilasha dhexdooda ah iyo ta taariikhiga ah ay ku leedahay carruurta iyo qoysaska iyo daryeel bixiyayaasha.**

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.G.1 | Wuxuu qiraa saamaynta dhaawaca masiibada ee taariikhiga ah iyo ta jiilasha dhexdooda ah ay ku leedahay carruurta iyo qoysaska | Wuxuu u ahaadaa in uu yahay celin ka ilaalinaysa carruurta iyo qoysaska saamaynta dhaawaca masiibada ee taariikhiga ah iyo ta jiilasha dhexdooda ah goobtooda shaqada iyada oo loo marayo dhaqamo kala duwanaanshaha warqab u ah | Waxay horumariyaa xeerarka iyo dhaqamada ka hortagaya saamaynta dhaawaca masiibada ee taariikhiga ah iyo ta jiilasha dhexdooda ah ee carruurta iyo qoysaska |
| IX.G.2 | Wuxuu qiraa saamaynta dhaawaca masiibada ee taariikhiga ah iyo ta jiilasha dhexdooda ah ay ku leedahay qiyamka daryeelayaasha, filashooyinka dabeecadda iyo hab dhaqamada daryeel bixinta | Waxay ka tarjumayaa qiyamka dhaqameed, malo-awaalka, iyo filashooyinka dabeecadda iyo sida ay u saameeyaan hab dhaqamada daryeel bixinta | Wuxuu kor u qaadaa is-hoosaysiinta dhaqameed iyo is-ogaanshaha nafeed ee shaqaalaha maadaama ay saamaynayso isdhexgalka qoysaska iyo carruurta ay daryeelayaan |
| IX.G.3 | Wuxuu aqoonsadaa jiritaanka dhaawaca masiibada ee jinsiyada (sidoo kale loo yaqaano welwelka dhaawaca masiibada ee ku salaysan jinsiyadda) ee qoysaska iyo daryeelayaasha, ie. Saamaynta welwelka leh ama xanuunka shucuureed ee qofku waayo-aragnimada uu u leeyahay cunsuriyadda iyo takoorka (NCTSN, 2017) | Wuxuu fuliyaa dhaqamada xasaasiga ah ee kor u qaada aqoonsiga jinsiyadeed ee wanaagsan ee carruurta iyo qoysaska | Waxay horumariyaa xeerarka iyo dhaqamada ka hortagaya saamaynta dhaawaca masiibada jinsiydeed ee carruurta, qoysaska iyo daryeelayaasha |

## H. Wuxuu la shaqeeyaa nidaamyada taageera carruurta iyo qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.H.1 | Wuxuu qaataa mas'uuliyadda oo wuxuu ilaaliyaa xuduudaha doorka qofka ee joogtada ah ee daryeelka warqabka u ah dhaawaca masiibada | Wuxuu la xiriiraa nidaamyada taageera carruurta iyo qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada | Wuxuu dhisaa xiriir iskaashi oo ka dhexeeya nidaamyada taageera carruurta iyo qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada wuxuuna ka caawiyaa kuwa kale inay wada shaqeeyaan oo ay ka wada xidriiraan dhammaan nidaamyada danta ugu wanaagsan ee carruurta iyo qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada. |
| IX.H.2 | Wuxuu aqoonsadaa baahida loo qabo u gudbinta nidaamyada kale adeegyada kale wuxuuna weydiistaa caawimaad si loo helo adeegyada ku habboon qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada | Wuxuu aqoonsadaa khayraadka loogu talagalay qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada wuxuuna la wadaagaa qoysaska haddii loo baahdo | Wuxuu abuuraa, ilaaliyaa oo cusboonaysiiyaa liisaska khayraadka ee la heli karo ee loogu talagalay qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada |

2020

# Nuxurka Aagga X: **La shaqaynta caruurta ku Hadla Luqadaha Badan ee aan gaarin da'da iskuulka iyo qoysaskooda**

Baruhu waa inuu fahmo:

- baahidooda waxbarasho ee gaarka ah.
- in laga fikiro sida caqiidada shakhsi ahaaneed ee ku saabsan dhaqanka iyo luqadda ay ula mid noqon karto, ama uga duwanyihiin, kuwa carruurta iyo qoysaska aan u adeegno.
- in uu u doodo ka qaybgelinta xoogga ku salaysan, oo diiradda saaraya luqadda.
- in uu kor u qaado sinnaanta, deegaan dhaqanahaan ku habboon dhammaan carruurta ku hadasha luqadaha badan
- in uu yaqaano sida loogu xirmo WIDA Halbeegyada Horumarinta Luqadda carruurnimada Hore iyo halbeegyada waxbarashada carruurnimada hore ee gobolka.

**Erayga carruurta luqadaha badan** ku hadasha waxa loo isticmaalaa in lagu tilmaamo carruur kala duwan dhaqan iyo afba, da'dooduna u dhaxayso dhalasho ilaa shan sano, kuwaas oo baranaya laba ama in ka badan oo luqado ah. Carruurta ku hadasha luqadaha badan waxay kula kulmaan afaf badan guryahooda, bulshooyinkooda, iyo/ama goobaha daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore, waxayna u horumariyaan oo u isticmaalaan luqadda siyaabo isbedbedalaya. Gudaha xirfadan shaqo, carruurtan waxaa badanaa loogu yeeraa bartayaasha labada luqadood, ama DLLs.

## Kartiyaha

### A. Wuxuu iska kaashi la sameeyaa si loo hubiyo in dhammaan dadka waaweyn ee la shaqaynaya carruurta ku hadasha luqadaha badan ay taageeraan horumarinta luqadda

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.A.1 | Wuxuu aqoonsadaa qoysasku inay yihiin isha koowaad ee uu ka yimaado macluumaadku<br>a. Wuxuu soo helaa macluumaadka ku saabsan muhiimadda ay leedahay in la dhiso wada shaqayn, xiriir sinnaan leh oo lala yeesho qoysaska carruurta ku hadla luqadaha badan, daryeelayaasha, iyo asxaabta shaqada si kor loogu qaado horumarinta luqaddooda iyo barashada<br>b. Wuxuu u fiirsadaa sida hab dhaqanka wada shaqaynta shakhsi ahaaneed iyo barnaamijku ay ka duwanaan karaan sida ay qoysasku rabaan inay uga qaybgalaan oo u raadiyaan macluumaadka ku saabsan hab dhaqamada iskaashiga sinaanta oo dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba warqab ah | Wuxuu ula shaqeeyaa qoysasku inay yihiin isha koowaad ee uu ka yimaado macluumaadku<br>a. Wuxuu tusaaleeyaa dhisidda wada shaqayn, xiriir sinnaan leh oo lala yeesho qoysaska carruurta ku hadla luqadaha badan, daryeelayaasha, iyo asxaabta shaqada wuxuuna la wadaagaa macluumaadka si kor loogu qaado horumarinta luqaddooda iyo barashada<br>b. Wuxuu u fiirsadaa sida hab dhaqanka wada shaqaynta shakhsi ahaaneed iyo barnaamijku ay ka duwanaan karaan sida ay qoysasku rabaan inay uga qaybgalaan oo u raadiyaan macluumaadka ku saabsan hab dhaqamada iskaashiga sinaanta oo dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba warqab ah | Wuxuu difaacdaa xaqa ay qoysasku u leeyihiin inay u adeegaan ilaha aasaasiga ah ee macluumaadka<br>a. Wuxuu tusaaleeyaa dhisidda wada shaqayn, xiriir sinnaan leh oo lala yeesho qoysaska carruurta ku hadla luqadaha badan, daryeelayaasha, iyo asxaabta shaqada wuxuuna la wadaagaa macluumaadka si kor loogu qaado horumarinta luqaddooda iyo barashada<br>b. Wuxuu abuurtaa, iyadoo uu la kaashanayo qoysaska, fursadaha nidaamka si loo xaqiijiyo hab dhaqan iskaashi sinnaan leh oo dhaqan ahaan iyo luqad ahaana warqabka ah oo loogu talagalay dhammaan qoysaska |

**Hab dhaqamada skaashiga ee ka warqaba sinaanta iyo dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba waxay xaqiijiyaan**

- Ka qaybgalka iyo wada shaqaynta qoysaska ku hadla luqadaha badan
- Ka qaybgelinta qoysaska ku hadla luqadaha badan waa mid khuseeya
- Xaqa ay u leeyihiin qoysaska ku hadla luqadaha badan in ay si macno leh ugala shaqeeyaan barayaasha carruurnimada hore iyo shaqaalaha waxa ku saabsan horumarka luqada iyo waxbarashada in la taageero

**B. Waxay soo ururiyaan macluumaadka ku saabsan hiddaha dhaqamada carruurta ku hadasha luqadaha badan iyo luqadaha la maqlay ee la isticmaalay wakhti hore iyo hadda si loo taageero horumarinta luqadda**

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.B.1 | Wuxuu muujiyaa baahida loo qabo in si xushmad leh loo soo ururiyo macluumaadka ku saabsan hab dhaqamada carruurta ku hadasha luqadaha badan, luqada, iyo aqoonta akhris-qoraalka<br>a. Wuxuu muujiyaa doorkiisa in uu yahay arday baranaya marka uu soo ururinayo macluumaadka<br>b. Wuxuu waydiistaa dadka waaweyn ee kale siyaabaha dib loogu milicsado caqiidooyinka shakhsi ahaaneed iyo hab dhaqabada hidda dhaqameed, hab dhaqamada barnaamijka iyo si loo hubiyo eexda (ay ku jirto eexda xun ee ku wajahan lahjadaha, lahjadda, doorashada kelmad, luqad bedelaada (code-switching), iwm.) | Wuxuu isticmaalaa la falgalka ilmaha iyo qoyska, warbixinta qoyska, iyo khayraadka kale si uu si xushmad leh u ururiyo macluumaadka ku saabsan hiddaha dhaqameed, luqadda, iyo waayo-aragnimada aqoonta akhris-qoraalka ee ilmaha<br>a. Wuxuu tusaaleeyaa in uu yahay arday baranaya marka uu soo ururinayo macluumaadka<br>b. Wuxuu dib u milicsadaa caqiidada shakhsiyeed, hab dhaqamada hiddaha dhaqameed, iyo hab dhaqanka barnaamijka; wuxuu ka hubiyaa eexda marka la ururinayo macluumaadka (ay ku jirto eexda xun ee ku wajahan lahjadaha, lahjadda, doorashada kelmad, luqad bedelaada (code-switching), iwm.) | Wuxuu u doodaa oo ka wada shaqeeyaan abuurista nidaam xog ururin joogto ah oo ku saabsan hab dhaqamada hiddaha dhaqanka ee habka carruurta luqadaha badan ku hadasha ay ay u adeegsadaan luqadda, iyo khibrada akhris-qoraalka, oo ku salaysan ixtiraam, wada xiririi laba-jiho ah iyo cilaaqaadka qoysaska<br>a. Wuxuu dib ugu beddelaa doorka barayaasha in ay yihiin arday ahaan marka ay xog ururinayaan<br>b. Wuxuu kula taliya kuwa kale wax ku saabsan dib u milicsiga joogtada ah iyo aqoonta sii kordheysa ee la xiriirta caqiidooyinka shakhsi ahaaneed iyo hab dhaqabada hidda dhaqameed, hab dhaqanka barnaamijka, iyo eexda (ay ku jirto eexda xun ee ku wajahan lahjadaha, lahjadda, doorashada kelmad, luqad bedelaada (code-switching), iwm.) |

**C. Wuxuu aqoonsadaa oo isticmaalaa waxa ay ku xooganyihiin, khayraadka, iyo waayo-aragnimada carruurta ku hadasha luqadaha badan si ay u taageeraan oo kor ugu qaadaan horumarinta iyo barashada luqadda**

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.C.1 | a. Wuxuu qeexaa hab ku salaysan waxa ay ku xoogan yihiin oo lagula shaqeeyo carruurta luqadaha badan iyo qoysaskooda<br>b. Wuxuu magacaabayaa dhowr tusaale oo ku saabsan waxa ay ku xooganyihiin, khayraadka, iyo waayo-aragnimada carruurta ku hadasha luqadaha badan, qoysaskooda, iyo bulshooyinku | Wuxuu daadihiyaa waxqabadyada iyo dhaqamada ku salaysan waxyaabaha lagu xoog badanyahay, khibradaha, xiisaha, hiddaha dhaqanka, suugaanta, iyo dhaqanka luqadaha ee carruurta ku hadasha luqadaha badan, qoysaskooda, iyo bulshooyinkooda | Wuxuu naqshadeeyaa oo abuuraa manhaj ku salaysan waxyaabaha lagu xoog badanyahay, khibradaha, xiisaha, hiddaha dhaqanka, suugaanta, iyo dhaqanka luqadaha ee carruurta ku hadasha luqadaha badan, qoysaskooda, iyo bulshooyinkooda |

**D. Wuxuu soo ururiyaa, falanqeeyaa, oo dib u milicsi ku sameeyaa macluumaadka si uu diiradda u saaro dabiicadda korriinka iyo sifooyinka gaarka ah ee barashada luqadda ee carruurta ku hadasha luqadaha badan iyo horumarka**

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.D.1 | Wuxuu u soo ururiyaa macluumaadka in uu<br>a. In uu ku kordhiyo fahamka iyo aqoonta ku saabsan dabiicadda isbedelaysa iyo sifooyinka gaarka ah ee horumarinta luqadda carruurta luqadaha badan<br>b. In uu meesha ka saaro malaynta fikradaha khaldan ee laga qabo horumarinta luqadda carruurta ku hadasha luqadaha badan (oo ay ku jirto fikrada khaldan ee ku wajahan lahjadaha, lahjadda, doorashada kelmad, luqad bedelaada (code-switching), iwm.) | Wuxuu ku muujiyaa macluumaadka la soo ururiyay in<br>a. In uu ku kordhiyo fahamka iyo aqoonta ku saabsan dabiicadda isbedelaysa iyo sifooyinka gaarka ah ee horumarinta luqadda carruurta luqadaha badan<br>b. In uu meesha ka saaro malaynta fikradaha khaldan ee laga qabo horumarinta luqadda carruurta ku hadasha luqadaha badan (oo ay ku jirto fikrada khaldan ee ku wajahan lahjadaha, lahjadda, doorashada kelmad, luqad bedelaada (code-switching), iwm.) | Wuxuu dhisaa hababka iyo nidaamyada loogu talagalay ururinta, falanqaynta, iyo dib u milicsiga macluumaadka in uu<br>a. In uu ku kordhiyo fahamka iyo aqoonta ku saabsan dabiicadda isbedelaysa iyo sifooyinka gaarka ah ee horumarinta luqadda carruurta luqadaha badan<br>b. In uu meesha ka saaro malaynta fikradaha khaldan ee laga qabo horumarinta luqadda carruurta ku hadasha luqadaha badan (oo ay ku jirto fikrada khaldan ee ku wajahan lahjadaha, lahjadda, doorashada kelmad, luqad bedelaada (code-switching), iwm.) |

## E. Adeegsadaa macluumaadka la soo aruuriyay ee ku saabsan carruurta ku hadasha luqadaha badan: dhaqamadooda, sida ay u isticmaalaan luqadda, iyo horumarka luqaddooda, waxyaabaha ay ku xoogganyihiin, iyo khayraadka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.E.1 | a. Wuxuu wadaagaa muhiimada ay leedahay in la soo uruuriyo iyo adeegsiga macluumaadka ku saabsan carruurta ku hadasha luqadaha badan, qoysaskooda, iyo bulshooyinkooda marka ay qorsheynayaan waxbarashada<br>b. Wuxuu caawiyaa in la aqoonsado fursadaha lagu martiqaado qoysaska inay ka qayb qaataan waxbarashada carruurta iyo waayo-aragnimada akhris-qoraalka iyadoo lagu salaynayo indho-indhaynta iyo macluumaadka la soo ururiyay | a. Wuxuu adeegsadaa macluumaadka la soo aruuriyay ee ku saabsan carruurta ku hadasha luqadaha badan, qoysaskooda, iyo bulshooyinkooda marka ay qorsheynayaan waxbarashada<br>b. Wuxuu la shaqeeyaa qoyska iyo xubnaha bulshada si ay wada-jir u abuuraan agab ayna uga wada-shaqeeyaan waxbarashada carruurta iyo waayo-aragnimada akhris-qorista. | a. Wuxuu abuuraa macluumaadka la soo aruuriyay ee ku saabsan carruurta ku hadasha luqadaha badan, qoysaskooda, iyo bulshooyinka oo loogu talagalay qorsheynta waxbarashada<br>b. Wuxuu abaabulaa kala qaybgelinta qoyska iyo xubnaha bulshada barayaasha kale si ay wada-jir u abuuraan agab ayna uga wada-shaqeeyaan waxbarashada carruurta iyo waayo-aragnimada akhris-qorista |

## F. Wuxuu ugu fiirsadaa isticmaalka iyo horumarinta luqadda ee carruurta ku hadasha luqadaha badan siyaabo kala duwan oo joogto ah iyo waayo-aragnimada waxbarasho maalinta ee dhan dhammaan goobaha daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.F.1 | a. Wuxuu sharaxaad ka bixiyaa sida ku dhaqanka luqadda ee carruurtu u kala duwanaan doono iyadoo ku xiran xaaladda iyo hiddaha dhaqameed<br>b. Wuxuu u fiirsadaa is dhexgalka luqadda eevcarruurta ku hadasha luqadaha badan oo ku jirta xaalado kala duwan, oo ay ku jiraan dhexgalka qoyska,asxaabta, iyo dadka waaweyn, iyo haddii ay suurtagal tahay, bulshada dhexdeeda | a. Wuxuu sheegaa xiriirka ka dhexeeya ku dhaqanka luqadda, macnaha guud ee dhaqan bulsheed, iyo hab dhaqamada hiddaha dhaqameed<br>b. Wuxuu jadwal/ballan u sameeyaa indho-indhayn joogto ah ee caruurta ku hadla luqadaha badan ku xiriirkooda luqadda iyaga oo ku jira xaalado kala duwan, oo ay ku jiraan isdhexgalka/la falgalka qoyska, facooda, iyo dadka waaweyn, iyo haddii ay suurtogal tahay, bulshada dhexdeeda | a. Wuxuu muujiyaa muhiimada ay leedahay la socoshada isdhexgalka luqadaha ee carruurta ku hadasha luqadaha badan oo ku jirta xaalado kala duwan iyadoo la siinayo tusaalooyin ku saabsan dhaqamada hab luqadaha kala duwan<br>b. Wuxuu dejiyaa qorshe loogu talagalay indho-indhayn joogto ah ee caruurta ku hadla luqadaha badan ku xiriirkooda luqadda iyaga oo ku jira xaalado kala duwan, oo ay ku jiraan isdhexgalka qoyska, asxaabta, iyo dadka waaweyn, iyo haddii ay suurtagal tahay, bulshada dhexdeeda |

**Ku dhaqanka/ku celcelinta luqaddu waa siyaabaha carruurtu u isticmaalaan luqadda si ay macno u sameeyaan.** Sida ilmuhu u isticmaalo luqaddu way kala duwanaan doontaa iyadoo ku xiran luqadda iyo dhaqanka ay yaqaanaan, aqoonsigooda, iyo meesha, cidda, sida, iyo sababta ay u isticmaalayaan luqadda. Si kale haddii loo dhigo, ku dhaqanka luqadda ee ilmaha ayaa waxaa qaabeeya xaaladda dhaqan-bulsheed. Xaaladaha dhaqan-bulsheed ee barashada luqadda carruurta yaryar ayaa waxay inta badan ka dhacdaa guryahooda dhexdooda, bulshooyinkooda dhexdooda, iyo goobaha daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore.

Tusaale ahaan, wiil ku jira goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore ayaa laga yaabaa inuu isticmaalo Isbaanishka si uu boombalo u weydiisto saaxiibkiis. Laakin waxa laga yaabaa in uu ku magacaabo boombalaha af Ingiriisi, sababtoo ah waxa uu markii ugu horraysay ku ciyaaray boombalaha oo uu wax ka bartay goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore, taas oo ah goob assaasi ahaan Ingiriisi ku hadasha. Si kastaba ha ahaatee, mar dambe, marka uu af Isbaanish kula hadlayo walaalkiisa guriga (halkaas oo Isbaanishka inta badan lagu isticmaalo), waxaa laga yaabaa in uu doorto inuu af Isbaanish ku sharaxo waxa uu boombaluhu yahay, halkii uu isticmaali lahaa magaca Ingiriisiga. Kadib waxaa laga yaabaa in ilmuhu uu ku"baro" walaalihii magaca boombalaha af Ingiriisi, sababta oo ah ilmuhu waxa uu u qaadanayaa doorka "macalinka" walaalkiisa ka yar.

## G. Wuxuu isku xiriiriyaa halbeegyada luqadda iyo halbeegyada waxbarashada carruurnimada hore iyo habraacyada si uu manhajka uga dhigo mid la heli karo oo macno u leh carruurta ku hadasha luqadaha badan

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.G.1 | Wuxuu sharaxaad ka bixiyaa muhiimada ay leedahay in manhajka lagu soo daro danaha carruurta ku hadasha luqadaha badan iyo ku dhaqanka luqadda | Wuxuu tusaaleeyaa sida loogu soo daro danaha carruurta luqadaha badan ku hadasha iyo ku dhaqanka luqadda manhajka la socda halbeegyada horumarinta luqadda ee loogu talagalay carruurta ku hadasha luqadaha badan iyo halbeegyada waxbarashada carruurnimada hore | Wuxuu hagaajiyaa halbeegyada - iyadoo lagu salaynayo waxbarista si loogu soo daro danaha carruurta luqadaha badan ku hadasha iyo ku dhaqanka luqadda manhajka la socda halbeegyada horumarinta luqadda ee loogu talagalay carruurta ku hadasha luqadaha badan iyo halbeegyada waxbarashada carruurnimada hore |

**Marka xirfadlayaasha carruurnimada hore ay ka hadlaan ka dhigista manhajka mid la heli karo oo macne** leh waxaan u ololeyneynaa manhajka carruurta ku salaysan oo ay ku jiraan noocyada kala duwan ee luqadda, akhris-qoraalka, iyo hab dhaqamada hiddaha dhaqameed ee carruurtu ay la yimaadaan goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore. Manhajku waa inuu ku dhisnaado habdhaqannadan si danaha carruurta iyo hababka ay wax u qabtaan ay uga muuqdaan deegaanka, hawl maalmeedka, isdhexgalka bulshada, iyo waayo-aragnimada waxbarasho.

Tusaale ahaan, si loo xaqiijiyo macno lahaanshaha, u fiirso agabka ku jira goobtaada daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore marka ay koox cusub oo carruur ahi soo galayso sannad kasta. Miyey jiraan alaabo taalla meesha ciyaaha riwaayada ah oo ay caruurtu yaqaanaan iyo waxyaabo ay ku arki lahaayeen gurigooda iyo bulshadooda? Luqadaha guriga ee caruurtu miyey ka muuqdaan deegaanka oo lagu soo dhaweeyay goobta?

## H. Wuxuu aqoonsadaa baahida luqadda tacliimeed ee ku habboon korriinka ee jadwalka joogtada ah, isdhexgalka bulshada, iyo waayo-aragnimada waxbarasho

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.H.1 | a. Wuxuu la wadaagaa qaar ka mid ah hababka isbeddelka iyo hal-abuurka leh ee carruurta ku hadasha luqadaha badani ay u isticmaalaan luqadda marka ay ku jiraan goobahooda daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore<br>b. Wuxuu qeexaa siyaabaha ereyada iyo dhaqanka luqadda ee ay adeegsadaan carruurta luqadaha badan ku hadlaan ay uga duwanaan karaan ereyada la isticmaalo inta lagu jiro isdhexgalka iyo waayo-aragnimada goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore. | a. Wuxuu bixiyaa tusaalooyin ku saabsan dhaqanka luqadda oo isbedbedelaya ee carruurta ku hadasha luqadaha badan ay ku isticmaalaan goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore, qoysaskooda, iyo bulshada dhexdeeda<br>b. Wuxuu aqoonsadaa haddii iyo meesha ay jirto kala go'a ku dhaqanka luqadda carruurta ku hadasha luqadaha badan iyo hab dhaqanka ku habboon koriinka hab dhaqanka luqadda tacliimeed ee goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore | a. Wuxuu ku sii dul dhisaa hababka ku dhaqanka luqadda oo isbedbedelaya ee carruurta ku hadasha luqadaha badan ay ku isticmaalaan goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore, qoysaskooda, iyo bulshada dhexdeeda<br>b. Wuxuu kala shaqeeyaa carruurta iyo qoysaska si ay u isticmaalaan luqad dhab ah oo ka tarjumaysa kala duwanaanshaha luqadeed iyo dhaqameed ee carruurta goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore |

## I. Wuxuu naqshadeeyaa khibradaha barashada luqadda iyadoo la tixgalinayo xaaladda dhaqan-bulsheed

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.I.1 | Wuxuu wayddiistaa taageero xagga ogaanshaha sida loo tixgaliyo macnaha dhaqan-bulsheed iyo hab dhaqamada luqadeed iyo hab dhaqanka hiddaha dhaqameed ee carruurta ku hadasha luqadaha badan marka la qorsheynayo waayo-aragnimadas barashada iyo isdhexgalka luqadda | Wuxuu bixiyaa tusaalooyinka waxa uu yahay macnaha in la tixgeliyo macnaha dhaqan-bulsheed iyo hab dhaqamada luqadeed iyo hab dhaqanka hiddaha dhaqameed ee carruurta ku hadasha luqadaha badan marka la qorsheynayo waayo-aragnimadas barashada iyo isdhexgalka luqadda | Wuxuu qiimeeyaa hababka kala duwan ee loo tixgeliyo macnaha dhaqan-bulsheed iyo hab dhaqamada luqadeed iyo hab dhaqanka hiddaha dhaqameed ee carruurta ku hadasha luqadaha badan marka la qorsheynayo waayo-aragnimadas barashada iyo isdhexgalka luqadda |

## J. Wuxuu fursado siiyaa dhammaan carruurta ku hadasha luqadaha badan si ay u sameeyaan fikir heer sarreeeya ah

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.J.1 | Wuxuu badiyaa hab dhaqamada ugu wanaagsan ee ka caawiya carruurta ku hadasha luqadaha badan inay galaan macno samayn iyo hawlo ku salaysan su'aalo kuwaas oo ka tarjumaysa ku dhaqankooda luqadda iyo hiddaha dhaqanka | Wuxuu daadihiyaa luqad ahaan iyo dhaqan ahaanba fursadaha warqabka ah ee carruurta ku hadasha luqadaha badan si ay u galaan macne samaynta iyo waxqabadyada ku salaysan su'aalaha kuwaas oo ka tarjumaysa ku dhaqankooda luqadda iyo hiddaha dhaqanka. | a. Wuxuu u sharaxaa asxaabta iyo qoysaska sida carruurta ku hadasha luqadaha badani ay u muujin doonaan macne samaynta iyo weydiinta siyaabo kala duwan oo ka tarjumaysa dhaqankooda luqadda iyo hiddaha dhaqanka.<br>b. Wuxuu ku soo daraa luqad ahaan iyo dhaqan ahaanba fursadaha warqabka ah ee carruurta ku hadasha luqadaha badan si ay u galaan macne samaynta iyo waxqabadyada ku salaysan su'aalaha inta lagu jiro manhajka iyo barnaamijka. |

## K. Wuxuu aqoonsadaa ujeedada laga leeyahay luqadda la isticmaalo inta lagu jiro hawlaha joogtada ah iyo waayo-aragnimada waxbarasho

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.K.1 | Wuxuu u fiirsadaa si uu u aqoonsado ujeedada laga leeyahay luqadda la isticmaalo inta lagu jiro isdhexgalka, jadwalada joogtada ah, iyo waayo-aragnimada barashada | Wuxuu go'aamiyaa ujeedada laga leeyahay luqadda la isticmaalo inta lagu jiro qaar ka mid ah isdhexgalka, jadwalada joogtada ah, iyo waayo-aragnimada barashada | Wuxuu naqshadeeyaa isdhexgalka luqadda si loo siiyo carruurta ku hadasha luqadaha badan ujeeddooyin kala duwan oo loogu talagalay ku isticmaalka luqadda hawlo kala duwan iyo waaya-aragnimada waxbarasho |

**Carruurtu waxay u isticmaalaan luqadda ujeedooyin kala duwan.** Marka aynu ka hadlayno ujeedada luqadda, waxaynu ula jeednaa waxa carruurtu ay ku sameeyaan luqadda. WIDA waxay aqoonsay saddex adeegsi oo fure u ah luqadda ee goobaha daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore: Ismuujinta/Sheegashada Nafeed, Dib-u-eegis/Xasuusasho, iyo Weydiin (WIDA, 2016). Iyadoo la eegayo sida carruurtu u isticmaalaan luqadda inta lagu jiro hawlaha caadiga ah, isdhexgalka bulshada, iyo hawlaha  waxbarashada, barayaashu waxay qorsheyn karaan siyaabaha lagu siinayo carruurta fursado ay ku ballaariyaan ku dhaqanka luqaddooda iyo siyaabo kala duwan ee ay u isticmaalaan luqadda.

## L. Wuxuu u qorsheeyaa baridda iyo barashada luqadda meelo gaar ah oo horumarinta iyo waxbarashada ah

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.L.1 | Wuxuu soo ururiyaa habab kala duwan si uu u fududeeyo isticmaalka luqadda ee carruurta luqadaha badan ku hadasha iyo isdhexgalka luqadda ee meelaha cayiman ah ee horumarka iyo waxbarashada | Wuxuu wax baraa isaga oo adeegsanaya xeelado kala duwan si loo fududeeyo isticmaalka luqadda ee carruurta luqadaha badan ku hadasha iyo isdhexgalka luqadda ee meelaha cayiman ah ee horumarka iyo waxbarashada | Wuxuu ku tababaraa dadka kale xeelado kala duwan si loo fududeeyo isticmaalka luqadda ee carruurta luqadaha badan ku hadasha iyo isdhexgalka luqadda ee meelaha cayiman ah ee horumarka iyo waxbarashada |

## M. Wuxuu isticmaal taageerooyinka luqadda si ay u caawiyaan istaajinta/taageerida horumarinta iyo barashada luqadda

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.M.1 | Wuxuu raacaa tilmaamaha dadka kale ee waaweyn si uu u u diyaariyo agabyo kala duwan oo loo isticmaali karo in lagu taageero isticmaalka luqadda iyo macno samaynta carruurta ku hadaasha luqadaha badan | Wuxuu hirgeliyaa oo fududeeyaa carruurta ku hadasha luqadaha badan in ay isticmaalaan agab kala duwan si ay u taageeraan isticmaalkooda luqadda iyo samaynta macnaha | Wuxuu ku taliyaa oo ay ku tababaraa dadka kale sida loo dhiirigaliyo loona fududeeyo carruurta ku hadasha luqadaha badan in ay isticmaalaan agab kala duwan si ay u taageeraan isticmaalkooda luqadda iyo macno samayntooda |

## N. Wuxuu bixiyaa fursado badan oo macno leh oo loogu talagalay carruurta ku hadasha luqadaha badan si ay u isticmaalaan luqadahooda

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.N.1 | Wuxuu indha-indhayn ku sameeyaa in dhammaan heerarka horumarinta luqadda, carruurta ku hadasha luqadaha badan ay u adeegsan doonaan ku dhaqanka ururka luqadeed marka ay dhexdhexaadinayaan fahamka, samaynta macnaha, iyo muujinta aqoonta | a. Wuxuu tusaaleeyaa qiimeeyaa/muhiimad siiyaa dhammaan isticmaalka ururka luqadeed ee carruurta ku hadasha luqadaha badan<br>b. Wuxuu bixiyaa fursado badan oo macne leh oo loogu talagalay carruurta ku hadasha luqadaha badan si ay u adeegsadaan ku dhaqanka ururka luqadeed marka ay dhexdhexaadinayaan fahamka, samaynta macnaha, iyo muujinta aqoonta | Wuxuu u doodaa qiimaynta nidaamka barnaamijka iyo hirgelinta manhaj mudnaanta siinaya horumarinta fursado badan oo macne leh oo loogu talagalay carruurta si ay u adeegsadaan ku dhaqanka ururkooda luqadeed marka ay dhexdhexaadinayaan fahamka, samaynta macnaha, iyo muujinta aqoonta |

**Ururka luqadeed (Linguistic repertoire) waxaa loola jeedaa dhammaan noocyada luqadda ee ay ilmuhu la kulmay oo uu baranayo.** Ilmaha Ingiriisiga kaliya loo soo bandhigay ayaa wuxuu yeelan doona urur luqadeed oo ka kooban siyaabo kala duwan oo qoyskooda iyo bulshadoodu ay u isticmaalaan Ingiriisiga. Sidoo kale, ilmaha loo soo bandhigay wax ka badan hal luqad ayaa wuxuu yeelan doona urur luqadeed oo ka kooban siyaabo kala duwan oo qoyskooda iyo bulshadoodu ay u isticmaalaan dhammaan luqadahooda.

# Liiska Macnaha Erayada

**Khibradaha Carruurnimada ee Xun:** Waayo-aragnimada carruurnimo ee xun (ACE) waxay qeexaysaa waayo-aragnimada naxdinta leh ee nolosha qofka ee ku dhacda kahor da'da 18 jir ee qofku xasuusto isaga oo qaangaaray oo ay ku jiraan: xadgudub jireed, xadgudub galmo, aflagaado, jirro maskaxeed oo xubin qoys ah, khamri cabka dhibka leh ama khamri cabk xubin qoyska ah, isticmaaalkaa daroogaga waddada oo sharci darro ah ama isticmaalka daroogada ee xubin qoyska ka mid ah, furiinka ama kala tagga waalidka, rabshadaha qoyska ee ku wajahan waalidka, iyo xiritaan xubin qoyska ka mid ah.

**U doode:** Qaadista tallaabo iyo/ama bixinta taageerada dadweynaha iyadoo ku hadlaya magaca dadka kale, gaar ahaan, kuwa ka socda bulshooyinka ama kooxaha ay la kulmay takoorid iyo/ama cadaadis.

**Xusuus qor kooban:** Qoraallo gaagaaban oo la qoro inta lagu jiro ama kadib cashar/waayo-aragnimo ardaydu u shaqeeyaan kooxo ahaan ama si gooni ah.

**Hababka wajahidda Waxbarashada:** dabeecadda, dhaqanka iyo qaababka barasho ee carruurtu u isticmaalaan xaaladaha bulshada iyo marka ay baranayaan macluumaad cusub.

**Heshiisyada Aqoonta (Articulation Agreements):** Heshiis rasmi ah oo u dhexeeya laba machad oo tacliinta sare ah kaas oo ogolaanaya buundooyinka lagu kasbado kulliyadda bulshada in loo wareejiyo kulliyad ama jaamacad afar sano ah.

**Qiimaynta:** Uruurinta xogta ilmaha iyadoo loo marayo habab kala duwan, sida baaritaanka: xallinta mushkiladaha diiradda la saaraya, sharraxaadda meelaha ay ku wanaagsan yihiin iyo meelaha ay liitaan, u fiirsashada, tijaabinta, ama la socodka horumarka, si loo gaaro go'aanno waxbarid oo warqab ah. Xusuusin: Qiimayntu waxay khusaysaa xog ururinta.

**Ku xiriirsanaan:** Xiriir adag oo shucuureed oo u dhexeeya ilmaha (dhallaanka, socod baradka iyo wixii ka dambeeya) iyo qof weyn oo daryeela oo qayb ka ah nolol maalmeedka ilmaha. Marka xiriir sugan lagu sameeyo muddo, ilmuhu wuxuu door bidaa oo ku tiirsan yahay xiriirka uu la leeyahay qofka weyn. Ilmuhu waxa uu qofkaas u isticmaalaa in uu u yahay saldhig ammaan ah oo uu ka sahamiyo iyo in uu u yahay isha badbaadada iyo raaxada marka loo baahdo.

**Sifo:** Tayada, sifada ama astaamaha uu leeyahay shay ama qof. Wax aad oran karto wuu leeyahay (sida cabbirka ama midabka).

**Tusaale:** Sifooyinka eyga waxaa ka mid ah dhererka, xawaaraha iyo midabka.

**Horumar/korriin aah caadi ahayn:** Hab dhaqan ama xirfad ayaa waxay u horumartaa si ka duwan kan facooda (taas oo ka baxsan heerka caadiga ah ama heerka la filayo).

**Qiimayn Dhab ah:** Dhaqannada qiimaynta ee ku salaysan waayo-aragnimada waxbarasho ee maalinlaha ah, ee bixiya waxqabad dhab ah oo loo sameeyo ilmo, oo ka qaybgeliya carruurta habka qiimaynta (McAfee, 2004).

**Dhaqamada ugu Wanaagsan:** Xeeladaha, hababka, farsamooyinka iyo halbeegyada tayada sare, korriinka ku habboon, barnaamijyada carruurnimada hore iyo isdhexgalka kuwaas oo ku salaysan aqoonta hadda jirta iyo caqiidada la wadaago oo si joogto ah u muujiya natiijooyin ka sarreeya hababka iyo xeeladaha kale.

**Eexda/qof jeclaysiga:** Waxa ay tilmaamaysaa eexda cad iyo midda qarsoon labadaba; mawqifyada ama fikradaha qaldan ee u xaglinaya ama ka soo horjeeda koox(kooxo) oo laga doorbido kuwo kale.

**Daryeel bixiye:** Qof kasta oo weyn oo daryeel siiya ilmo yar.

**Bartame ahaanshaha Dhaqanka:** Doorka guud ee la wadaago ee nidaamyada caqiidada - siyaabaha garashada, samaynta, iyo ahaanshuhu - ay ka qaataan fahamka aduunka iyo meesha aynu ku leenahay. Nidaamyadan caqiidadu waxay saameeyaan sida aan ula falgalno, qiimeynteena, iyo waxyaabaha aan mudnaanta siino.

**Xarunta Daryeelka Carruurta:** Ganacsiyada xanaaneeya oo wax ku bara carruurta yaryar meel ka baxsan goobta guriga: Xarunta daryeelka carruurta ama xarumaha horumarinta, barnaamijyada maalin-buuxa ama qayb-maalintii ah.

**Barnaamijka Cuntada Daryeelka Dadka Waaweyn (CACFP):** Barnaamij ay maalgaliso dawlada dhexe oo ka caawiya barnaamijyada caruurnimada hore qorshaynta iyo bixinta cunto nafaqo leh iyo cuntooyinka fudud oo la siiyo caruurta.

**Waayo-aragnimada/khibradaha kiliinikada:** Ku meelaynta ardayda shahaadada koowaad ee jaamacadda waayo-aragnimada goobta ( diirad saarid meel khaas ah oo hal dhinac oo fasalka ah ama barshada ah) iyo waxbaridda ardayda (dhexgelinta dhammaan dhinacyada waxbaridda) si ay khibrad uga helaan goobta fasalka.

**Luqad Bedelaada (code-switching):** "ku isticmaalka qaybo ka yimid laba luqadood odhaahda hal hadal oo isku mar ah ama isla hal qayb oo hadalka ah" (Paradis, Genesee, & Crago, 2011, p.88); Habka ugu badan ee carruurta yaryari ay isku daraan laba luqadood waa in ay jumlad ku bilaabaan hal luqad, ka dibna u beddeshaan mid kale.

**Wada shaqayn:** Dhammaan xubnaha kooxda oo u wada shaqaynaya ujeedo guud.

**Kartida:** Muujinta lahaanshaha xirfad ama karti. Kartida asaasiga ahi waxay tilmaamaysaa kartida looga baahan yahay waxqabasho muhiim u ah qofka in loo ogolaado in uu ka shaqeeyo xirfadaas shaqo, aqoon ama xirfado la arki karo oo la cabbiri karo. Aqoonta iyo xirfaddu waa inay kala soocaan hawl-wadeennada gudashada sare (ama waxqabadka ku dayashada leh) iyo kuwa kale.

**U hogaansanaanta:** u hogaansanaanta xeerarka iyo sharciyada, u dhaqmida si waafaqsan sharciyada.

**Wadaag bulsheed, Ku tiirsanaan, iyo Madaxbanaani:** Xirfado joogto ah oo u dhexeeya la wadaaga qof kasta oo ka tirsan kooxda (wadaaga bulsheed), isla wadaagga xubnaha qaar ka mid ah ka dhexeeya (isku-tiirsanaanta), in qofku keligii shaqeeyo (madaxbanaani).

**Qarsoodi ahaanta (Asturnaanta Xogta):** Ilaalinta xogta la ururiyay ama laga hayo shakhsiga, iyadoo la raacayo xeerka asturnaanta macluumaadka ee xirfadlaha lagula xisaabtamo (sida, FERPA, HIPAA, Xeerka Asturnaanta Macluumaadka ee Minnesota).

Xogta uu maamulo sharciga gobolka ee lagu sifeeyay wax aan ahayn in tahay xog dadweynaha u furan waxaa loo kala saaraa mid ka mid ah siyaabaha soo socda:

- Mid gaar loo leeyahay: xogta tilmaamaysa shakhsi oo uu heli karo qofka keliya ama lagu heli karo ogolaanshaha qofka (Minn. Stat. §13.02, subd. 12).
- Qarsoodi ah: xogta tilmaamaysa shakhsi oo uuna uuna heli karin cid ka baxsan cidda xogta haysa, oo uu ku jiro shakhsigu (Minn. Stat. § 13.02, subd. 3).

**Nuxurka/mawduuca Aagga:** Qaybaha loo isticmaalo in lagu abaabulo loogana hadlo tiro badan oo macluumaad ah (sida, waxbarasho). Mawduuc kastaa wuxuu leedayay saldhig aqooneed iyo xeelado loogu talagalay in wax lagu baro.

**Horumarin joogto ah:** Dadaal socda oo lagu horumarinayo xeeladaha, xirfadaha, hababka iyo barnaamijyada.

**Lamaanaha la maaraynta isxakamaynta:** Doorka muhiimka ah ee ay daryeelayaashu u ciyaaraan dhallaanka iyo carruurta yaryar si ay u bixiyaan amniga cilaaqaadka iyo xeelado ula kac ah si ay uga caawiyaan inay maareeyaan heerkooda kacsanaanta, taas oo ka caawisa inay u furnaadaan waxbarasho cusub.

**Qiyamka Muhiimka ah:** Qiyamka si qoto dheer loo aaminsanyahay oo la siiyo mudnaanta ugu sarraysa.

**Dhibco ku salaysan (Credit-based):** Koorso ama tababar lagu helayo "dhibco" ama cutub qiimo ah. Dhibcaha waxaa lagu bixiyaa heerka adkaanshaha ama shuruudaha wakhtiga ee koorsada tacliinta ee laga qaato machad waxbarasho, sida kulliyadaha iyo jaamacadaha laba sano iyo afar sano ah.

**Dhaqamadu wadaagaan:** Fikradaha, qiyamka, ama hab dhaqamada la wadaago ama ay isla fahmaan laba ama in ka badan oo koox dhaqameed ah.

**U hogaansanaanta:** u hogaansanaanta sharciyada, xeerarka, halbeegyada ama qawaaniinta khuseeya.

**Hiddaha Dhaqanka:** Caqiidooyinka, hab dhaqamada, iyo caadooyinka qoomiyad, koox diin ama koox bulsho.

**Dhaqanka Hiddaha Dhaqanka:** Dhaqan ama caado dhaqameed qawmiyad gaar ah ama koox dhaqameed kale.

**Isku Xirka Dhaqanka iyo Bulsho:** siyaabaha ay dadku isugu xiranyihiin. Waxay noqon karaan deegaan juqraafi, tusaale ahaan dadka ku nool meel isu dhow. Waxay sidoo kale noqon karaan xiriir ka dhexeeya dadka wadaaga dano xooggan, qaab nololeed gaar ah, ama hiddo gaar ah. Shabakadahani waxay noqon karaan maxali, gobol/deegaan, qaran iyo/ama mid caalami ah.

**Urur Dhaqan ahaan la mid ah:** Urur si ballaaran u wadaaga aragtida adduunka, malo-awaalka, iyo qiyamka ka qaybgalayaasha oo hoggaamintooda iyo shaqaalahoodu ay ka tarjumayaan hiddadaha dhaqanka. Urur dhaqan ahaan taageero bixiya waa mid ka tarjuma oo xaqiijiya ka qaybgalaha aragtidiisa adduunka, malo-awaalka, iyo qiyamka, oo ay ku jiraan hoggaan aqoon leh iyo shaqaalaha safka hore.

**Dhaqan salka ku haysa/ku xiriirsan:** In lagu saleeyo qaab gaar ah oo loo arko adduunka si waafaqsan fikradaha iyo qiyamka qofka dadkiisa.

**Dhaqan ahaan gaar ah:** Fikradaha, caqiidooyinka, iyo hab dhaqamada aadka muhiim ugu ah koox dhaqameed gaar ah, laakiin laga yaabo in aanay muhiim u ahayn ama xitaa aysan aqoonsanayn dadka kale. Fikradahan asaasiga ah, caqiidooyinka, iyo dhaqamada ayaa waxay noqon karaan albaabbada barashada ee carruurta iyo buundooyinka in la fahmo qoysaska iyo bulshada.

**Manhajka:** Waa qaab habaysan oo qeexaya nuxurka ay tahay inay carruurtu bartaan, hababka ay carruurtu ku gaaraan himilooyinka la aqoonsaday, waxa ay macallimiintu sameeyaan si ay carruurta uga caawiyaan inay gaaraan yoolalkan, iyo macnaha guud ee barida iyo waxbarashadu ku dhacdaan (Rosegrant, 1992).

Qeexida Parent Aware ee manhaj waa xirmo qalab qoran ah oo ay isticmaalaan daryeel-bixiyeyaasha/barayaasha caruurnimada hore si ay u horumariyaan waayo-aragnimada waxbarasho oo hawlgelin leh oo loogu talagalay carruurta yaryar.

**Horumarka:** Horumarku waa geedi socod adag oo isbedbedalaya oo lagu garto xilliyo habacsanaan iyo korriin ah (la xiriira taabbo galka maskaxda) waxayna dhacdaa iyada oo loo marayo taxane la qabsiyada waayo-aragnimada shakhsiyeed ah.

**Marxaladda korriinka:** Waa xilliga horumarka ee ay sifooyin ama awoodo gaar ahi ay guud ahaan soo muuqdaan, mararka qaarkoodna loo yaqaanno horumarro.

**Hab dhaqanka Koriinka Ku Haboon (DAP):** Isticmaalka xeeladaha waxbaridda ee ku salaysan aqoonta sida carruurta yaryar u koraan oo wax u bartaan, waxa ilma kasta ka dhigaya mid kuwa kale ka geddisan, iyo bulshada iyo dhaqanka qoyska iyo luqadda guriga ee ilmaha. Hawlaha DAP maaha kuwo aad u adag ama aad u fudud, laakiin waa kuwo ku habboon (Growing Glossary of Early Childhood Terms).

**Farsano lahaansho:** Xirfadda isticmaalka gacmaha si loo maareeyo walxaha.

**Lahjad:** Waxa loola jeedaa "... kala duwanaanta luqadda ay sameeyaan dadka ku hadlaa marka ay koraan oo ay la falgalaan bulshooyinka ku salaysan deegaan juqraafi, jinsiyadda, koox, qowmiyadda, ama calaamadaha kale oo aqoonsi." (Finegan & Rickford, 2004; Hudley & Mallinson, 2011; Valdes et al., 2005 in Bunch, 2013, p. 303)

**Naafanimada:** Fadlan tixraac goobta ku habboon si aad u hubiso inaad isticmaalayso qeexida cayiman ee xaaladaada gaarka ah:

- ADA Qoraalka hadda ee Xeerka Maraykanka Naafanimada leh ee 1990 oo ay ku daraya isbeddelada lagu sameeyay Xeerka Waxka bedelka ADA ee 2008 (http://www.ada.gov/pubs/adastatute08.htm#12102)
- Head Start: Iyada oo loo marayo Xarunta Waxbarashada Carruurnimada Hore iyo Xarunta Aqoonta (ECLKC): Section 637 is definjtipns_(http://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/hslc/standards/Head%20Start%20Act#641-c)
- Qaybta C (Dhalashada ilaa 2) §303.21 Infant or toddler with a disability (http://www.ecfr.gov/cgi-bin/text- idx?c=ecfr&SID=07769158a96f85d5ac1abd0eb7fdd1e3&rgn=div8&view=text&node=34:2.1.1.1.2.1.10 2.21&idno=34)
- Qaybta B (3 ilaa fasalka Kindergarten) IDEA 2004 Statute: TITLE I / A / 602 / 3 (http://idea.ed.gov/explore/ view/p/%2Croot%2Cstatute%2CI%2CA%2C602%2C3%2C)
- Khaas u ah Minnesota (https://www.revisor.mn.gov/statutes/?id=125A.02)

**Tayada Dabeecadda:** Dareenka caadiga ah, niyadda ama u janjeedhida; dhismaha dabeecadda; iyo sida a macquul u tahay in uu qofku si cayiman u dhaqmo oo ay keenayaan duruufaha jira ee niyadda caadiga ah ama dabeecadaha qofka ee ku aaddan nolosha.

**Fikirka Duwan:** Fikirka hal-abuurka leh ee abuura xalal cusub oo asal u ah dhibaatooyinka.

**Kala duwanaanshaha:** Kala duwanaanshaha doorsoomayaasha tirakoobka, sida jinsiyadda, diinta, jinsiga, asalka qaran, naafanimada, luqadda lagu hadlo, heerka dhaqan-dhaqaale iyo asal meesha qfku ka yimid.

**Waaxda (Domain):** Meelaha ugu muhiimsan ee horumarka.

**Bartayaasha Labada Luqadood:** Carruurta barata luqadda qoyskooda iyo sidoo kale luqadda bulsho weynta labadaba.

**Bare:** Waa qof qaangaadh ah oo mas'uul ka ah bixinta taageero waxbarasho iyo mid shucuureed oo la siiyo carruurta ku jirta goobta daryeelka iyo waxbarashada; waxaa ka mid ah dadka la macaamila carruurta ku jirta barnaamijyada iskuulka ku salaysan, Head Start, preschool-ka, iyo xarumaha daryeelka carruurta.

**Cimilada Dareenka Shucuurta:** Dareenka la xiriira isdhexgalka rasmiga ah iyo ka aan rasmiga ahayn, jawaabaha dabeecada, iyo diiranaanta, ku raaxaysiga iyo ixtiraamka la muujo. Tayada isdhexgalka bulsheed iyo shucuureed ee u dhexeeya carruurta iyo dadka waaweyni waxay noqon kartaa mid togan iyo/ama xun.

**Bartaha Ingiriisiga:** Isticmaalka ama barashada Ingiriisiga ee qof leh af hooyo oo aan Ingiriisi ahayn.

**Anshaxa:** Barashada saxa iyo khaladka, mas'uuliyada iyo waajibaadka.

**Haqamada iskaashiga sinaanta iyo hiddaha dhaqanka iyo luqadda warqabka u ah:** Hab dhaqamada hubinaya in a) ka qaybqaadashada iyo wada shaqaynta qoysaska ku hadla luqadaha badan b) ka qaybgalka qoysaska luqadaha badan ku hadla in uu yahay mid ku habboon iyo c) In xuquuqaha qoysaska luqadaha badan ku hadla inay si macno leh ugala shaqeeyaan barayaasha carruurnimada hore iyo shaqaalaha waxa ku saabsan horumarka luqada iyo waxbarashada carruurtooda in la taageero.

**Qiimayn:**

- **Guud:** Miisaanka caddaynta si loo go'aan qaato. Qiimayntu waxay ku saabsanaan kartaa nidaamyada, barnaamijyada iyo dadka.
- **Qiimaynta barnaamijka:** Habka uu barnaamijku ku cabbiro waxtarka iyo natiijooyinka iyadoo lagu salaynayo jaangooyooyin la dejiyey inta lagu jiro hirgelinta hawlaha barnaamijka.
- **Qiimaynta Ardayga (isticmaalka ugu badan ee erayga):** Habka ay ilmaha ku qiimeeyaan koox takhasusyo kala duwan leh meelaha baahida ee lagu aqoonsaday baarintaanka carruurnimada hore, si loo go'aamiyo u-qalmitaanka ilmaha ee adeegyada waxbarashada gaarka ah.

**Waxqabadka Caddaynta Ku Salaysan:** Faragelin/wax ka qabasho, xeelad ama qayb ka mid ah waxbarista oo la xaqiijiyay, iyada oo loo marayo cilmi-baaris xog ku salaysan, si ay u noqoto mid wax ku ool ah oo lagu wanaajiyo natiijooyinka shakhsiyaadka marka dhaqanka lagu fuliyo si daacadnimo loo raacayo (sida, sida saxda ah ee hab dhaqanka ama faragelinta loogu talagalay in loo fuliyo).

**Shaqaynta Garaadka:** Xirfadaha garashada ee ka caawiya qofka inuu gaaro yoolalka. Shaqaynta Garaadka waxaa ka mid ah awoodda: maaraynta wakhtiga iyo dareenka, beddelashada diirad saaridda, qorshaynta iyo habaynta, xusuusta faahfaahinta, xakamaynta hadalka ama dhaqanka aan habboonayn, iyo isku-dhafka waaya-aragnimada hore iyo ficil hadda jira.

**Qoysaska:** Waxaa ku jira waalidiinta, mas'uuliyiinta, walaalaha, awoow/ayeeyada, xubnaha qoyska ee korinta ku meelgaarka ah, iyo dadka kale ee ku lug leh daryeelka iyo waxbarashada ilmaha

**Daryeelka Caruurta Qoyska:** Ku daryeelka iyo waxbarashada ilmaha goob ah guri ka baxsan guriga ilmaha oo joogto ah, qayb uun ka midah 24-ka saac.

**Cuntada Qaabka Qoyska:** Adeegga cuntada ee qaabka qoyska macnihiisu waa in cuntada lagu qaybiyo baaquli ama suxuun miiska saaran; carruurta waxaa lagu dhiirigeliyaa inay naftooda u adeegaan, ama naftooda u adeegaan iyagoo caawimo ka helaya qof weyn.

**Daacadnimo:** U hirgelinta wax ka qabashada, barnaamijka, manhajka ama qiimeynta qaabkii ay ugu talagaleen dadka soo sameeyey si loo gaaro natiijooyinka la rabo.

**Waayo-aragnimada goobta:** Waa hab lagu isku darayo daraasaadka akadeemiyadda iyo xilliyada shaqada ama waayo-aragnimada iskaa-wax-u-qabso ah ee la xiriirta goobta waxbarashada. Ardaydu waxay wax ku bartaan iyagoo samaynaya mashruucyo adduunka dhabta ah oo si dhow loola socdo.

**Qiimaynta qaabaynta:** Habka ay adeegsadaan macalimiinta iyo ardaydu inta lagu guda jiro waxbarida taas oo bixinaysa rayi celin si loo hagaajiyo waxbarida iyo waxbarashada socota si loo horumariyo guusha ardayda iyo natiijooyinka laga rabay (Sarkaal, 2008).

**Hagitaan:** Habka lagu hago, saxo oo loogula bulsheeyo dhexgalka carruurta siyaabo ka caawinaya inay horumariyaan is-xakamaynta, sameeyaan doorashooyin fikir leh, oo ay qaadaan mas'uuliyadda ficilkooda. Habkani waxa uu diiradda saarayaa in la baro carruurta waxa ay tahay in ay sameeyaan halkii la bari lahaa waxa ay tahay in aan la samayn.

**Head Start:** Barnaamij horumarineed oo dhameystiran oo federaalKu maalgeliyo oo u adeega carruurta da'doodu u dhaxayso 0-5 sano, haweenka uurka leh, iyo qoysaskooda. Waa barnaamij diirada saaraya ilmaha oo hadafkiisu yahay in la kordhiyo diyaargarowga iskuulka ee carruurta yaryar ee qoysaska dakhligoodu hooseeyo.

**Dhaawaca Masiibada ee Sooyaalka ah:** Heerar kala duwan oo  dhaawacyada jireed, shucuureed, maskaxeed, iyo dhaqaale ah ee jiilalka koox dad ah oo dhan loo geysto, iyadoo lagu salaynayo aqoonsigooda, ee ka muuqata xubnaha dadka kooxdaas.

**Fulin:** In la dhaqan geliyo iyo/ama la fuliyo.

**Ku darida:** Siyaasadaha, nidaamyada iyo aaminsanaanta in dhammaan carruurta lagu daro goobaha carruurnimada hore, oo ay ku jiraan kuwa leh dib u dhac koritaan ama naafonimo; carruurta hibada iyo kartida leh; carruurta ay qoysaskoodu dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba ku kala duwan yihiin; iyo carruurta ka socota dhammaan kooxaha dhaqan-dhaqaale.

**Barnaamijka Waxbarashada Shakhsiyeed:** Qorshe ama hage si sannadle ah dib loo eego oo loogu talagalay in wax lagu baro ardayga naafada ah, faahfaahinaya heerka kasbashada ee hadda, yoolalka iyo xeeladaha, oo ay dejiyaan macallimiinta, waalidiinta, takhasusayaasha iyo marka ay habboon tahay, ardaygu.

**Qorshayaasha Adeega Qoyska ee Shakhsiyeed:** Dukumeenti qoran oo lagu qeexay Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah (IDEA) si uu u hago hirgelinta adeegyada wax ka qabashada hore ee carruurta laga bilaabo dhalashada ilaa da'da saddex jir iyo qoysaskooda. Waxa lagu abuuray wada-hadal iskaashi dhexmaray qoysaska iyo xirfadlayaasha ku hawlan qiimaynta iyo bixinta adeega.

**Ku habboonaysiinta Shakhsiga:** soo qaadashada ama beddelka hawlaha si looga jawaabo danaha iyo qaababka waxbarasho ee ilmaha.

**Cudur la is Qaadsiiyo:** Waa cudur ama xaalad ay keenaan noolaha sida bakteeriyada, fayrasyada, fangaska ama dulinnada kuwaas oo gala kuna kora jirka dhexdiisa.

**Qorshayaasha Wax ka Qabashada Shakhsiyeed ee Hay'adaha u Dhexeeya:** Qorshe qoran oo qeexaya barnaamijyada iyo adeegyada ay heli karaan carruurta naafada ah ee u qalanta ee da'doodu u dhaxayso 3 ilaa 21.

**Kaabayaasha:** Xeerarka, habka, xarumaha, iyo adeegyada looga baahan yahay si uu u shaqeeyo nidaam ama urur.

**Adeega/shaqada ku jira:** Tababarka loogu talagalay dadka horayba shaqaalaha u ahaa.

**Hababka ama Xeeladaha waxbaridda:** Xeeladaha iyo farsamooyinka loo doortay waxtarkooda in ay caawiyaan ardaygu inuu barto fikrad gaar ah.

**Waxbaris ula kac ah:** Waxbaris leh ujeeddo cad oo tixgelisa habka ugu wanaagsan ee kor loogu qaadayo korriinka carruurta (carruurtu hagto,  qaan-gaarku hago, ama isku darka labadaba).

**Wax ku Barashad Tababarka Gacmaha ah (Kinesthetic Learning):** Hab-waxbarasho oo ardaygu uu si fiican wax ugu barto dhaqdhaqaaqa jireed iyo qabashada.

**Barashada Luuqadda:** Awoodda saarka iyo sidoo kale fahamka luqadda si loola xiriiro dadka kale.

**Adeegsiga Luqadda:** Siyaabaha ay carruurtu u isticmaalaan luqadda si ay macno u sameeyaan. Sida ilmuhu u isticmaalo luqaddu way kala duwanaan doontaa iyadoo ku xiran luqadda iyo dhaqanka ay yaqaanaan, aqoonsigooda, iyo meesha, cidda, sida, iyo sababta ay u isticmaalayaan luqadda.

**Ka qaybgalinta Qoyska ee Luqadda Diirada-saaraysa:** Waxay ilaalisaa baahiyaha gaarka ah iyo waaya-aragnimada carruurta ku hadasha luqadaha badan iyo qoysaskooda, oo ay ku jirto horumarinta luqadda, oo udub dhexaad ugu noqota goob kasta oo ah guriga iyo daryeelka carruurta iyo goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore. Waxay xisaabta ku daraysaa tixgalinta muhiimka ah ee lagu qeexay WIDA ABCs ee Ka qaybgalinta Qoyska; waxay qiimaysaa oo ay xaqiijisaa dhaqamada iyo hadafyada luqadaha qoyska; waxay si macne leh ugu gudbisaa macluumaadka ku saabsan barnaamijyada ku salaysan guriga-, xarunta-, iyo barnaamijyada luqadda iskuulka ku salaysan, hab dhaqanka iyo yoolalka; waxayna ku salaysan tahay xaqiijinta, hab waxa lagu xoogganyahay ku salaysan.

**Qorshaha Casharka:** Tilmaamaha casharka oo ay ka mid yihiin yoolka (waxa uu macallinku rabo in carruurtu bartaan), hababka loo marayo si loo gaaro yoolkan (qaabka casharka), iyo sida uu macallinku u cabbirayo in hadafkii la gaaray (muujinta fahamka).

**Ururka luqadeed (Linguistic repertoire):** Dhammaan noocyada luqadda ee ay ilmuhu la kulmay oo uu baranayo

**Akhris-qoraalka:** Kartida wax akhrinta iyo qoraalka.

**Xisaabta:** Barashada fikradaha tirada iyo xisaabinta, qaababka iyo xiriirka, xiriirada cabbirka meelaha, cabbirka iyo sababaynta.

**Macne samaynta:** Waa hab si firfircoon loogu isticmaalo khayraadka/alaabta qofku haysto si uu u sameeyo macnaha fikradaha, ifafaalaha xaaladaha jira, aragtida, khibradaha, ama xaaladaha. Carruurtu waxay isticmaalaan luqadda si ay macno u sameeyaan.

**Halka uu marayo horumarku (Milestones):** Karti ama xirfad ay carruurta badankoodu ku gaaraan da' gaar ah.

**Carruurta luuqadaha badan ku hadasha:** Carruurta kala duwan dhaqan iyo afba, da'dooduna u dhaxayso dhalasho ilaa shan sano, kuwaas oo baranaya laba ama in ka badan luqado ah. Carruurta ku hadasha luqadaha badan waxay kula kulmaan afaf badan guryahooda, bulshooyinkooda, iyo/ama goobaha daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore, waxayna u horumariyaan oo u isticmaalaan luqadda siyaabo isbedbedalaya. Gudaha xirfadan shaqo, carruurtan waxaa badanaa loogu yeeraa bartayaasha labada luqadood, ama DLLs.

**Tababbarka Aan Dhubcaha ku salaysnayn ama Tababarka Aan Dhubcaha lahayn (Non-credit Based or Not-for-Credit Training):** Tababarka uuna qofku ku helin buundooyinka kuleejka.

**U fiirsasho/indha-indhayn:** Waa hab ay adeegsadaan barayaasha carruurnimada hore si ay u daawadaan, u dhegaystaan, oo ay u duubaan ficillada carruurta, muujinta dareenka-shucuurta wejiga, luqadda jirka, dhawaaqyada, erayada, iyo midaarka. Barayaashu waxay u isticmaalaan macluumaadka si ay u bartaan ilmaha iyo xirfadahooda oo ay u qorsheeyaan siyaabo lagu taageero laguna xoojiyo korriinka xirfadda ilmaha.

**Adeegyada Carruurnimada Hore ee Kale:** Ujeeddooyinka dukumeentigan, tani waxay tixraacaysaa xirfadlayaasha kala takhasusyo duwan ee la shaqeeya carruurta yaryar, qoysaskooda iyo daryeel bixiyayaasha, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn bixiyeyaasha daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore, adeegyada ilaalinta ammaanka carruurta, faragelinta/waxka qabashada dib u dhaca carruurnimada hore, booqashada guriga. , bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda iyo jirka. Xirfadaha Dareenka: Xirfadaha u baahan iskuduwidda garashada, dareenka iyo awoodaha dhaqdhaqaaqa muruqyada si uu qofku ula falgalo deegaankiisa.

**Xirfadaha Dareenka:** Xirfadaha u baahan iskuduwidda garashada, dareenka iyo awoodaha dhaqdhaqaaqa muruqyada si uu qofku ula falgalo deegaankiisa.

**Farriinta Dhaqanka oo Togan:** Waxay kor u qaadaa qiyamka iyo xirfadaha bulshada dhexdeeda la jecelyahay ah.

**Tababarada shaqo ee ardayda jaamaca (Practicum):** Waayo-aragnimada goobta shaqada ee uu qofku caawiyo, u fiirsado, ama uu leeyahay masuuliyado xaddidan. Guud ahaan waa wakhti dhiman iyo muddo wakhti gaaban.

**In la Saadaain karo:** In la saadaain karo, oo ay weheliso in la xakamayn karo iyo taageerada bulshada, ayaa loo aqoonsaday inay gacan ka geystaan maaraynta jawaabta maskaxda ee welwelka. (Preventing Child Abuse & Neglect, 2006). Siinta dhallaanka iyo socod baradka hab-nololeedka la saadaalin karo, luqadda iyo deegaan ayaa ah xeelado muhiim ah oo lagu caawinayo carruurta inay yeeshaan dareenka ammaan iyo awoooda hanashada barasho

**Dugsiga hoose ka hor:** Da'da saddex ilaa gelitaanka dugsiga barbaarinta.

**Adeega Shaqaalaynta ka hor (Pre-service):** Tababarka iyo waxbarashada uu qofku qaato shaqada kahor.

**Daryeelka Aasaasiga ah:** Daryeelka Aasaasiga ah, ilmo dhallaanka/socod barad kasta waxaa lagu meeleeyaa hal macalin oo gaar ah oo mas'uul ka ah daryeelka ilmahaas.

**proprioception (Dareenta meelaynta jirka iyo dhaqaaqyada):** Maclumaadka dareenka ee ku saabsan booska, dhaqdhaqaaqa iyo dheellitirka ee u ogolaanaya qofka inuu xakameeyo gacmihiisa iyo lugihiisa isaga oo aan si toos ah u eegin.

**Daabacaad qani ku ah:** Deegaan waxbarasho oo siiya carruurta agabyo badan oo kala duwan oo ay wax ku akhriyaan iyo wax ku qoraan, iyo wakhtiga iyo fursadaha loogu isticmaalo ujeeddooyin maalmeed oo kala duwan oo dhab ah. Goobaha waxbarasho ee noocan oo kale ah waxaa ka mid ah buugaagta, majaladaha, iyo noocyada kale ee daabacaadda; calaamadaha iyo calaamadeeyaha lagu gudbiyo macluumaadka; iyo waraaqaha iyo qalabka wax lagu qoro ee laga helo qolka oo dhan.

**Kobcinta Xirfada:** Shakhsi ahaan waayo-aragnimada waxbarasho ee uu qofku ku hawlan yahay si uu u horumariyo, u kobciyo ama u dhiso aqoontooda iyo xirfadahooda oo uu ugu dabaqo aqoonta ficil ahaan. Waxaa ku jiri kara waayo-aragnimada waxbarasho sida shaqada koorsada, shirarka, fasallada tababarka ama khibradaha waxbarasho ee xiriirka ku saleysan sida hagitaan iyo tababarid.

Nidaamka- waxqabadyada waxbarasho, taageerooyinka iyo agab ee la heli karo si kor loogu qaado xirfadaha, aqoonta, iyo kartida xubnaha xirfada shaqo.

**Bartay/yaqaana:** Dhammeeyay ama karti u leh.

**Qodobbada Ilaalinta:** Shan arrimood oo ilaalin ah ayaa lagu taxay inay yihiin waxyaabaha ugu muhiimsan qoyska xooggan: adkeysiga waalidka, xiriirka bulshada, taageerada la taaban karo ee wakhtiyada baahida, aqoonta barbaarinta iyo korriinka ilmaha, iyo kartida bulsho iyo shucuureed ee carruurta.

**U gudbin u diris:** Ku talinta meel laga helo caawimaad, adeegyo ama macluumaad.

**Milicsi:** Inaad ka fikirto ficillada si aad u horumariso hab dhaqanka.

**Nidaamyada la Xiriira:** Taageerada qoyska, caafimaadka, iyo caafimaadka maskaxda.

**Xiriirka:** Waxay ku lug leedahay isku xirnaanta dareenka, waaraya muddo wakhti ah, ee leh macno khaas ah oo ka dhexeeya laba qof, wuxuu ku dhisan yahay kalsooni wuxuuna u abuuraa xasuus iyo rajooyin dadka ku lug leh.

**Cilmi-baaris ku salaysan:** Istaraatiijiyadaha wax-barida iyo maareynta ee lagu muujiyay cilmi-baaris in ay saamayn togan ku yeeshaan natiijooyinka ardayda.

**Adkeysiga:** Kartida looga gudbo dhibaatooyinka ama lagula qabsado xaaladaha adag ama isbeddelka.

**Daryeel Bixin Warqab ah:** Si degdeg ah ugu dhaqanka siyaabaha la xiriira waxa dhallaanka, socod baradka ama ilmaha yari kuu sheego, siyaabo ka caawinaya

iyaga baahidooda; waxay diiradda saartaa korriinka ilmaha ee dareenka fayo-qabka, ka mid ahaanshaha, sahaminta, wada hadalka/xiriirka.

**Badbaado u ah Hurdada:** Tallaabooyinka ka caawin kara ilmaha inuu si badbaado leh u seexdo oo yarayn kara khatarta Cilladaha Dhimashada Degdeg ah ee Dhallaanka (SUIDS) iyo sababaha kale ee hurdada la xiriira ee dhimashada dhallaanka.

**Taageerid/qotomin:** Taageerada dadka waaweyn ee la bixiyo inta lagu jiro habka waxbarashada ilmaha, mid si shakhsi ahaan loogu habboonaysiiyey heerka xirfada ilmaha iyo qaabka waxbarashada.

**Iskuulka Ku Salaysan:** Barnaamijyada Caruurnimada hore ee ay maamusho degmada iskuulku.

**Wakhtiga Shaashada:** Wakhtiga lagu qaato daawashada telefishinka ama isticmaalka kombayutarada, telefoonada iyo qalabka kale ee elegtarooniga ah ee madadaalada.

**Baaritaanka:** Nidaam baaritaan kooban, fudud oo loo isticmaalo in lagu aqoonsado dhibaatooyinka iman kara ee caafimaadka ama korriinka ee dhallaanka iyo carruurta yaryar ee u baahan kara qiimayn caafimaad, qiimayn ogaanshaha cudurka ama qiimayn waxbarasho.

**Dhaawaca Masiibada la isu gudbiyo/daalka naxariista:** Cadaadiska shucuureed ee ka dhasha marka uu qofku maqlo wax ku saabsan waaya-aragnimada naxdinta leh ee uu la kulmay qof kale. Calaamadeheedu waxay u egyihiin kuwa Cudurka murugada dhibka ka dib (PTSD). Sidaas si waafaqsan, shakhsiyaadka ay saamaysay dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo ayaa waxay isku arki karaan inay dib u soo laabteen dhaawaca masiibada shakhsiyeed ama ay ogaadaan kororka dareen kacsanaan ah iyo falcelinta iska fogaynta ah ee la xiriira soo-gaadhista dhaawaca masiibada ees aan tooska ahayn. Waxa kale oo laga yaabaa inay isku arkaan isbeddel ku yimaada xusuusta iyo aragtida; isbeddelka dareenkooda wax-ku-oolnimada; xaalufka khayraadka gaarka ah; iyo khalkhal ku yimaadda aragtidooda badbaadada, kalsoonida, iyo madaxbannaanida. (NCTSN.org)

**Qaybaha/waaxaha:** Daryeelka carruurta, Head Start/Early Head Start, preschool-ka Dadweynaha/Waxbarashada Hoose, iyo Faragelinta/wax ka qabashada Hore/Waxbarashada Gaarka ah.

**Wax ku barashada dareenka (Sensorimotor):** Waa xilliga koritaanka dhallaanka marka ay naftooda iyo adduunkooda wax kaga bartaan dareenkooda (tusaale, aragga, maqalka, taabashada) iyo dhaqdhaqaaqa jirka.

**Is-xakamaynta:** Kartida lagu dhaqmo iyadoo la ilaalinayo danta mustaqbalka fog iyo awoodda is dejinta ee marka la xanaaqo.

**isla-hadalka nafta:** Ilmuhu wuxuu isla hadlaa; faallooyinka uma jeedino qof kale.

Qof weyn ayaa ka hadla ficilkiisa, fikirkiisa ama dareenkiisa si uu luqadda ugu tusaalayn karo ilmaha; faallooyinka looma jeedinayo ilmaha.

**Goobaha:** Xarumaha, iskuulada iyo guryaha.

**Cilladaha Ilmaha la Ruxay (Shaken Baby Syndrome):** garaacid halis ah, wax ku dhufasho, ama gariirin. nooc dhaawac madaxa ah oo loo arko xad-gudub ilmo, oo ay sababto ruxid, tuurid,

**Taageerada Bulshada:** Xiriirada ku xeeran ilmaha ama qoyska ee ka caawiya ilmaha inuu la qabsado waxa dhacaya. Sababtoo ah carruurta yaryari waxay si buuxda ugu tiirsan yihiin daryeelayaasha si ay u badbaadaan, waxay u baahan yihiin waayo-aragnimada ogaanshaha in daryeelayaasha muhiimka ah ay halkaas u joogaan si ay u ilaaliyaan iyaga, in ay ka caawiyaan inay maareeyaan dareenkooda iyo dareenkooda, oo ay daboolaan baahidooda. Waxay ku saabsan tahay joogitaanka 'la joogista' ilmaha, dhiirigelinta, la saadaalin karo, korinta naxariista leh.

**Dulucda Dhaqan-Bulsheed:** Isku xirka afka iyo dhaqanka iyo bulshada lagu isticmaalo; Inta lagu jiro sanadaha hore, tan waxaa ku jira macnaha guud ee dhaqan-bulsheed ee qoyska ee isticmaalka luqadda iyo xiriirka dadka waaweyn ee daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore iyo deegaanka bulshada ee carruurtu ku horumariyaan luqadda

**Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka Gaarka ah:** Carruurta leh ama ugu jira khatar sii kordhaysa ee jireed, korriin, dabeecad, ama xaalad shucuureed oo sidoo kale u baahan caafimaad iyo adeegyo la xiriira oo ah nooc ama qadar ka baxsan inta ay u baahan yihiin carruurtu guud ahaan (McPherson, 1998).

**Taxadarka caadiga ah:** Taxaddarka caadiga ah ayaa loo isticmaalaa si loo dhimo khatarta gudbinta cudurada faafa ee dhiiga ka dhasha iyo cudurada kale ee faafa ee ka yimaada ilaha la yaqaano iyo kuwa aan la aqoonin. Waxaa ka mid ah gacma-dhaqidda, hab dhaqanka habboon ee neefsashada iyo qufaca, isticmaalka alaaabada difaaca (gacmo-gashiyada, goonnada, maro-gashiyada, maaskarada, indho-xirka ilaalinta ah), ka-hortagga mudista irbadda ama dhaawacyada qalabka kale ee fiiqan iyo hababka lagu nadiifiyo, iyo jeermiska looga dilo walxaha iyo dusha sare ee meelaha.

**Halbeegyada:** Halbeegyada lagu cabbiro waxqabadka. Wax la dejisay oo ay dejisay hay'ad in uu ahaado qaanuunka lagu cabbirayo tirada, miisaanka, xadka, qiimaha, ama tayada.

**Fikir khaldan:** Fikir hore oo fikrad khaldan, sawir, ama aaminsan qof ama koox dad ah laga aaminsanyahay.

**Ardayda:** Dadka ka diiwaangashan barnaamijyada diyaarinta ee carruurnimada hore.

**Cilladaha Dhimashada Degdeg ah ee Dhallaanka:** Dhimashada ilmaha yar ee ku dhacda si degdeg lama filaan ah, oo aan sababta dhimashada isla markiiba la fahmin.

**Qiimaynta Kooban:** Qiimaynta loogu talagalay in lagu qiimeeyo ama lagu cabbiro waxay ardaydu darteen ka dib markay ka gudbeen marxalad gaar ah oo waxbarashadooda ah: tusaale, koorso ama cutub waxbarasho kadib (Growing Glossary of Early Childhood Terms).

**Matalaadda Astaanta ah:** Awoodda garashada ee hal shay uu ka dhigan mid kale (tusaale ahaan, in loo isticmaalo shay si iska yeelyeel ah).

**Taabashada:** La xiriira dareenka taabashada.

**Daqiiqad Wax Laga Baran Karo:** Waxbarid lama filaan ah marka ilmuhu muujiyo xiisaha mawduuc ama marka xaalad ku habbooni dhacdo.

**Macallin:** Qofka dhammeeyey barnaamijka shatiga macallinimada ama maamulka oo si guul leh u qaatay shatiga waxbaridda.

**Kaalmada Farsamo:** Kaalmada Farsamo (TA) waa bixinta taageerooyin la bartilmaameedsanayo oo la habeeyey oo ay bixiyaan xirfadle(xirfadleyaal) yaqaana mawduuca iyo aqoonta waxbarasahada dadka waaweyn iyo xirfadaha si loo horumariyo ama loo xoojiyo hababka, fulinta aqoonta, ama fulinta adeegyada ee qofka qaata kaalmada farsamada (National Association for the Education of Young Children and National Association of Child Care Resource and Referral Agencies).

**Horumarinta Xirfadlaha ee Ku Salaysan Xidriirka (Relationship-Based Professional Development (RBPD) waa erey ballaaran oo loo isticmaalo in lagu tilmaamo afar nooc oo kaalmo farsamo ah oo u adeegsata cilaaqaadka aasaas ahaan:** tababarid, hagid, latashiga iyo la talin (DHS).

**Teknolojiyada:** Qalabka, aaladaha iyo mashiinada kale ama qalabka keena warbaahinta, oo ay ku jiraan telefishinada, kombayutarada, taleefanada casriga ah, raadiyaha, daaraha MP3, gacanka ciyaaha muuqaalka ah (video game consoles), qalabka wax laga akhristo (eReaders) iyo tabledyada (Levin, 2013).

**Dabciga:** Hab-dhaqanka dabeecada shakhsiga iyo jawaab celinta shucuureed ee lagu garto.

**Dhaawaca masiibada:** Dhacdooyinka loo arko inay khatar ku yihiin nolosha ama sharafta jireed ee ilmaha ama qof muhiim u ah ilmahaas; taasoo keenaysa saamayn jireed oo daran sida wadne garaaca xoogga ah, neefsasho degdeg ah, gariirid; oo si buuxda u harqinaysa xeeladaha soo kabashada ilmaha ee la heli karo. (NCTSN.org)

**Kicinta Dhaawaca Masiibada:** Xusuusinta waayo-aragnimada naxdinta leh ee laga yaabo in ilmuhu uu yeesho falcelin aad u daran, oo ay ku jiraan gariir, xanaaq, murugo, cabsi ama ka fogaansho. Jawaabahani waxay noqon karaan kuwo aan la saadaalin karin oo jahawareer ku keeni kara daryeelayaasha. (NCTSN.org)

**Nidaamka dareenka dheelitirka (vestibular):** Dareen, ilaalin oo dib u soo ceshashada dheelitirka iyo halka jirka iyo qaybaha jirku ay joogaan.

**Carruurta Yaryar:** Carruurta marka ay dhashaan ilaa da'da siddeed.